Concerns have been raised about the hygiene of the site, a particular worry as it is the only slaughterhouse in the municipality. These concerns were raised by those working in the butchery and slaughterhouse, and prompted further investigation by a local NGO. This resulted in an assessment that in addition to the need for rehabilitation of both spaces, there was a need to better organize the women, who make up the bulk of the slaughterers and butchers, as well as a need to capitalize on the potential for skins trading as an additional economic benefit of the industry. It was also clear that the fees levied on each animal being slaughtered were not being properly managed to the benefit of the slaughterhouse.

The local NGO received support from an international NGO to fund a portion of the rehabilitation activities. However, the donor was only prepared to support it if they could show that there would be a collaborative initiative between the municipality, the slaughterers and butchers association and the LNGO, and within that framework, women should be equally involved.

Actors:

- Association of Slaughterers and Butchers
- Municipality
- Local NGO
- International NGO

Role of the Community:

The needs and priorities for the rehabilitation activities were the initiative of the community. They are very clear on the fact that they are best placed to articulate their needs to both local NGOs and the municipality. Women in the Association were particularly vocal; however at the time the project began, the women were not well organised and lacked confidence in their roles in the slaughterhouse management. This was partially due to a low level of education and high illiteracy among the women.

Role of the Municipality:

The municipality has provided support for capacity building of the local Association - focusing on the capacity building of women in the association. They were not in favour of initially supporting greater involvement of the women in the association's management until they had developed a capacity building programme to support them.

They have contributed funds in combination with funds from the Association and the local NGO to cover the costs of the rehabilitation. In addition, the contracting of experts to undertake the rehabilitation was carried out by the municipality.

They have been engaged in negotiations with the local NGO and the Association regarding the management and use of fees levied at the slaughterhouse in the future. This is a major issue in terms of control over distribution of expenditures in the municipality. The association reports that with the fees levied by the municipality on the slaughtering, they would be able to afford to further rehabilitate the slaughterhouse - to address the key needs of water supply and lighting - and would be able to better manage the resources to directly benefit the running of the slaughterhouse.

Outcomes of the Initiative:

Improvements to the Slaughterhouse - new drainage system installed to ease cleaning of the site. This has resulted in the cleaning time for the slaughters to be cut in half. There is no longer a need for the slaughterers to pay labourers to clean for them, as they are able to sluice the area with water which is drained away, thus saving money.

Organisation of the Association of Butchers and Slaughterers - the association is better organized now - according to the women, they feel more united, and are more confident in their own abilities as a result of the training provided to women in the association. They feel that their relationship with the municipality is a positive one, and articulate clearly the need for local leaders, as elected officials, to be accountable to the needs of the population.

Hides and skins processing - the improvements in the slaughterhouse have meant that there are better quality skins available for trading as an adjunct economic benefit from the slaughterhouse. However, one major challenge in this regard remains, that the light in the slaughterhouse is not sufficient, which often leads to damaged skins. Negotiations are continuing with the municipality and the private power company to provide regular electricity to supply lighting in the slaughterhouse.

Challenges and Obstacles:

Resources - one of the key challenges identified by all actors in the process was the lack of, or mismanagement of resources for the slaughterhouse. The overall lack of resources is a general problem - faced by the local NGO, the association and the municipality. It is clear from the success of this first initiative, that ???

Future Needs and Activities:

Adequate Lighting

One of the other key problems in the slaughterhouse is the lack of adequate lighting. This is a particularly important problem as the slaughtering is done at night, and lack of light can cause serious problems, as well as damaging skins that otherwise could be traded for further economic benefit.

Regular Water Supply

The supply of water regularly to the slaughterhouse is also critical for the effective operation of the new drainage system. At present, the water tank that supplies the slaughterhouse is not sufficient to meet all the needs. Negotiations are underway to supply piped water to the slaughterhouse; however there appears to be confusion over who is responsible for water supply, the municipality or the Ministry of Water and Minerals.

⁴ The labourers who previously cleaned the slaughterhouse were paid 50% by the municipality and 50% by the slaughterers. These labourers have been reassigned to different work in other parts of the municipality.

Objectives of Women in the Association:

- Improve capacity of women in the slaughterhouse to improve ability to participate in management issues
- Reduce time use (in terms of cleaning and maintenance)

Role: Local NGO**Considerations:**

- Requirements of the International NGO
- Wish to ensure empowerment of the community in the rehabilitation process

Objectives:

- To promote greater involvement of women in the management of the slaughterhouse
- To improve the hygiene of the slaughterhouse
- To stimulate economic development through fostering other activities
- To promote new forms of partnership with the municipality

Role: Municipality

Your group is made up of municipal leaders who have been approached regarding possible rehabilitation of the slaughterhouse.

Considerations:

- Resources - particularly the issue of management of the user fees in the slaughterhouse
- Hygiene problems in the community and the need to address these at the source/cause
- Prioritisation of services in the municipality

Objectives:

- Promote economic development in the municipality
- Develop a positive relationship for the better management of the slaughterhouse
- Ensure adequate resource allocation, but maintain maximum possible control over fees and expenditure

GLOSSARY OF TERMS:

1. Gender:

The different roles, responsibilities, access and opportunities that men and women have in society based on their sex.

2. Gender Equality:

Men and women having the same level of access and control over roles, choices in their lives, and resources.

3. Gender Mainstreaming:

Making sure that considerations about men and women are integrated in every activity, and not viewed as a separate thing.

4. Gender Analysis:

Looking at the differences between men and women in terms of their access, control, opportunities, roles and responsibilities in order to better understand all the different members of society.

Exercise - Gender and Sex: Responses

The responses refer to S= Sex; G=Gender.

- | | |
|---|---|
| 1. Women give birth to babies, men do not. | S |
| 2. Little girls are gentle, little boys are tough. | G |
| 3. Most Qat sellers are women. | G |
| 4. Women can breast feed babies, men can bottle feed babies. | S |
| 5. In ancient Egypt, men stayed at home and did the weaving.
Women handled the family business. Women inherited property
and men did not. | G |
| 6. Men's voices break at puberty, women's do not. | S |
| 7. Men own livestock, women care for livestock. | G |
| 8. Women are patient, men are impatient | G |



European
Commission

BARNAAMIJGA TABABARKA HAB-
MAAMULKA DEEGAANKA IYO
HOGAAMINTA FIICAN



UN-HABITAT

LAMAANAHA OO DUMARKU KU LUG LEEYIHIIN HAWLAHA HABMAAMULKA DEEGAANKA

LAMAANAHA IYO KA QAYBGELINTA HAWEENKA MAAMULKA DEEGAANKA

B UUG XAMB AARS ANFIKR ADAHA TABABARKA IYO AALADAHA HAWLGALKA

MAHADNAQ:

Qoraagu wuxuu marka hore jecelyahay inuu halkan uga mahadnaqo ka qaybgalka iyo waxtarka ururro kala duwan oo Soomali ah, tababaryaasha UN Habitat, Dowladda iyo sidoo kale Bulshada Rayidka ah kuwaasoo u hurey wakhtigooda iyo fikradahooda qaaliga ah diyaarinta buugan.

Shaqaalaha barnaamijka Tababarka Ismaamul- Wanaaga iyo Hogaaminta ee UN Habitat ayaa sidoo kale ka gaystay kaalmo qiimo leh, iyo gacan siin intii lagu jiray diyaarinta buugan.

Buugan waxaa lagu diyaariyey gacan siinta joogtada ah ee shaqaale dhowr ah iyo la taliyayaal ka tirsan ROAAS UN-HABITAT, oo akhriyey nuquladii qabyada ahaa kuna biiriyey faalo waxtar leh.

Buugani wuxuu qayb ka yahay dadaalka Qaybta Masiibooyinka, Dagaalada iyo Amniga ee UN HABITAT ay gacan ku siinayso barnaamijyada laga fulinayo goobaaha howlgalka, gaar ahaan dhinacyada muhiimka ah sida Lamaanaha oo la dhexgeliyo (lagu dabakho) xaaladaha dagaalada/khilaafaadka ka dib.

Qoraalka iyo ururinta buugan waxaa UN HABITAT u sameeyey Meredith Preston

SHAXDA MOWDUUCYADA.

Gogol dhig	5
Sida loo isticmaalayo buugan	8
Maxay muhiim u tahay ku darida Lamaanaha habmaamulka maxaliga ah	6
Hogaamiyashayaasha deeganka ee ka qaybgelinaya haweenka habmaamulka deegaanka	9
Lamaanaha xaalada (argtida) soomaalida	13
Qur'aanka iyo Lamaanaha	16
Fikradaha iyo Tabaha	19
Lamaane	19
Sinaanta Lamaanaha:	22
Taabagelinta Lamaanaha	26
Horumarinta haweenka iyo lamaanaha iyo horumarka	27
Lafagurka lamaanaha	29
Lamaanaha iyo ka qayb galka	35
Hogaaminta Maxaliga iyo Sinaanta lamaanaha: Doorarka Hogaanka Maxaliga	38
Ku darista lamaanahaa doorarka kala duwan ee hogaanka maxaliga	36
Tababar iyo agab howlgal	46
Hordhaca Tababarka iyo Aaladaha Howlqalka	42
Macluumaad la xiriira tababarka: Su'aalo soo noqnoda oo la isweydiyo	48
Waxyaabaha laga aaminsanyahay lamaanaha	50
Xulashada Nooca Jinsiga ilmahaga Choosing the Sex of Your Child	50
Aragtida Raga iyo Dumarka ee dhaqanka Soomaalida	51
Astaynta Lamaanaha ee xaalada Soomaalida	51
Kala saraysiin iyo dood ku saabsan caqabadaha haysta ka qaybgalka haweenka	52
Isticmaalka wakhtiga ee Raga iyo Dumarka:	56
fikirka lamaanaha ee ku saabsan mab-maamulka maxaliga	58
Isticmaalka Wakhtiga, Silsilada Sinaan la,aanta iyo D/hoose	57
Waxaan Dhisnay Bar Caafimaad qofna ma iman	61
AGAB: Helida Shaqada iyo Astaynta Khayraadka	61
Dayactirka Kawaanka iyo Goob Hilibka Lagu Iibiyo ee D/hoose X	61
Eray Bixin:	70

WAA MAXAY LAMMAANE?

Lammaane waa habka raga iyo dumarku midba midka kale ula xiriiro, wuxuna la xiriiraa doorarka iyo masuuliyadaha ay ku leeyihiin bulshada dhexdeeda oo ku saleysan jinsiyadoodda , waana sida raga iyo dumarku karti ugu leeyihiin helida waxyaabaha kala duwan si ay gacanta ugu hayaan xulashooyinka noloshoodda.

Xaaladda Soomaalidda, aragtidda iyo rajooyinka raga iyo dumarku way kala duwan yihiin meelaha kale (adduunka).

Fikradaha ku saabsan doorarka raga iyo dumarka ee dhaqan Soomaaligu waa mid kakan oo isbed-bedalaaya.

HORDHAC

Waxa caalamka oo dhan isa soo taraya garwaaqsiga la garwaaqsanayo xuquuqda sinaanta ragga iyo dumarka, ahmiyadda sinaanta lamaanaha (gender) iyo ka qayb-qaadashada dumarka ee xasilinta nabadda, deganaanshaha beelaha (social stability) iyo horumarinta dhaqaalaha. Arrimahani waxay ka tarjumayaan Go'aanka Beijing (Beijing Declaration) iyo Ardaaga Hawl-Galka (Platform for Action) iyo Shirweynaha Tirtiridda nooc kasta oo ah Duudsigu Xaqqa Dumarka (Convention on the Elimination of all forms of Discrimination Against Women CEDAW) oo dhamaantood ku dabrada in Ururka Qaramada Midoobay uu horumariyo sinaanta lamaanaha, uuna dhaqan-geliyana qadyadaha lamaanaha si ay u noqdaan bartilmaameedyada dhammaan hawlaha uu fuliyo Ururka Qaramada Midoobay.

Meelaha dagaaladu ka jiraan ama gaar ahaan meelaha aan weli ka soo kaban dagaalada waxa lagama maarmaan ah in la fahmo inay muhiim tahay in si isu dheeli tiran loo sugo ka qayb-qaadashada dumarka iyo ragga, iyo in la fahmo baahidooda kala gedisan si loo adkeeyo hirgelinta nabadda. Sideedabana, waa arin adag in la hanto, waxaana loo baahan yahay farsamooyin hufan si loo taakuleeyo waddamada maraya xiliga kala guurka ah kana soo kabanaya dagaalada.

Hirgelinta fikradda lamaanahu waa arin aad muhiim ugu ah horumarinta deegaamada. Ragga iyo dumarku waxay si kala duwan u kala isticmaalaan uguna kala dhaqmaan magaalooyinka. Horumarinta magaalooyinkuna waa inay ka turjuntaa hawl-galada iyo mas'uuliyadaha kala duwan ee lamaanaha. Arinkanise waxa keli ah ee uu ku hirgeli karaa waa haddii ragga iyo dumarkuba ay si siman uga qayb qaataan maamulada maxaliga ah iyo maamulidda magaalooyinka.

Xubnaha la doortay ee dawladaha hoose iyo hoggaamiyayaasha maxaliga ahiba waxay dawladda wax-ku-ool ah ka qaataan maamulidda sugan ee magaalooyinka. Goobaha ay dagaaladu ka soo qaxeen ee iminka maraya xiliga kala guurka ah waxaa ka jira hagardaamooyin mucaqadaysan. Taageeridda horumarinta itaalka goobahaasi waxay tahay bartilmaameedyada UN-HABITAT ee la xidhiidha Ololahooda Caalamiga ah ee ku waajahan Maamulidda Magaalooyinka (Global Campaign on Urban Governance). Dhinaca Soomaalidana arinkani waxa uu noqonayaa nuxurka ujeedooyinka UN-HABITAT ee hawlaha Waanaajinta Maamulada Maxaliga ah iyo Mashruuca Tabaraka Hoggaanka ee uu maalgeliyo Isbahaysiga Yurub.

Mashruucani waxa uu adeegsanaya buugaagta taxanayaasha ah ee UN-HABITAT ee la xidhiidha hoggaanka maxaliga ah iyo xirfadaha maamulka, xalinta xurgufaha iyo wadaagga qorshaynta (participatory planning) kuwaasi oo dhamaantood lagu wada tijaabiyay daafaha adduunyada ka hor intii aan lagu dabbaqin loona soo gudbinin shacabka Somaaliyeed. Si loo turxaan bixiyo taxanayaashan qoraalka ah waxa la diyaar gareeyay qoraal cusub oo ku salaysan hirgelinta fikradda lamaanaha iyo ka qayb gelinta dumarka arimaha la xidhiidha maamulada maxaliga ah.

Buuggan "Lamaanaha iyo ka qayb qaadashada Dumarka ee Maamulka Maxaliga ah: waa buug qeexaya fikradaha, tababarada iyo qalabka" waa iskuday looga gol leeyahay in laga faa'iidaysto khibradaha gobolka laguna soo bandhigo arimaha guud ee la xidhiidha sinaanta lamaanaha oo loo soo bandhigi doono hab waqici ah (practical) kaasi oo tixgelinaya caqabaadka iyo fursadaha ragga iyo dumarka Soomaaliyeed ka hor yimaadda, iyo sida ay u saamayn karaan hawl-galadooda ku aaddan magaalooyinka. Buuggan oo af Soomaali loo tarjumay laguna tijaabiyay dhowr magaalo oo gobolka oo dhan ah, waxa cadaatay inuu yahay farsamo meel-mar ah oo loo adeegsan karo meelaha kala guurka ku jira waxaanuu ku salaysan yahay waqaca Muslimiinta.

Buuggani waxa uu ka kooban yahay dhowr farsamo iyo hawl-gallo ka caawin doona hoggaamiyayaasha maxaliga ah sidii ay si hufan ugu fahmaan fikradda lamaanaha iyo sidii ay fikraddaasi ugu xidhiidhin lahaayeen hawlaha ay iyagu qabtaan. Waxa kale oo laga

helayaa qalabbo loo adeegsado si waaqici ah (practically) si loogu dabbaqo fikradda lamaanaha ee la xidhiidha hawlaha hoggaaminta dawladaha hoose

Waxa la rajaynayaa in buuggani uu noqon doono marjac qiimo badan oo loo adeegsan karo masraxa Soomaaliyeed si loo hirgelyo fikradda lamaanaha looguna dabbaqo hawlaha la fulinayo iyo in la baahiyo ahmiyadda ay leedahay in dumarka laga qayb geliyo horumarinta shacabka Soomaaliyeed. Maadaama ay caalamiyan muhiim tahay sinaanta lamaanaha iyo ka qayb gelinta buuxda ee dumarka hawlaha horumarinta waxaanu u aragnaa inuu buuggani yahay mid aad muhiim ugu ah marjac laga diyaariyo aqoon-dhisidda hawlaha hirgelinta fikradda lamaanaha ee laga hirgelinayo dalalka kale iyo gobolada kaleba.

Ugu dambayn, waxaan u mahadnaqayaa Ms. Meredith Preston waxtarkeeda buuggan iyada oo ah qoraaga mudan ee buuggan, iyo waxtarka khubarada fikradda lamaanaha iyo dumarka firfircoon ee Somaliland, Puntland iyo Koonfur-Dhexe Soomaaliya, iyo kooxda UN-HABITAT ee Habsami Maamulka Maxaliga ah iyo Mashruuca Tababarka Hoggaaminta.

Anna Kajumulo Tibaijuko
Ku-Xigeenka Xooghayaha Guud
UN-HABITAT

GOGOLDHIG

Ujeedada buugan waa in la eego xiriirka u dhexeeya Lamaanaha iyo Hab Maamulka deegaanka. Maxay tahay nuxurka in raga iyo dumarka si siman uga qayb qaataan hab maamulka deegaanka, iyo sida ay u cawin karto horumarka wax ku oolka ah ee D/Hoose? Sidee hadaba loogu guulaysan karaa in la gaaro arinkaa xaalada Soomaaliya? Kuwani waa su'aalaha muhiimka ah oo caawin doona sida buugan loo waajihayo.

Ka qaybgalka siman ee wada tashiga ah, go'aan gaarida iyo dhamaan dhinacyada hab maamulku waxay caawisaa in la abuuro bulshooyin wax soo saar badan, karti leh oo guulna gaadhi kara. Iyadoo lag darayo dhamaan codadka dhalinyarada, odayada, dadka laga tirada badan yahay, raga iyo haweenka, waa wadnaha hab maamulka fiican. Horumarinta sinaanta lamaanaha iyo inay si is le'eg uga qayb galaan raga iyo dumarka howlaha muhiimka u ah bulshada.

Hogaamiyayaasha dhaqameedku waxay qaataan doorarka udub dhexaadka u ah maamulida hawlaha khuseeya dadweynahooda. Waa muhiim in la fahmo caqabadaha hor taagan sinaanta ka qaybgal raga iyo haweenka qaababka hab maamulka deegaanka.

Buugani wuxuu bixini doonaa bandhiga lamaanaha iyo dhawr tabood oo sal u ah argtiyaha kudarida lamaanaha ee hawlaha D/Hoose. Buugani waxaa sidoo kale loo sameeyey inuu noqdo xog tixraac ee tababarada lamaanaha oo si balaadhan u saameeya xaalada soomaaliya si kor loogu qaado sinaanta ka qaybgalka raga iyo dumarka ee dhamaan shaqooyinka meel kasta ooy tahay iyo dhamaan heerarka bulshada.

Buugani waa xog isku dhafan oo loogu talagalay Taxanaha Buugaagta Tabarada Hogaamiyayaasha la doortay, kuwaasoo mid walba uu si gaar ah u eegayo doorarka kala duwan ee xildhibaanada deegaanka iyo sida doorkoodu xiriir ula leeyahay arimaha Lamaanaha ee hab maamul wanaaga. Taxanaha Tababarada Hogaamiyayaasha la doortay waxaa loo qorsheeyey inuu gacan ka siiyo hogaamiyayaasha deegaanka si ay u metelaan wadaniyiinta, siiyaana hogaamin bulsho ayna si habsami ah ula shaqeeyaan dowlada dhexe, maarayn ahaan, farsamo ahaan iyo shaqaalaha xirfadlayaasha ah ee D/Hoose iyo ururada kale ee ka dhisan deegaanka. Nuqulkan iyo taxanayaasha kaleba waxaa loogu talagalay inuu xoojiyo awooda hogaamiyayaasha deegaanka inay noqdaan kuwa metela wakiilna ka ah xubnaha kala duwan ee bulshada, rag iyo dumarba.

Waxaa xusid mudan baahida loo qabo in buugan loo tarjumo Soomaali. Fikirka lamaanuhu wuxuu dhaliyaa inay adkaato in nuxurkiisa lagu tarjumo luuqadaha kale. Waxaa xusid mudan inay adag tahay in Afka Soomaaliga laga helo eray ku haboon lamaanaha (Gender), kulamo ayaa lala yeeshey kooxo xog ogaal u dhuun daloola inay isku raacaan erayga ugu haboon ayaa socon doona si go, aan looga gaaro.

SIDA LOO ISTICMAALAYO BUUGAN:

Ujjeedada buugan waxay tahay inuu siiyo tababarayaasha aaladdo taxane iyo qaab si ay ugu tababaraan hogaamiyayaasha deegaanka ee arrimaha lamaanaha iyo hab maamulka deegaanka. Buugaan waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa inuu u noqdo xog tixraac hogaamiyayaasha deegaanku inay si siman uga qayb galiyaan raga iyo dumarka qorshaynta D/hoose iyo howlaha kaleba. Buugani wuxuu diirada saaraya kuna jihaysan yahay magaalaynta deegaanadda, iyadoo la aqoonsanayo caqabadaha cusub ee haysata hogaamiyayaasha deegaanka ee xaalada Soomaaliya taasoo ka dhalaneysa magaalaynta. Dogleg ah.

Qaybta Koowaad ee buugan wuxuu waajihayaa aragtida lamaanaha iyo fikrado la xiriira. Qaybtan, waxaa kaloo loo isticmaali karaa sida wax-is barida, in ay hogaamiyayaashu ka tixraacaan fikirka iyo qaab howlgalka lamaanaha. Fikradahani waxay ku xiran yihiin qaybta labaad ee aaladaha iyo layliyada

Qaybta Labaad waxay ka kooban tahay tababaro iyo aalado howlgal oo diirada saaraya horumarinta qaab ay tababareyaashu ku hagaan hogaamiyayaasha si ay uga fikiraan wuxuu yahay lamaanuhu, hanaan, sida habmaamulka D/hoose iyo lamaanuhu isugu xiran yihiin ayna u muujiyaan muhimada ka qaybgal loo siman yahay ee raga iyo dumarku ay udub dhexaad u tahay hab maamul hufan, iyo siday ugu isticmaali lahaayeen fikirka lamaanaha si ay u noqdaan hogaamiyayaal aad wax ku ool u ah.

MAXAY MUHIIM U TAHAY KU DARIDDA LAMAANUHU HAB MAAMULKA DEEGAANKA?

Dadku waxay inta badan dareensan yihiin in lamaanuhu uusan xiriir la lahayn shaqadooda taasi oo culeys dheeraadda ku ah wakhtigooda. Tani waa run gaar ahaan xaalada hab-maamulka maxaliga, markay dadku ku shaqaynayaan dhaqaale aad u yar, xaga dadka iyo maaliyadaba. Hadaba maxaa loo diyaariyey buugan? Lamaanuhu wuxuu ku saabsan yahay in si siman dadka loo howlgeliyo-Raga iyo Dumarka- howlaha dadwaynaha. Marka ay Dhoose ay awoodi karto inay wacyigeliso raga iyo dumarka, yar iyo waynba, D/hosse waxay noqotaa mid wax ku ool ah, hawlaheeduna guul buuxda gaadhi doonta, si wanaagsana u joogteysa.

Lamaanuhu wuxuu khuseeyaa raga iyo dumarka, wiilasha iyo gabdhaha iyo siday u wada dhaqmaan (macaamilaan, xiriiraan) bulshadooda. Haday D/hoose fahanto waxtarka xooggan iyo in howlaha ay qabtaan aysan wax ka qabanayn baahiyaha muhiimka ah ee dadwaynaha oo dhan, balse ay noqon doonaan kuwo aad karti u leh wax ku oola ah,

Raga iyo dumarkuba waxay yihiin xubno muhimad is le'eg ku leh bulshada doorte/la doorte ama D/hoose. Baahiyahooda iyo wixii khuseeya waxay si isle'eg raad ugu yeelan karaan wanaajinta bulshada. Inta badan codka dumarka lama siiyo qiime la mid ah kan raga, waana yar tahay in la maqlo. .Aragtida iyo rayiga dumarku wuxuu muhiim u yahay horumarka iyo wanaaga bulshada waxayna bixin karaan waxtar kala duwan, gaar ahaan qorshaynta D/hoose. Lamaanaha oo lagu daro (dabakho) Habmaamulka deegaanku waxay caawisa in codka raga iyo dumarkaba si siman loo tixgeliyo.

Aragtida lamaanuhu waxay horumarinaysaa wax ku oolnimada Hab-Maamulka deegaanka.

Sidee?

- Dadka oo sis man ugu lug yeesha  La Halahaansha bulshada oo kordha
- Lahaansho sare  Fulinta Howsha iyo joogteynta sahlanaata
- khayraadka oo loo qorsheeyo dadwaynaha oo dhan, rag iyo dumarba
 Waxaa jiraya dhaqaale iyo khayraadka oo kordha, sidaa darteed D/hoose waxay noqotaa mid aad wax ku ool u ah .

Aragtida Lamaanuhu waxay horumarisaa horumarinta Bulshada

Sidee?

- Wax so saarka bulshada oo guud ahaan kordha dhanka:
 - o Waxbarashada
 - o Xirfadaha
 - o Ka qaybgalka dhaqaalaha

Tani waxay dhalinaysaa xirfad sare iyo karti shaqo xoogeed, fursadaha dhaqaalaha oo korodha, iyo wax soo saarka dadka ee D/hoose oo kordha si loo qorsheeyo. Gaar ahaan taageeridda dumarka inay si siman ugu lug yeeshaanoo ka qaybgalaan fursadaha dhaqaalaha waxay raad ku yeelanaysaa dhaqaalaha oo dib ugu noqda bulshada maadaama ay dumarku u badan yihiin inay lacagtoodu ku maalgeliyaan bulshada iyagoo wax ka taraya qoowsaska IWM.

Waa maxay sababta hogaamiye deegaan loogu darayo aragtida Lamaanaha?

- Hogaamiye ahaan, hadaan wada heli karo, gaari karo bulshada inteeda badan, waxaa ii fududaanaya inaan wacyigeliso helida khayraadka maaliyad iyo xoogba (dad).
- Hogaamiye ahaan, hadaan fahmo baahiyaha iyo awooda wadaniyiinta waxaan gaari karaa go'aan wanaagsan.
- Hogaamiye ahaan, hadaan ka qayb geliyo raga iyo dumarkaba, waxay iga caawineysaa inaan qorsheeyo howlo iyo adeeg waxtar leh.
- Hadii labadaba dumar iyo ragba ay la howlgeliyo, waxay ii fududaynaysaa hogaamiye ahaan inaan hirgeliyo barnaamijyada D/hoose

- Hogaamiy ahaan, hadaan dhegaysto dumarka iyo sidoo kale ragaba, waxaan helayaa aragtiyo dhibaatooyin kala duwan. Tani waxay iga caawineysaa inaan la imaado tabo aan ku xallinayo dhibaatooyinkaas.

Waayo Hadaba Buugan?

Buugani wuxuu eegayaa nuxurka iyo macnaha lamaanaha, waxa uu yahay macnaha ku jira fikirka /aragtida lamaanaha ee hab maamulka kaa soo waxa u dhexeeya kala duwanaanta raga iyo dumarka, iyo sababta ay taasi gacan uga siin karto hogaamiyayaasha hawl maalmeedkooda. Xiriirka u dhexeeya hab maamulka waxtarka leh ee D/hoose iyo ka qaybgalka dumarka ayaa lagu bayaanin doonaa buugan. Buugani wuxu isugu jiraa fikrado iyo aalado si dhab ah loogu hawlgalo, si ay uga caawiso hogaamiyayaasha isticmaalidda aragtida lamaanaha ee shaqadooda.

Tusaale:

Sidee raga iyo dumarkuba si kala duwan raad ugu yeeshaan Hab-Maamulka D/hoose?

Raga iyo dumarku waxay u isticmaalaan (uga faa'iidaystaan) adeega D/hoose si kala duwan. Habka adeega loo qorsheeyey wuxuu ku adkaan karaa nolol maalmeedka raga iyo dumarka. Haday hawshu ay aad u adkaato, aanay culaysiso howlaha kale, waxaa yaraanaya wax soosaarka bulshada-dhaqaale ahaan iyo dhinacyada kaleba, horukaca D/hoosena waxaa gaadhaya dhibaato.

Hadii uu jiro adeeg biyo oo u sahla dumarka biyo dhaaminta, una dhowra wakhtigooda, waxay u heli karaan wakhti kale oo ay kaga qaybgalaan howlo kale oo waxtar u ah D/hoose- sida howlaha kobcinta dhaqaalaha.

Sidee raga iyo dumarku si kala duwan wax u tari karaan hab-maamulka D/hoose?

Dumarku waxay bulshada dhexdeeda ku leeyihiin saab-shaqooyin kala duwan- Dumarku waxay awood u leeyihiin abaabulka bulshada. Tani waa muhiim marka D/hoose doonayso inay isu keento bulshada markay howl gaar ah socoto. Raga iyo dumarkuba si kala duwan ayay u arkaan baahiyaha kala duwan ee bulshada- Haday D/hoose doonayso inay qorshayso hawl fulin wax ku ool ah, waxay u baahantahay inay u xil saarto khabiirada raga iyo dumarka ee bulshada dhexdeeda. Sheekadan soo socota ayaa iftiiminaysa xiriirkan.

Waxaan dhisnay Bar Caafimaad qofna ma imaan:

D/hoose ayaa go'aansatay inay jirto baahi loo qabo adeeg caafimaad oo ay D/hoose samayso. Go'aankan ayaa waxaa lagu gaaray wada tashi kooban oo lala yeeshay bulshada. D/hoose ayaa la kulantay oday dhaqameedyada, iyo ganacsatada ooysan ku jirin haweenku. Dumarka laguma casumin kulankan, loomana sheegin kulankan.

D/hoose waxay astaysay goobtii laga dhisi lahaa barta caafimaadka. Bartii caafimaadka ayaa noqotay goob cidla ah usbuucba usbuuca ka dambeeya. Waa la ogaa inay jirto dad badan oo u baahan daryeelka caafimaadka, laakiin ma jaran xildhibaanadu sababta loo imaan waayey barta caafimaadka.

Markay waraystay haweenka Bulshada, dumarku waxay sharax ka bixiyeen in dhibtu aysan ahayn La,aanta adeeg caafimaad. Dadku waxay la jiranayeen goobaha caafimaadka oo aan nadiif ahayn- dadkuna ma rabaan inay tagaan barta caafimaadka gebi ahaanba sababtoo ah jiro un bay ka qaadaan markay tagaan barta caafimaadka. Dumarka tagay barta Caafimaadka ee cusub kumay qanacsanayn- goobta caafimaadka meesha laga dhisay aad ayay uga fogayd, umana dhowayn goobaha ay gaaraan baabuurta la raaco wadooyinay maraan, shaqaalaha oo dhama waxay ahaayeen rag, mana jirin goobo gaar u ah dumarka oo ku taal barta caafimaadka.

Sidaa darted D/hoose ayaa la hadashay haweenka bulshada, oo ahaa ka faa'iidaystayaasha koowaad, kuwaasoo aad u fahamsanaa baahidooda, waxayna go'aansheen sidii looga dhigi lahaa barta caafimaadka mid waxtar leh. Dumarkii waxay ka abaabuleeh beesha olole wacyigelin fayadhowr, D/hoosena waxay ogolaatay inay dayactirto goobta ayna hagaajiso nadaafada (Sixada) barta caafimaadka. Markii haweenka beesha ku qancen waxtarka iyo faa'iidada caafimaad ee ay ka helayaan iyaga iyo dadka ku taxaluqa, waxay bilaabeen inay isticmaalaan barta caafimaadka, hawlgalkii barta caafimaadkuna wuxuu noqday mid guul gaadha.

D/hoose waxaa u kaydsami lahaa wax yaabo qiimo leh sida -dhaqaale- wakhti, xooga iyo maaliyada hadii dumarka bilawgii hore laga qaybgelin lahaa, maadaama aragtidoodu ay muhiim u ahayd fahamka dhibaataada iyo qorshaynta adeega.

HOGAAMIYAYAASHA DEEGAANKA EE KA QAYB GALIYA HAWEEKKA HABMAAMULKA DEEGAANKA

Qeexid:

Doorka hogaamiyayaasha deegaanka ee ka qayb galinta haweenka habmaamulka D/hoose waxay cadaysaa aragtiyaha kala duwan ee haweenka iyo raga loo shaqaaleeyo iyo in si buuxda loogu daro go'aan gaarida iyo habaynta mudnaanta D/hoose

Shaqada hogaamiye deegaan waa inay hubiso in haweenku si siman uga qayb galeen dhamaan dhinacyada habmaamulka D/hoose, taasi oo ay ku jiraan adeegsiinta iyo qorshaynta D/hoose

Guud mar:

Qaybtan waxaa lagu eegi doonaa qaar uu hogaamiyaha deegaanku u baahan doonaan si ay u fahmaan marka ay u isticmaalayaan (ku dhafayaan (aragtiyada raga iyo dumarka howshiisa / howsheeda. Tusaale ahaan, hab fikirka kala duwan ee howlaha dumarka ku jihaysan dumarka iyo taabagelinta lamaanaha waxaa lagu soo bandhigi doonaa habab u sahlaya doorka hogaamiyaha deegaanku inuu noqdo mid lamaanaha u horumariya si siman.

daalacid (Reflection)

Qaado daqiiqad ama laba si aad uga jawaabto hawshan ka hor intaadan akhrin qaybta fikradu ku fadhido (Concepts). Tani waa tii ugu horaysay ee baaritaan dhowr ah oo gacan kaa siinaya inaad si wacan u isticmaasho fikradaha lagu soo bandhigay buugan iyo kuwa soo socda. Waxaa kaloo loo isticmaali karaa furitaanka fakir-isdhaafsi marka loo qabanayo tababaro hogaamiyayaasha deegaanka .

LAMAANAHA XAALADA (ARGTIDA) SOOMAALIDA

Lamaanaha (Gender) waxaa inta badan loo arkaa inuu yahay aragti (fakir) reer Galbeed uuna yahay

Markaan ka fekero lamaaha, arimahan soo socda ayaa maskaxdayda ku soo dhaca:

1.

2.

Markaan suureeyo doorkayga inaan si siman u horumariyo lamaanaha (Gender), arimahan soo socda ayaa maskaxdayda ku soo dhaca:

1.

2.

Markaan suureeyo doorkayga caawinaya ka qaybgal balaaran ee haweenka, arimahan soo socda ayaa maskaxdayda ku soo dhaca:

1.

2.

Markaan suureeyo sinaanta lamaanaha ee xaalada Soomaaliya, arimahan soo

mid ku cusub dhaqanka Soomaalida. Si walba ha ahaatee fikirka ku saabsan macnaha inaad noqoto nin ama haween wuu ka jiraa dhaqan walba. Waxa laga filayo ninka ama haweenayda dhaqanka Soomaalida wuu ka duwan yahay sida loo arko raga ama dumarka dhaqanka reer galbeedka, si walba ha ahaatee fikradahani waa jiraan waxayna ku xiran yihiin dhaqanka laftiisa. Fikradahani waa kuwa socda oo isla bedela wakhtiga, maadaama dhaqanka laftiisu u isbedalayo lana qabsado xaqiiqooyinka cusub.

Waa muhiim inaan xusuusano in Lamaanuhu uu khuseeyo raga iyo dumarka iyo siday u wada dhaqmaan bulshada dhexdeeda. Fikirkani siyaabo kala duwan ayuu uga jiraa dhaqan walba. Sida loo sharaxo ayaa caawineysa inay muujiso i soo bandhigo fikirka raga iyo dumarka ee dhaqanka. Sidaa darteed, hadaan eegno taariikhda Soomaalida, dhaqanka iyo caadada ayaa naga caawinaya inaan muujino fikirka lamaanaha ee aragtida Soomaalida.

Dhaqanka Soomaalida, gabayo iyo heeso badan ayaa laga qoray kuwaasoo muujinaya sinaan la,aanta dumarka iyo raga. Mid ka mid ah gabayadaa ka mid ah waa:

Hohay, gabadhaydiyee, ragu wayna
Heereen

Meeshaan haween jirin
hallo laguma maalino,
fardo laguma heensayn.

Maahmaahyada dhaqanka Soomaalida aad bay wax uga tarayaan in la sharaxo sida raga iyo dumarka bulshada dhexdeeda looga arko, doorarka laga filayo inay ciyaaraan, iyo sida midba kan kale ula dhaqmo. Maahmaah baa tiraada:

Haduu ninku kaa faras fiican yahay, bil baad ku gaari kartaa, haduu kaa naq fiican yahay sanad kuma gaari kartid. Laankiin haduu kaa xaas fiican yahay weligaa ma gaari kartid.

Waxaa jira maahmaahyo la mid ah oo cabirayo fikrado/dareen la mid ah, oo aad ku sheegi karto awoodda ninka xaaskiisa marka aad isaga u eegto, iyo waxyaalo la mid ah. Maahmaahyadani waxay muujinayaan muhiimada dumarka ee bulshada soomaalida , sidoo kale waxay iftiiminaysa inay qaataan doorar taageerid ninka , ka danbayn dhisida ninkooda taasi oo laga arko xidhiidhka ninkeeda halka ay xuquuq doodad horeysiin lahaayeen.

Aragtiyo badan oo la xiriira sida loo arko haweenka iyo doorka haweenka ee bulshada dhexdeeda ayaa laga arki karaa maahmaahaha sida:

Hadii gabadhu gurigeeda la timaado dheri ka jebi
Hadii kale ma gaari kartid salka kalsoonideeda

Marka laga eego ama la barbardhiga awooda dumarka kan raga, gaar ahaan maahmaahaha Dhaqanka Soomaalida waxay leeyihiin Kal caana-galeen (Hooyada) kas ma galo, taasoo ka dhigaysa in dumarku ka garaad yar yihiin raga. Lid ahaan sheekooyin kale ayaa tibaaxaya in ilmaha naaska la nuujiyo uu ka maskax wanaagsan yahay ilmaha aan naaska la nuugin. Sidaa darteed haweenku waa kuwa xigmada ku siiya ilmaha naasnuujinta.

Heesaha ay hooyadu u qaado ilmaheedu waxay ka turjumaan fikirka iyo doorka kala duwan ee laga filayo raga iyo haweenka ee bulshada dhexdeeda. Hees dhaqameedka loogu heeso caruurta laguna dejiyo, ayaa caruurta kula balamaya in:

Ha waayin Walaala dhowr ah
Ha waayin wardheere aabbe
Ha waayin waxsiiso hooyo
Ha waayin wiil ina adeer ah
Ha waayin wax badan adduunyo

Sida raga iyo dumarka looga xigto heesaha ayaa fakir naga siinaya sida hooyada iyo aabaha bulshada dhexdeeda looga qiimeeyo. Dhanka ugu muhiimsan ee hooyada waa iyada oo loo arko dabeecad deeqsi ah, marka aabaha loo arko inuu noqdo mid caan ah qadarina ku yeesha bulshada iyo qoyskiisa.

Sheeko xariirta Araweelo waa sheeko kale oo dhaqanka Soomaliada muujinaysa aragtida cad ee ku saabsan haweenka markay awooda hayaan dhaqan ahaan. Sheekada Araweelo xukuntay qabiil xiligii Burtaqiiska. Qofna ma hubno in Araweelo ay dhab ahaan jirtay, ama inay ahayd sheeko laga sameeyey / laga dheegay dhaqanka Soomalida.

Sikastaba ha ahaatee, waxaa loo arkayaa shakhsiyad gebi ahaanba halis ah oo ogolaatay awood dumarnimo oo cadaawad ah. Waxay sheekadu leedahay inay ahayd xukumaa aad u xun oo ragoo dhan hoos keentay xukunkeeda iyadoo dhufaantay raga oo dhan, marka laga reebo wiilkeeda oo ay u daysatay cadaadis kaga yimid gabadheeda. Hadaba si ay u muujiso awoodeeda, ayay ka riday ishiisa bidix. Inqilaab uu la sameeyey walaashiis ayuu ku dilay Araweelo oo booskeedii la wareegey.

Sheekadan waxay inta badan loo soo qaataa cabsida dadka ka qabo waxa dhici kara hadii haweenku awood badan ku yeesho bulshada dhexdeeda. Inkastoo dadku si xor ah u sheegaan in tayada sheekadani aanay dhab ahayn, laakiin waa mid mar wakhti walba la soo qaado oo soo noqnoqota, taasoo saamayn ku yeelato heerarka aragtida bulshada ee lamaanaha.

Waxaa kaloo jira maahmaaho iyo sheekooyin kale oo sawir ka bixinaya sida bulshadu u aragto haweenka iyo kaalindooda hogaamin. Tusaale hadaan soo qaadano, sheeko ayaa waxay leedahay hadii bulsho haween ka dhigato hogaamiye, bulshadaasi way burburaysaa, maadaama haweenku mar walba ay sameeyaan iska caabin.

Bedelida Doorka Lamaanaha ee Bulshada Soomaalida:

Sidoo kale waa muhiim inaynu fahamno sida doorarka raga iyo dumarku isu bedelaan taariikhda bulshada Soomaalida, iyo sida taariikhdu ay saamayn ugu yeelatay qaabka raga iyo dumarka bulshada dhexdeeda looga arko wakhtigan.

Xiligii xukunkii Siyaad Bare ayaa ku reebay raad muhiim ah sida bulshada Soomaaliyeed u aragto sinaanta raga iyo haweenka. Hawlgalkii Xiriirka Qoyska, oo uu soo bandhigay Siyaad Barre 1974 ayaa tusaale wanaagsan u ah in xoog lagu bedelo Lamaanaha (Gender) iyadoo aan tixgelin la siin dhaqanka, dhab ahaantii waxay ku reebaysaa raad xun labadaba bulshada iyo sinaanta lamaanaha. Sharxigani wuxuu buriyey sharciga Islaamka, isagoo dhaqan gelinaya sinaanta dumarka ee dhaxalka hantida. Sharcigu waxaa kaluu siiyey dumarka xaq ay iskaga furi karaan ragooda.

Inkastoo fikradahani yihiin kuwa waxtar wayn u leh sinaanta u dhexaysa dumarka iyo raga, sharcigu wuxuu gebi ahaanba xaqiray qadarinta dhaqanka iyo diinta. Isku daygan wuxuu dhaliyey mucaaradad dhanka hogaamiyaasha diinta. Taasoo ay si xoog leh ay dowladu u soo afjartay, kuna dhamaatay in xukun deg deg ah oo dil lagu xukumay 11 hogaamiye diineed Muqdisho 1975

Natijada kacdoonadaa iyo xasilooni darradaa, sharciga may ahayn keliya mid fashilma, laakiin wuxuu laakiin wuxuu dib u dhac u gaystay carqaladna geliyey fekerka dadku ka qabo sinaanta lamaanaha dib u dhacna u gaystay, kana dhigay arinka lamaanaha mid aan la taaban karin, lana laga hadli karin. Tan ayaa ka dhigaysa mid dhab ah muhimada in waxqabad ku salaysan lamaanaha in la sameeyo iyadoo lagu duulayo dhaqanka hada jira.

Bulshada Soomaaliyeed waxay ahayd mid si deg deg ah isu bedelaysa dagaalka awgii, kororka degsiimooyinka magaalada, iyo tirada faraha ee Soomaalida dibada ee aduunka daafahiisa. Isbedelkani wuxuu micnihiisu yahay in sida raga iyo dumarka lag filaayo bulshada dhexdeeda inay u dhaqmaan sidoo kale waa is bedelaysaa, sababo jira awgood. Dagaalka sokeeye wuxuu dhaliyey in doorarka raga iyo dumarku dhaqan ahaan ka qaadan jireen bulshada dhexdeeda uu is bedelo. Waxaa jira kaalimo badan oo dumarku imaka hayaan kuwaasoo ahaan jiray shaqooyin raga gaar u ah.

Mid ka mid ah isbedelada la xusi karo ilaa dagaaladii waa kaalinta sii kordhaya ee dumarka inay yihiin kuwo nolosha qoyska haya. Isbedelkani wuxuu raad ku leeyahay awooda dumarka inay ka qaybqaataan nolosha dadwaynaha, ilaa xadna go'aan gaarida bulshada wax ku yeeshaan. Doorka sii kordhaya eek u lugyeelashada iyo gacan ku haynta dumarka ee dhaqaalaha waxaa la garawsaday inuu yahay curiyeyaasha lammaanaysan ee bulshada maanta. Si walba ha ahaatee, isbedelkani wuxuu keenay masuuliyada dumarka oo korodha, iyagoon ka tanaasulin/tegin masuuliyadoodii guriga marka ay ka hayaan doorarkan cusub banaanka hoyga.

Xoojinta dhaqaalaha ee dumarka waxa loo gawsaday inuu yahay ka ugu muhiimsan isbadalka dhaqsa ah nee kartida lamaanaha bulshada dhexdeeda, sidoo kalena way caddahay, si walba ha noqotee doorarkani cusub ee dumarka soomaalidu wuxuu ku kordhiyay culays dheeraad ah shaqadooda. Iyaga oo ugu firfircoon imika hawlaha suuqyada ama kuwa dhaqaalaha, shaqooyinkooda dhaqan ahaaneed ee guriguna waa mid ugaar ah haweenka.

Dumarka fadhiya suuqa, gaar ahaan kuwa jaadka gada, ama hilibka waa doorar ku cusub dumarka dhaqanka Soomaaliyeed. Dooran cusubi ee dumarku wuxuu isbedel ku sameeyey aragtida waxa dumarka loo ogol yahay inay sameeyaan, waxa kartida dumarku tahay (qaban karaan) waxayna dumarka siisay inay inay si wayn wax uga qabtaan dhaqaalaha, kana qaybqaataan go'aan gaarida sababta dhaqaalaha ay abuuraan awgeed. Dumarku waxay ka qaataan doorar balaadhan dibada guryahooda, taasoo aad uga duwan aragtida dhaqanka ee ay xambaarsan yihiin maahmaahyada iyo sheekooyinka aan dusha ku soo sheegnay.

QURANKA IYO LAMAANAHA:

Hordhac

Fikirka lamaanaha guud ahaan waa mid ku cusub xaalada Soomaaliya. Dad badan ayaa shaki ka qaba una arka inuu lidi ku yahay waxa ay diintu ka qabto. Aragtidaa darteed waa ku adkaan kartaa tabarayaasha deegaanadu, inay ka munaaqashoodaan/hadlaan in raga iyo dumarka si siman uga qaybgalaan xiisadaha tababarada hab-maamulka maxaliga iyo degjinta qorshayaasha. Aragtideenu waa in dhanka xun ee lamaanuhu uu inta badan ka soo jeedo dhaqanka diintana uusana shaqo ku lahayn. Waa muhiim in la kala sooco caadiyan waxa diinta Islaamku ka qabto iyo hab- dhaqanka raga iyo dumarka ee bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda.

Sinaanta Laamaahaha ee Diinta Islamka

Xuquuqda iyo masuuliyadaha dumarku waxay la simanyihiin kuwa raga, laakiin maaha lagama maarmaan inay noqdaan kuwa isku dhigma. Kala duwanaantani waa mid la fahmi karo maxaa yeelay ragu iyo dumarku maaha kuwo isku mid ah laakiin waxaa loo abuuray si isle'eg. Erayga sinaanta waxaa mararka qaarkood loo fahmaa si khalada oo micnaheedu yahay sinaan guud ee dhinac walba. Sinaanta waxaa loola jeedaa sinaanta guud ee xaquuqda iyo waajibaadka raga iyo dumarka labadaba.

Waxaa ku jira Quraanka ugu yaraan ilaa sodon suuradood oo taageeraya sinaanta raga iyo dumarka. Kuwo badan oo ka mid ah aayadahan ayaa waxaa sidoo kale taageera axaadiista (Nebiga SCW), kuwaasoo muujinaya in (wax baristii) Nebigu uusan dumarka gelin booska labaad laakiin si ka duwan taa dumarku ahaayeen kuwo faa'iido iyo waxtar ku leh bulshada dhexdeeda.

Kuwo ka mid ah aqoontaasi waa:

1. Ayaado badan oo ka mid ah Quraanka ayaa si cad oo dhab ah ugu balanqaadaya in dumarka iyo raga si isle'eg looga abaal marinayo acmaashooda wanaagsan iyo tooda xun.
2. Sinaanta xaq waxbarashada iyo aqoonta. Quraanka iyo Axaadiistuba waxay waajib kaga raga iyo dumarka inay aqoon/waxbarasho doontaan (bartaan).
3. sinaanta xaq iyo waajibka ka qaybgalka hawlaha dadwaynaha

Sida kor ku caad, waa mid dhab ah in Quraanka uu taageerayo sinaanta raga iyo dumarka. Isagu waa aabe iyaduna waa hooyo. Labuduba lagama maarmaan ayay u yihiin nolosha. Sidaa darteed kaalinka dumarka waa in si siman loo qadariyo (qiimeeyo). Isku xirnaantaan owgeed, waxay haweenku xaq u yeelanaysaa xuquuq iyo masuuliyad la siman tan raga, dumarku waxay leeyihiin sifooyin badan sida dhigeeda ragu u leeyahay, wadaagan isle'eg Alle wuxuu leeyahay:

“Garta dadow in la idinka abuuray naf keliya oo rag iyo dumar ah, wuxuuna idinka dhigay guruumo, iyo qabaa’ilo si aad isu garataan” (Qur’an, 49:13)

Xuquuqda Guud ee Haweenka Aragtida Islaamka

Xaq inay Hesho Waxbarasho (aqoon)

Quraanku wuxuu siiyaa mudnaanta ugu saraysa muhiimada ay leedahay waxbarashadu (aqoonta). Markuu farayu Islaamku Muslimiinta waxbarashada, ma kala sooco raga iyo haweenka. Nebigu wuxuu sheegay in wax la barto ay qasab ku tahay qof walba oo Muslim ah Rag iyo Dumarba

Waajib ayay ku tahay qof walba oo Muslim ah (Rag iyo Dumarba) inuu aqoon raacda (Hadiiska Al- Bukhaari)

Dhanka Dhaqaalaha ee Lamaanaha iyo Islaamka

Xaqa Shaqada

Sida quraanku sheegayo raga iyo haweenku waxay xaq u leeyihiin inay shaqaystaan, haday shaqadu tahay mid joogta ah oo mushahari ah ama mid tabarucaad ah. Waxtarka (miraha shaqada waxaa yeelanaya kii shaqada qabtay- iyadoon loo tixgelinayn kuu ahaa rag iyo haween.

..Ragu waxay leeyihiin waxay shaqaystaan, dumarkana waxay shaqaystaan (Qur'an 4:32)

Iyadoo la tixgelinayo xaquuqda haweenka ee in ay shaqo tagto, ma jirto fariin (amar) diinta Islaamka oo ka xaarameynaya dumarka inay shaqo tagaan, gaar ahaan meelaha ku haboon abuurkooda bulshaduna u baahan tahay. Ma jirto wax hor-istaagaya in looga faa'iidaysto kartida (aqoonta, xorfida) haweenka meel walba ooy ku fiican yihiin

Cumar, Khaliifkii labaad ee Nebiga (SCW) ka dib , ayaa u magacaabay haweeney (Um Al-Shifaa' Bint Abdullah) kormeeraha Suuqa, oo ah boos u dhigma casrigeena " Agaasimaha Qaybta Ilaalada Iibsadaaasha"

Lahaanshaha Lacagta iyo Sharciga Dhaxalka

Lahaanshaha lacagta waa loo ogol yahay haweenka. Siduu qabo sharciga Islaamka, Xaqa dumarka ee lahaansha lacagta, Guryaha iyo Hantida kaleba waa la ogolyahay. Xaquuqdani isma bedesho haday haweenka aan la qabin amase la qabo. Waxay xaq u leedahay inay wax soo iibstato, iska iibiso, wax hormarsato ama kiraysato wax walba oo ka mid ah hantideeda.

Intaa waxaa dheer Islaamku wuxuu siinayaa haweeneyda xaqa inay wax dhaxasho. Qaybtay dhaxalka u hesho gebi ahaanba iyadaa iska leh, qofna lama wadaago/kuma doodi karo, xataa ninkeeda. Quraanku wuxuu noo cadaynayaa in labadaba raga iyo dumarku ay xaq u leeyihiin qayb cayiman oo ka mid ah hantida ay ka dhintaan waalindood ama ehelkooda:

Waxay idiinka tagaan waalidiintu ama ehelkiina idiin dhow, qayb ayay ku leeyihiin ragu iyo dumarku, hady hantidu tahay mid yar ama wayn-xadi cayiman (Qur'an 4:7)

Sinaanta ka qaybgalka arimaha bulshada iyo siyaasada

Sharciga guud ahaan waa ka qaybgalka, iyo iska kaashiga raga iyo dumarka iyo nolosha Ijtimaciga iyo siyaasada waxa khuseeya.

Kuwa ilaah rumeeyey, raga iyo dumarka waa kuwa is ilaaliya (midba kan kale) waxay qabtaan waxa wanaagsan iskana reebaan waxa xun (Qur'an 9:7)

Waxaa jira cadaymo taariikhi ah oo ku filan inay muujiyaan ka qaybgalka haweenka Muslimka ah ee qaybaha xukunka, arimaha bulshada, degjinta sharciga, jagooyin maamul, waxbarida iyo xataa dagaalada. Such involvement in social and political affairs was conducted without the participants losing sight of the complementary priorities of both genders and without violating Islamic guidelines of modesty and virtue.

Baaritaan cadaali ah hadii lagu sameeyo sida diinta Islaamku qabto iyo taariikhda Ilbaxnimada Islaamka waxay siinayaa cadaymo ku filan sinaanta haweenka iyo raga oo ah waxa maanta aan niraano" Xaquuqda Siyaasadeed".

Tan waxaa ku jira xaq ka qaybgalka doorashada iyo sidoo kale u magacaabida xafiis siyaasadeed. Sidoo kale waxaa ku jira ka qaybgalka haweenka ee arimaha bulshada. Labadaba Quraanka iyo taariikhda Islaamka waxaan ka helaynaa tusaalayaal dumarka oo ka qayb qaatay doodo kulkulul, lana dooday xataa Nebiga (SCW) laftiisa, (Eeg Qur'an 58: 14 iyo 60: 10-12).

Intuu Khilaafada hayay Cumar Bin Khatab, haweeney ayaa kula dooday Masjidka, waxay soo bandhigtay fikirkeeda, waxayna ku sababtay inuu kaga dhawaaqo goobta la wada joogo" Haweenayda ayaa saxsan Cumarna waa khaldan yahay"

Sinaanta Sharciga Hortiisa:

Labada lamaane way u siman yihiin sharciga iyo maxkamada horteeda. Cadaaladu ma leh dhedig iyo labood. Haweentu waxay raga kala siman tahay shaqa helida iyo xilalka caadiga ah iyo abaal marinta shaqadoodada. Siduu Quraanka qabo raga iyo dumarka isku si ayaa looga ciqaabayaa dembiyada sida tuugada (5:38), Sinada (24:2), [23] Dilka iyo dhaawaca (5:45).

Dacwad laawe:

Tixda dusha ku qoran waxaa looga dan leeyahay inay siiso dadka isticmaalaya buugan hordhac ku saabsan aragtiyada islaamka ee lamaanaha.

Siday doonta ha noqotee, qoraalkani waa mid kooban oo uga hadlaya lamaanaha, tababarayaasha waxaa si adag loogu dhiiri elinayaa inay doonaan qoraalo si qota dheer xiriir ula leh mowduucan.

Tani waxay gacan ka siinaysaa in loo qabto wadahadal miradhala dadka la tababarayo markay caqabadahan ay ka hor yimaadaan

Qaybtan ku saabsan ku dhaqanka Islaamka sinaba uma aha qoraal iyo wax ka soo baxay UN-Habitat ama Qaramada Midoobey oo la xiriira Islaama, ama sidoo kale wax ka yimi diin kale oo aan Islaam ahayn

FIKRADAHA IYO TABAHA LAMAANE:

Lamaanuhu wuxuu ku saabsan yahay sifooyinka dhaqaalaha, bulshada, iyo dhaqanka ee ku qotoma ahaanshaha dhedig ama lab.

Sidaa darteed tan loola jeedaa. Sida dadku u arko waxaa saamayn ku len ahaanshahaaga nin ama haween. Waxay kaa filayaan inaad samayso waxqaabo gaar ah, sidoo kale xaaladaha gaar waxaa lagaa filayaa inaad samayn kuwo kale. Raga waxaa inta badan laga filayaa inay noqdaan kuwa masuul ka ah dhaqaalaha qoyska. Wejigabax ayay ku tahay raga bulshada dhexdeeda haday gabaan kaalinkan.

Laakiin...

Lamaanuhu kuma saabsana kaliya dhalashada (Jinsiga) Bayoliga. Ninku inuu noqdo kan masuulka ka ah dhaqaalaha qoyska maaha inuu Bayoloji ahaan awood u leeyahay haweenka aysan u lahayn. Tani waa aragti bulshadu samaystay wakhtiyo kala duwan..

Hadaba...

Lamaanuhu wuxuu eegayaa sida kala duwanaashaha Bayoloji uu saamayn ugu leeyahay isdhexgalka bulshada.

Tusaale ahaan, dumarka waxaa laga filayaa inay ka qaataan masuuliyad wayn howlaha guriga (la socodka howlaha guriga iwm) inkastoo aysan jirin sabab Bayoloji oo aysan ragu si le'eg u qaban karin howlahan sidoo kale. Waa arin uu qaabeeyey (cayimey) dhaqanka bulshada ee uusan ahayn mid b bayoloji. Sidaa owgeed waa arin ay bulshadu samaysay una astaysay raga iyo dumarkaba taasoo ka fog kala duwanaashana Bayolji ee jinsigooda.

Layli-- Lamaane iyo Jinsi:

Akhri oraahahan soo socda oo go'aan ka gaar haduu mid walba ku saabsan yahay lamaane ama Jinsi Bayolji.

1. Dumarku ilmo ayay dhalaan, raguna ma dhalo.
2. Gabdhaha yar yari waa degan yihiin, wiilasha yar yarna waa rabash badan yihiin.
3. Qaad iibiyayaasha ugu badan waa haween.
4. Dumarku way naas nuujin karaan ilmaha, raguna masaasad ayay ilmaha waxku siin karaan.
5. Masaaridii hore, guryaha ayay joogi jireen, oo wax ayay tolijireen (cawda, dharka). Dumarkuna iyagaa maarayn jiray howlaha qoyska. Dumarkuna iyagaa hantida dhaxli jirey raguna ma dhaxli jirin.
6. Codka ragu wuxuu isbedelaa markay qaangaaraan, dumarkuna isma bedelo.
7. Ragu xoolaha ayay leeyihiin, dumarkuna waa raacaan.
8. Dumarku waa sabur ayay leeyihiin, raguna sabur ma leh.

Jawaabaha waxaa laga heli karaa dhamaadka buuga.

Fikradaha ku saabsan raga iyo dumarku maaha kuwo caalami ah.

Fikirka waxa raga sameeyaan/amase aysan sameeyeen dhaqanka Soomaaliga wuu ka duwan yahay dhaqamada kale. Sidaa darted lamaanuhu gebi ahaanba waa dhaqan. Tusaale ahaan, maaha doorka haweenka Afgaanistaan inay baabuur wadaan, halka dhaqanka Soomaliga uu yahay. Tani maaha wax leh cabir (Dimension) lamaane.

Fikradaha lamaanaha waxay sidoo kale ku taaban tahay xeerka dhaqanka, sheekooyinka, gabayada, iyo sheeko xariirta. Aragtida dadka ee ahaanshahooda rag iyo haween wuxuu ku xiran yahay sheekooyinkaa dhaqanka.

Lamaanuhu sidoo kale wuu ku kala duwan yahay miyiga iyo magaalooyinka- haweenku aad ayay ugu lug leeyihiin nolosha dadwaynaha meelaha magaalada ah, badanaaba raga iyo dumarku waa wadaagaan shaqooyinka goobaha magaalada ah, laakiin aad ayay ugu kala qaybsan yihiin goobaha miyiga.

Tusaale ahaan kaalinka raga iyo dumarka marka laga hadlayo lahaanshaha, xanaanaynta iyo qawraca xoolaha wuu isbedelayaa meelaha magaalooyinka ah. Dumarka ayaa aad ugu howlan qowraca magaalada marka loo fiirsho siday ahayd waayadii hore, halka ay weli tahay howl gaar u ah meelaha miyiga. Isticmaalka wakhtiga ee raga iyo dumarku way ku kala duwan yihiin miyiga iyo magaalada, taasoo raad ku yeelanaysa helida adeega iyo awooda ka qaybgalka.

Doorarka Lamaanuhu wuxuu ku xiran yahay Dabaqad iyo curiyayaasha kale ee bulshada:-

Dumarka ka soo jeeda dabaqadaha sare inta badan kaalimo ayay ka qaataan bulshada dhexdeeda, halka kuwa ka soo jeeda dabaqadaha hoose aysan kaalin wacan ka qaadan karin- tusaale ahaan, haween badan oo haya jagooyin siyaasadeed oo sar sare- sida Benazir Butto ee dalka Bakistan- waxay ka soo jeeda dabaqad sare, sidaa darteed waa u fududahay inay qabtaan kaalimo aan sida caadiga loo arag in dumarka loo ogol yahay. Waxaa aalaaba dhacda in dumarka dhalmadayska ah (waawayn) loo ogolyahay inay fagaaraha ka hadlaan halka ay ku adag tahay kuwa aan la guursaa, tusaale ahaan.

Lamaanuhu lama xiriirto dumarka keliya.

Markaan ka hadlayno lamaanaha, waxaan aad uga hadalaa haweenka. Laakiin waa aragti isbarbardhig ah. Ma fahmi karno sinaanta raga iyo dumarka hadii aanan fahmin raga iyo dumarka labadaba. Fikrada lamaanaha waxaa loo sameeyey si loo fahmo xiriirka ijtimaaci ee u dhexeeya raga iyo dumarka iyo sinaan la,aanta iyaga u dhexaysa. Raga iyo dumarkaba waxaa loola dhaqmi karaa si aan door ahayn ama aan sinayn taasoo salka ku haysa jinsigooda. Markaan isbarbar dhigno raga iyo dumarka, waxaan arkaynaa sida kooxi faa'iido u leedahay ama aysan u lahayn.

Lamaanuhu waa fikir isbedelaya

Qaabka dadku u arko sida raga ama dumarku u dhaqmi lahaayeen, iyo siday isu dhexgalaan , wuxuu isla bedelaa wakhtiga bulshooyinkoo dhan. Maxaa yeelay lamaanuhu wuxuu ku xiriiraa bulshada, fikirka lamaanuhuna wuxuu isubedelaa sida bulshadu isu bedesho.

Xaaladaha jahwareerka bulsho sida khilaafaadka waxay u noqonkaraa sheey xooginaya horumarkan ama dhanka kale waxay dib u celin karaan horumarkay bulshadu samaysay. Waa cadaan si walba ha ahaatee, in aragtida kaalinka lamaanuhu uu si hoose ugu taaban yahay horumarka iyo isbedelka bulsho/siyaasadeed ee ka dhacaya bulshada dhexdeeda. Tani waxay ifinaysaa halka ugu muhiimsan ee in lamaanuhu yahay geedisocod bulshada raad ku yeelan kara bedelina kara si uu u hagaajiyo sinaanshaha dadka ee bulshada dhexdeeda. Tani waliba waa muhiim marka laga hadlayo wadamada dagaaladu ka dhaceen ooy jahwareerka siyaasada bulshadu ay raad ku yeelanayso sinaanta lamaanaha, iyo xadiga guud ee isbedelka bulshada..

Mararka qaarkood isbedeladu waxay dhacaan iyadoon loon baahnayn- dumarka ayaa shaqa taga maxaa yeelay ragii ayaa dagaal tegay waxaana loo baahan yahay in reerka wax la taro, markay isbedeladani dhacaan, aragtida iyo fikirkuna isla bedelayo xadi la mid ah. Laakiin mudo marka la joogo ayaa isbedeladan la ogolaanayaa, sida dumarka suuqyada wax ku iibiya, aragtida bulshadu ka qabto dumarkana wuu horumaraa.


SINAANTA LAMAANAHA:

Sinaanta lamaanuhu waa in loo sinaado doorarka, masuuliyada, helida fursadaha ee raga iyo haweenka, wiilasha iyo gabdhaha ee meel walba oo ka mid ah bulshada.

Sinaantu macnaheedu maaha in tira isle'eg oo rag iyo dumar ah ay goob ka shaqeeyaan, ama kulan ka soo wada qayb galaan. Ee waa u wada sinaanta ka qaybgalka go'aan gaarida iyo maaraynta dhaqaalaha. Tani waa muhiim maadaama howlgaladu inta badan diirada saaraan dhiganka tirada ka qaybgalka iyagoon aan wajahayn sababta awooda sinaanta raga iyo haweenka.

Haduu jiro urur ay ka shaqeeyaan tiro isle'eg oo rag iyo dumara, laakiin guduga fulintu yahay rag, markay dumarkuk ka qaybgelin go'aan gaarida, tani maaha ka qaybgal loo siman yahay.

Kaalimada, masuuliyadaha, helida fursadaha bulshada dhexdeeda way ku kala duwan yihiin raga iyo dumarka. Kuwani way isku wada xiran yihiin, gebi-ahaana waxay saamayn ku yeeshaan, sida siman iyo waxtar ee raga iyo dumarku noqon doonan.



MAXAY YIHIIN DOORARKA RAGA DUMARKU KAGA JIRAAN BULSHADDA?

Waxaa jira siyaalo badan oo raga iyo dumarka laga filayo inay bulshada dhexdeeda u dhaqmaan taasoo salka ku haysa Lamanahooda (Gender), waxay kuwani noqon karaan kaalimo toos ah, sida nooca shaqada laga filayo inay qabtaan. Waxay noqon karaan doo'ar aan toos ahayn, sida qaybsiga shaqada guriga. Kuwani waxay noqon karaan nooc wacan oo raga iyo dumarka, wiilasha iyo gabdhaha laga filayo inay yeelaan- tusaale ahaan, wiilasha waxaa laga rabaa inay noqdaan kuwo raga ah oo aah ooyin haduu dhaawac gaaro. Gabdhahana waxaa laga filayaa inay aad u adeecaan wiilasha iyo raga

Maxay tahay **Masuuliyadaha** raga iyo haweenka ee bulshada?

Raga iyo dumarku masuuliyado kala duwan ayay ka hayaan bulshada dhexdeeda sababtoo ah lamaanahooda (gender). Masuuliyadahan waxaa raad ku leh wakhtiga ay ku lumiyaan shaqooyinkaa kala duwan maalin walba, iyo siday wakhti ugu helaan inay shaqooyin kale bulshada u qabtaan. Tusaale ahaan, kaalinka haweenka ee shaqooyinka guriga wuxuu aad ugu badan yahay, haynta caruurta, cuna karinta iyo nadaafada. Sabantan owgeed, ayay tahay masuuliyadeeda inay shaqooyinkan qabato, xataa haday u yaalaan shaqooyin kale, sida shaqada suuqa maalin walba.

Waa maxay gelida (helida) raga iyo dumarka bulshada dhexdeeda?

Masuuliyadahani waxaa loola jeeda in raga iyo dumarkuba ay si heerar kala duwana ah lug ugu yeeshaan bulshada. Arinkan waxaa ku jira helintaanka dhaqaalaha, waxbarashada, tababarada, go'aan gaarida saaxada shacabka, beelaha, ka qaybgalka siyaasada, xaq lahaanshaha, adeega sharciga, lahaanshaha hantida(deegaanka, dhulka) iyo dhinacyo badan oo bulshada, dhaqaalaha iyo nolosha siyaasada..

Waa maxay Fursadaha ay raga iyo dumarku ku leeyihiin bulshada?

Arinkan waxaa loola jeeda fursadaha raga iyo dumarku ay leeyihiin si u horumariyaan/hagaajiyaan noloshooda iyagoo helaya fursado waxbarasho iyo dhaqaale way kala duwan yihiin sababtoo ah heerarka kala duwan ee helitaankooda. Tusaale ahaan haday ragu leeyihiin masuuliyada dagaalka (dagaaltaga) iyadoo laga duulayo doorka ay bulshada kaga jiraan inay yihiin ilaaliyaasha bulshada iyo qoyska, fursado yar ayay u helayaan inay helaan shaqooyin markay soo noqdaan, maxaa yeelay ma laha xirfadaha loo baahan yahay.

Sinaan la,aantu waxay raad ku yeelanaysaa wiilasha iyo gabdhaha labadaba:

Waxbarashada, gabdho badan ayaan helin sababtoo ah waxaa laga filayaa inay gacan siiso qoyska iyagoo ka shaqaynaya guriga. Xaalade kale wiilasha ayaa ka taga waxbarashada maxaa yeelay waxaa la filayaa inay dagaalka galaan iyagoo askar ah. Mid walba oo xaaladahan ka mid ah caruurtu waxay waayayaan fursado, sababtoo ah kaalimada iyo masuuliyadooda salka ku haysa ahaanshahooda gabdho ama wiilal.

Maxuu yahay macnaha uu arinkani u leeyahay D/Hoose?

kan kala duwan, masuuliyadaha, helitaanka (access) iyo fursadaha haweenka iyo raga waxay ku xiran tahay baahiyaha iyo mudnaanta bulshadood dhan. Waxa muhiimka u ah hogaamiyayaasha deegaanka ah waa inay garawsadaan doorarka kala duwan ee raga iyo haweenka, iyo in la fahmo culayska kala duwan ee saran raga iyo dumarka iyo sidaan doorarka aan si isle'eg loo qadarin ama bulshadu gacan uga gaysan. Haday D/Hoose doonayso inay hagaajiso horumarka, waa inay la gartaa ka iyo masuuliyadaha, helintaanka (access) iyo fursadaha xubnaha bulshada oo dhan, oo ah rag iyo dumar labadaba.

CABIRKA HABSAMIDA IYO KA QAYBGELINTA HAWEENKA HAB MAAMUL D/HOOSE: SAMAYN HALBEEGYO KU SALAYSAN LAMAANAHA

Markaan ku darayno aragtida lamaanaha habka qorshaynta, waa muhiim inuu jiro aalad lagu cabirayo raadka uu geedisocodkani ku leeyahay xaalada raga iyo haweenka. Halbeegyadu (indicators) waa qaybaha ugu muhiimsan ee mashruuc walba, maadaama ay na siinayaan qaab aan u qiimayno horumarka (guulaha) laga gaaray barnaamijka. Halbeegyadu waa sida bartilmaameedyo muujinaya horumarka isbedelka bulshada. Sidaa darteed, waa muhiim inay ka tarjumaan isbedelka xawliga lamaanaha ee bulshada dhexdeeda. Halbeegyadu waa ka badan yihiin xog la ururiyey. Istiraatiijiyadu keligeed nooma saamixi karo inaan xukuno (go'aan) ka gaarno arrin. Taasi waa ujeeda ugu muhiimsan ee halbeegyada iyo gaar ahaan halbeegyada lamaanaha si ay nooga siiyaan cabir macquul ah is bedelka xaalada haweenka iyo raga, iyadoo laga cabirayo xeerarka caalamiga ee jira iyo xaaladaha dhabta ah ee ka jira gudaha (dalka).

Halbeeyo (indicators) ku salaysan lamaanaha oo lagu daro habraaca (process) cabiraadeed wuxuu naga caawinayaa inuu fududeeyo habka falanqaynta iminka socda ee ku saabsan xaalada bulshada lafteeda. Halbeegyada cabiraya isbedelka lamaanaha oo lagu dhafo halbeegyada kale waxay sidoo kale gacan naga siinayaan inaan tusno sida arimaha bulshada ee kale ay kaga xiran yihiin lamaanaha inuu raad ku leeyahay arimahan. Si kasta ha ahaatee. Tusaale ahaan haddaan ka cabiro xadiga gelista (qorista) iskuulada ee wiilasha iyo gabdhaha aragtida lamaanaha waxay muujin kartaa heerka farqiga ee iskuul-gelista gabdhaha. Si kastaba ha ahaatee, macluumaadkan oo lagu daro halbeeyo cabiraya xadiga iskuul-gelista wiilasha iyo gabdhaha u dhexeeya ee bulsho, ama dabaqad gaar ah wuxuu inta badan na tusayaa in arinkani yahay mid isku-dhafaan oo raad ku leh arimo ijtimaaci oo dhawr ah. Tani waxay ina siinaysaa muhiimad kooban taasoo gacan ka siinaysa kuwa wax-qorsheeya (planners) inay sameeyaan tabta (Strategies) ugu haboon.

Kala-saarida Xogta: (Disaggregating Data)

Samaynta halbeeyo ka jawaabaya lamaanaha iyo kala saarida xogta lamaanah waxay gacan naga siinaysaa inaan fulino habraacan inagoo u sii marayna heerar kormeer iyo qiimayn.

Kala saarida xogtu waa xisaabaadka aassaasiga oo gacan naga siinaysa inaan sheegno halbeegyada loo baahan yahay marxalada qorshaynta. Waa muhiim haday dhici karto, in loo kala jejebiyo macluumaadkan qaab jinsi (sex) si laysu barbar-dhigo xaalada meel (goob) ee u dhexaysa raga, haweenka, wiilasha iyo gabdhaha. Macluumaadka oo loo kala jejebiyo qaabkan wuxuu muujinayaa farqiga u dhexeeya raga iyo haweenka marka loo fiirsho dhinac gaar ah ee maaraynta magaalaynta (Urban Management). Tani muhiimad gaar ah ayay leedahay marka laga hadlayo kaalimada iyo xaalada haweenka ee bulshada dhexdeeda, maadaama sida caadiga ah hawlaha haweenku yihiin kuwo kooban qaybaha aan rasmiga ahayn (informal sectors) ayna inta badan ka dhacaan guryaha. Waxay natiijadu noqonaysaa, in waxtarkooda inta badan uusan noqon mid muuqan kara, hadii aan la qaadin dadaalo gaar ah si loo ururiyo xog ururinayo xog ka duwan, laysna barbar-dhigo ka raga iyo haweenka.

Ururinta xogta kala saarida lamaanaha marka caadiyan waa mid toosan (straightforward), waa habraac fudud oo lagu hubinayo in heer walba oo qofku ku sagan yahay oo loo helo aalad lagu cabiro, iyo in dadka la cabirey (qiimeeye) sidoo kale loo kala jejebiyo dabaqado (categories) lab iyo dhedig ah. Waa muhiim in la xusuusto xiliga la ururinayo xogta kala saarida, oo tirakoobayaashu u isticmaalaan heerka "guriga" maadaama ay cabiraadani inta badan qariso baaxada/awooda lamaanaha (Gender Dynamics), maadaama hanaanka cabiraadani uu rumaysan yahay in xaalada guriga ay tahay mid aqoonsi balaaran leh (monolithic entity), taasoo uusan arinku ahayn. Sidaa darteed waa in xooga la saaraa in xadiyada cabirka loo kala jebiyo heer guri si loo ogaado kaalimada iyo waajibaadka kala duwan ee xubin walba oo guriga ka mid ah. Tusaale ahaan, helida adeegyada way ku kala duwanaa karaan dadka isku guri ku nool sababo dhowr ah dartood. Dumarku ma heli karaan tranporti habeenkii sababtoo ah waxaan jirin nalalka wadooyinka (sidaa darteed amniga ayaa hoos u dhaca).

dhaansha, iyo wakhtiga lagu lunsho shaqa walba, ayaa gacan naga siinaya inaan go'aamino sida ugu wanaagsan ee adeegan loo qorshaynayo

Khayraadka, helitaanka (access) iyo qaabaynta gacan ku hayntooda wuxuu ka bilaamayaa inuu muujiyo baahada awooda u dhexaysa raga iyo dumarka.

- Wuxuu muujinayaa heerarka kala duwan ee gacan ku haynta dhaqaalaha ee raga iyo haweenka;
- Wuxuu muujinayaa heerarka kala duwan ee gacan ku haynta adeega iyo qaybinta adeegyada ee raga iyo dumarka;
- Wuxuu kala cadaynayaa heerarka awoodaha kala duwan ee raga iyo haweenka ee D/hoose;

Falanqayntan gaar ahaan waa muhiim inuu muujiyo xanibaadaha dhici kara ee soo food saara haweenka iyo raga oo ku saabsan ka qaybgalka qorshaynta D/Hoose. Waxaa intaa raaca, wuxuu muujinayaa qayb ka mid sababaha sinaan la,aanta bulshada dhexdeeda, iyo sida uu ugu xiran yahay arimaha qorshaynta magaalaynta. Marxaladan waxay naga caawinaysaa in la bandhigo xiriirka isku xiran (interrelationship) ee ka jira qaabka awooda- gaar ahaan maadaama ay xudun u tahay arimaha la xiriira guriga- (particularly as it centres around the household). Macluumaadkani waa muhiim, maadaama hordhaca howlaha qorshaynta magaalaynta-oo ay ku jirto qorshaynta geedisocodka ka qayb galka loo wada dhan yahay (he participatory planning process) - wuxuu raad ku yeelan doonaa xiriirka iyo xadiga awooda.

Maxay tani muhiim u tahay?

Haday dumarku yihiin kuwa masuulka ka ah isticmaalka biyaha guriga, hawlgal ay doonayso D/hoose inay adeega biyahay geliso guryaha wuxuu saamayn aan la filayn ku yeelanayaa doorka haweenka ee guriga iyo ka qaybgalkeeda howlaha bulshada. Tusaale ahaan, waa muhiim in la fahmo shaqooyinka kale ee dumarku qabtaan markay ku jiraan biyo dhaanka- in la ururiyo macluumaad ku saabsan xaalada bulshada iwm- waana in la hubiyaa in hawlgalkani uusan ku ekayn qaybaha kale ee la xiriira biyo dhaanka iyo siduu raad ugu yeesho kaalinta haweenka ee bulshada dhexdeeda. Waa muhiim la ogaado arimaha iyo culayska uu leeyahay raad cirib xun oo lidi ku ah faa'iidada gaarka ah ee habka adeeg siinta. Tani waxay gacan naga siinaysaa inaan go'aan ka gaarno hanaanka ugu wanaagsan ee aan ku wajihi karno baahiyaha bulshada qaabka ugu wacan oo si waxtar leh u horumarinaya ka lamaanaha hagaajinayana xaalada haweenka.

Falanqaynta faa'iidada iyo nafaca (incentives) wuxuu na tusi doonaa ka qaybgalka siman ee raga iyo haweenka ee habka qorshaynta adeegyada D/hoose) iyo sida uu u hagaajinayo D/hoose.

- Wuxuu fikrada naga siinayaa sida raga iyo haweenka beesha loogu arko kuwo waxtar u leh barnaamijyada D/hoose;;
- In la sameeye wacyi gelin dadwayne oo ku saabsan ashyaayada waxtarka leh ee ka qaybgalka siman ee raga iyo haweenka;

Maxay tani u tahay muhiim?

Noocan lagagurka ah (flanqaynta) wuxuu na siinayaa faham ku saabsan sida aragtida lamaanuhu ay u leedahay raad waxtarleh habsamida howlaha D/hoose. Tixraac shaxda boga 11-12, kaasoo na siinaya sharax cad oo ku saabsan isku xirka u dhexeeya howlaha D/hoose iyo aragtida lamaanaha. Tusaalaha ku yaal boga soo socda wuxuu sidoo kale sharaxayaa sida dhinacyadani iyagoo wada jira ay u dhalin kara barnaamijyo D/hoose oo waxtar leh, markaan iska indha tirana waxay dhalin karaan mid taa lidi ku ah.

in dumarku u galaan/helaan adeeg gaar ah iyo waxa uu yahay habdhaqanka bulshada dhexdeeda ee xoojinaya arinkan, iyo waxa ay yihiin fursadaha jiri kara oo hagaajinaya xaalada haweenka marka la barbar dhigo ran raga (vis-à-vis men).

In la isticmaalo Falanqaynta Lamaanaha si uu uga qayb qaato, waxay nala tahay inaan ka naqaano haweenka iyo Raga

Mid ka mid ah tan ugu muhiimsan isticmaalka Falanqaynta Lamaanaha waa isagoo gacan ka gaysta in la eego aragtidu hogaamiyayaashy ka qabaan kaalimada raga iyo haweenka ee D/hoose. Waa muhiim aragtiyada bulshadu ka qabto waxa raga ragu iyo haweenku sameeyaan, sida looga qaybgelin lahaa hawl gaar ah, ama waxa loo baahan yahay in la furfuro.

Si loo sameeyo baarintaan dhab waxa looga baahan yahay D/Hoose, yaa laga qaybgelinayaa, yuuna raad ku yeelanayaa, iyo sida adeega ama hawshu loo fulinayo, hogaamiyaashu waa inay ku eegaan bulshada indho furan, una diyaar garoobaan fagaca waxa raga iyo dumarku ku cabiraan aragtidooda inay tahay mudnaan. Maxaa yeelahy iyadoo diirada la saarayo in la baaro xiriirka dabiiciga, lana sahminayo waxa raga iyo haweenku sameeyaan, iyo kaalinka ay ku leeyihiin bulshada, falanqaynta lamaanaha waa aalad qiimo leh.

HABKEEN DAWLADDA HOOSE GORFAYN LAMAANE UGU SAMAYN KARNAA?

Waxa jira habab gaara oo lagu gorfayn karo lamaanaha taasoo qayb ka ah hawlaha dawladda hoose

Qiimaynta baahiyahu waxay eegtaa baahiyaha bulshada iyadoo looeegayo baahida raga, dumarka, inamada iyo gabdhaha.

- Cadee meelaha mudnaanta u leh qorshaynta dawladda oose
- Cadee baahiyaha kala duwan ee bulshada oo ku salaysan lamaanaha (raga iyo dumarka)
- Soo koob heerarka kala duwan ee raga iyo dumarku u helaan adeegyada dawladda hoose

Baahiyuhu waa in ay noqdaan kuwo jira oo run ah, xagga dawlada hoosana ka tahay arrin dhab ah, si loo waajaho mudada dhaw, sidoo kale way ka balaaran yihiin baahiyaha bulshadu taasina waxay la xiriirtaa tabaha qorsheynta mudada fog.

Maxay tani muhiim u tahay?

Tusaale ahaan, haday D/hoose qabato (Fuliso) daraasad ku saabsan adeega caafimaadka, daraasada waa in loo qabtaa qaab baahiyada, argatiyada iyo mudnaanta labadaba raga iyo haweenka uga muuqdaan. Tani gaar ahaan waa muhiim maadaama ay adeegaa si kala duwan u kala isticmaalayaan, sidoo kalena ay leeyihiin baahiyo kala duwan. Marka laga hadlayo siinta adeega caafimaadka, dumarku inta badan waa kuwa ugu horeeya (caregivers), sidaa owgeed waa kuwa ugu horeeya ee isticmaalaya adeega caafimaadka. Natiijaduna waa iyagaa aad ugu dhow (yaqaan) sida ugu waxtar badan ee adeegan loo qorshaynayooo si uu wajaho ubucda baahiyaha D/hoose ee la xiriira arinkan.

Kala qaabaynta howlaha (Activities profiling) waxay si qoto dheer gacan nooga siinaysaa in la kala cadeeyo kaalimada iyo masuuliyadaha ay raga iyo dumarku sameeyaan maalintii. Qaabaynta howlaha wuxuu si sahal ah u eegayaa waxyaalaha kala duwan ee raga iyo haweenku sameeyaan maalinta dhexdeeda- waxaa loo kala jebebiyey, qaab saacadeed, ku salaysan waxa raga iyo dumarku sida caadiga ah ay sameeyan, iyo inta ay ku qaadata hawl walba. Tani waxay naga caawinaysaa inaan:

- Muujino sida raga iyo dumarku u isticmaalaan adeegyada kala duwan ee bulshada
- Muujino kaalimada guud ee kala duwan iyo masuuliyadaha raga iyo haweenka ee bulshada dhexdeeda;
- Muujino kaalimada kala duwan ee raga iyo haweenku ka qaataan adeeg gaar ah;
- Cadayno culaysyada kala duwan ee shaqo ee raga iyo haweenka haysta;
- Muujino isticmaalka wakhtiga kala duwan ee raga iyo haweenka;
- Cayino qaabka ka qaybgalkooda iyo wixtarkooda/biirintooda (contribution) howlaha D/Hoose.

Maxay tani muhiim u tahay?

Xadiga iyo nooca shaqo ee raga iyo haweenku ka qabtaan D/hoose wuxuu fakir naga siinayaa waxa uu yahay adeega loo baahan yahay iyo sida raga iyo haweenku ugu qaybgelayaan. Iyadoo tusaale ahaan loo soo qaadanayo adeega biyaha, la fahmayo kuwa iibiya biyaha, kuwa gata, kuwa soo

LAFAGURKA LAMAANAHA:

Faaqidaada lamaanha waa hab lagu faaqidayo. faaqidaada lamaanuhu wuxuu falaqidayaa sida raga , iyo haweenka, wiilasha iyo gabdhuhu siday u wada dhaqmaan bulshad dhexdeeda- arimaha ku saabsan heerarkooda gacanku hayn, helitaan, iyo ka qaybgalka bulshada.

Waa agab muhiim u ah aragtida ku daridda lamaanaha iyo hagaajinta waxqabadka habmaamulka deegaanka . Markaad doonayso inaad fahamto howl kasta oo D/hoose waa muhiim inaad fahamto firfircoonaanta u dhexaysa raga iyo haweenka bulshad dhexdeed.

Faaqidaadda lamaanuhu waa aalad loogu tala galay fahamka xiriirka ku sah san sinaan la,aanta haweenka iyo raga iyo wiilasha iyo gabdhaha ee bulshada dhexdeeda. Waa muhiim maadaama ay wajahayso asalka dhibta ee aysan ahayn xaaladda sare ee sinaan la,aanta .

Maxay lagu cabiraa Falaqidaada lamaanahaa?

- Baahiyaha kala duwan ee raga iyo haweenka (waxqabad iyo habraac)
- Awoodaha kala duwan ee raga iyo haweenka
- Aragtiyada kala duwan, doorarka iyo masuuliyadaha raga iyo haweenka
- Heerarka kala duwan ee gacan ku haynta raga iyo haweenka
- Raadadka kala duwan ee hawlgalka raga iyo haweenka
- Xanibaadaha iyo fursadaha raga iyo haweenka

Maxay yihiin su,aalaha uu waydiiyo falaqidaada lamaanaha?

- Yaa gacanta ku haya waxa bulshada dhexdeeda?
- Yaa geli/heli kara waxa bulshada dhexdeeda?
- Yaa masuul ka ah waxa Bulshada dhexdeeda?
- Yaa shaqaysta waxa Bulshada dhexdeeda?
- Yaa sameeya waxa Bulshada Dhexdeeda?
- Yaa dhaxla waxa Bulshada Dhexdeeda?
- Yaa leh waxa bulshada dhexdeeda?

Su'aalahani waxay gacan naga siinayaan inaan samayno sawir ah doorark, masuuliyadaha, helida iyo fursadaha raga iyo haweenka, wiilasha iyo gabdhaha. Anagoo is barbardhigayna arimahan waxaan helaynaa faham wayn oo ku saabsan sinaan la,aanta lamaanaha ee bulshada dhexdeeda ah. Intaa waxaa dheer, fahamka qaabka go'aan gaarida, habraaca, iyo qaabka sharciga, diinta, iyo xeerarka bulshada gebi ahaanba waxay gacan naga siinayaan inaan helno sawir wayn oo ku saabsan xaalada lamaanaha.

Raga iyo dumarku maaha kuwo (koox) isku mid ah.

Haweenka iyo ragu, iyagoo isku xiran (Constituency) waxay isu abaabuli karaan sabab guud, ama dan. Si walba ha ahaatee waa muhiim in la xusuusnaado in kooxani aysan isku jinsi ahayn. Waxaa loo baahan yahay in la tixgeliyo kala duwanaant sida dabaqada ,isu tafiirta, bulsho taariikheedka ,muhimada iyo danaha raga iyo dumarka , kala qaybsanaanta ama isu xirnanta oo laga yaabo in ay in badan xaqiijiso meelaha dabaqadoodda ama isu midnimadooda qomiyadeed iyo doorarka lamaanahoodda..

Maxay tahay ujeedadan u isticmaalayno falanqaynta lamaanaha?

Ujeedada aan u isticmaalayno aalada falanqaynta lamaanaha waa inaan gacan ka siino hogaamiyasha maxaliga inay fahmaan xawliga, baaxada lamaanaha ee D/hoose. Xogta laga helo falanqayntan wuxuu gacan ka siinayaa hogaamiyayaasha dhanka qorshaynta, kala saraysiinta dhibaatooyinka, go'aan gaarida, fududaynta, dhexdhexaadinta iyo qorshaynta miisaaniyada hab ay ugu faa'iidaan labada raga iyo haweenka si siman.

Tan ugu muhiimsan si walba ha noqotee, falanqaynta lamaanuhu wuxuu eegayaa xiriirka kala duwan oo isku dhafan. Lafagurkaan guud wuxuu ka dib cadaynayaa isku xirka aasaasiga ah ee u dhexeeya dhinacyadan kala duwan. Hadaba, falanqaynta lamaanaha wuxuu noo sheegayaa sababta adkaysay

- Baahiyaha lamaanaha ee dhabta ah waxay diirada saarayaan baahiya deg dega ah ee raga iyo dumarka xaalada taagan- tusaale ahaan baahida haweenka ee helitaan siman ee dhanka t gaadiidka ama waxbarashada.
- Hanaanka baahida lamaanaha waxaa looga tixraacaya isbedelka marxalada fee bulshada ee ku wajahan in la aamino dhaxalka siman ee raga iyo dumarka. Howlaha wajahaya baahiyaha dhabta ah ee lamaanaha waa inay ku salaysan yihiin aragtida tabnaha baahiyaha marxalada ee sinaanta lamaanahas.

Tani waa muhiim maxaa yeelay hawlaha habmaamulka deegaanka waa inay yeeshaan ujeedooyin dhab ah oo ku salaysan hab maamul waxtar leh, iyo hanaanka baahida oo gacan ka gaysanaya in laga dhiga bulshada mid aad waxtar u leh. Sidaa darteed, hadafka guud ee hab-maamulka D/hoose waa inuu ka tarjumaa hanaanka baahiyaha dhabta ah ee lamaanaha.

Sidee doorka dhaqaalaha haweenku ee bulshada Soomaaliyeed u xoojinayaa haweenka?

Maadaama ay bulshadu u dhisan tahay hab qalafsan, waa wax dhaca in arimaha sida bedilada kaalinka dhaqaalaha ee haweenka Soomaaliyeed uu raad kala duwan ku leeyahay heerar kala duwan. Waxay kaloo raad ku leeyihiin bulshada mustaqbalka dhow iyo kan fog

Tusaale ahaan, haday korodho dumarka wax ku iibinaya suuqyada waxaa kordhaya inay dumarku galaan saaxada bulshada ee heerarka suuqyada iyo hawlaha gacansiga yar yar, laakiin waxay kordhinaysaa culayskooda shaqo, waxayna ka xadaynaysaa howlaha kale ee bulshada, sida helida tababarka iyo howlahooda kale ee wakhtigooda fasaxa ah.

HORUMARINTA HAWEENKA IYO LAMAANAHAN IYO HORUMARKA:

SIDEE AAN U SAMEYNAYNA TANI?

- In raga iyo dumarku si siman uga qaybgalaan hawlaha D/Hoose?
- In baahiyaha raga iyo haweenka si siman loo tixgeliyo?
- Naalehu waxay taageerayaan dhammaan sinaanta ka dhexeysa raga iyo dumarka bulshadda dhexdeeda

o Horumarka haweenka iyo Lamaanaha iyo Horumarka waa laba tabopod oo kala duwan oo loo sameeyey si ay u wajaahan sida ugu wanaagsan ee aan u taabagelin karno lamaanaha anagoo ka jawaabayna sadex su,aal oo dusha lagu sheegay.

Waa muhiim in lamaanaha loo isticmaalo sida aalad hawlgaal ah oo hagaajinaysa waxqabadka D/hoose marka ay tiigsanayso labadaba ujeedo tan dhow iyo kuwa dheer. Kuwani waa:


- In la helo ka qaybgal way nee haweenku ku yeeshaan hawlaha iyo go,aaminta D/hoose
- In haweenka iyo raga bulshada dhexdeda si siman gacan loo siiyo

Dumarka iyo horumarka waa hanaan loo sameeyey inuu hagaajiyo heerka ka qaybgalka haweenka ee bulshada dhexdeeda guud ahaan. Waxay kaloo hanaankani diirada saarayaa hawlaha khuseeya haweenka. Hawlahani waxay noqdeen kuwo t go,doosan., inkastooay ahaayeen kuwo lagu wajihi karo baahiyaha ujeedada koowaad, wajihi maayaan ujeedada labaad

Baahida dumarka ee dakhliga wuxuu ka tarjumayaa baahida dhabta ah ee dumarku ee dumarku si ay wax u taraan nolosha qoyska,una sugaan noloshiisha. Xoojinta dhaqaalaha haweenka wuxuu wajahayaa hanaanka baahida lamaanaha si ay yeeshaan hanaan dhaqaale, iyo sugid nolol oo dhigma tan raga mustaqbalka dheer.

tabta Lamaanaha iyo horumarka waxaa loo sameeyey natiijada dhaliilahan. Hadafka tabtu waa taabagelinta lamaanaha, iyadoo laysu eegayo baahiyaha raga iyo haweenka, iyadoo si isle'eg oo wadajira looga qayb gelinayo raga iyo dumarka dhinacyada bulshada.

Labadan tabood waxaa loo isticmaali karaa in la sameeyo qaab loogu dari karo lamaanaha xaalada Soomaliya taaso ka dhigaysa mida uguy caqligasan bulsho ahaan, , siyaasad ahaan iyo dhaqan ahaanba.. Ka qaybgelinta haweenka hawlaha D/hoose, iyo go'aan gaarida waxay gacan ka gaysan karaan inuu hagaago gebi-ahaanba sinaanta u dhexaysa raga iyo dumarka hadii la isticmaalo aalada (toolka) faaqidaada lamaanaha. Tani waxay gacan ka gaysanaysaa in ka qaybgalka haweenka uu noqdo mid u dhacaya qaab balaaran oo lamaanuhu siman yihiin. Sawirkan ayaa gacan naga siinaya inuu sharaxo qaabkan:



Hadafka u dhexeeya sinaanta haweenka iyo raga waxaaloo kal jejebin kara si dhab ah iyo tbeynta baahiyaha.

Taabagelinta Lamaanaha:

Waa maxay macnaha taabagelinta lamaanaha?

Taabagelinta lamaanaha waxaa loola jeedaa in lagu daro aragtida/fikirka lamaanaha

- Howlahoo dhan dhinac walaba, laga soo bilaabo qorshaynta ilaa fulinta
- Qaab dhismeedka ururada (Hay'adaha) iyo habraacooda.
- Haykalka sharciyo iyo siyaasada

Maxaan u taabagelinaynaa lamaanaha?

Fikirka/aragtida lamaanaha waa in loo isticmaalaa qaybaha shaqada oo dhan, maxaa yeelay sinaan la,aanta lamaanaha iyo wuxuu saamayn ku yeelanayaa qaybaha bulshada oo dhan. Kala duwanaanshan wuxuu raad ku yeelanayaa sida bulshadu mid waxtar leh u noqon lahayd. Natijaduna waxay saamaynaysaa horukaca D/Hoose.

Sidee u taabagelin karnaa lamaanaha?

Taabagelinta lamaanaha ma laha dariiqo degsan oo la raaco- ma jiro hal dariiqo oo la raaci karo. Waa in lagu dabakhaa hab dhismeedka ururada, bulshada iyo/ama dhaqanka. Xaalada Soomaaliya ee heerka D/hoose, taabagelinta lamaanaha waxaa la hirgelin karaa iyadoo lagu isticmaalayo lafagurka lamaanaha dhinac walba ee qorshaynta, horumarinta, iyo adeeg siinta. Taabagelinta lamaanaha iyadoo la bilaabay haykalo iyo wacyigelin qaabdhismeedka D/hoose lafteeda waa muhiim. Waa muhiim in hanaanka D/hoose laftiisu uu noqdo mid dhug u leh lamaanaha haday doonayaan inay ku daraan aragtida/fikirka lamaanaha howlahooda oo dhan.

Maxaa tani micneheedu tahay xaaladda soomaalidda.

Muxuu yahay nuxurka (macnaha) in lagu daro aragtida lamaanaha habmaamulka deegaanka xaalada Soomaliya. Waxaa jira dhowr hab oo lamaanuhu raad ugu yeelan karo sida D/hoose u shaqayso. Marka koowaad, sideebay raga iyo dumarku ugu kala duwan yihiin isticmaalka adeega dadwaynaha? Muxuu yahay doorarkooda kala duwan oo ay ka qaataan?

Hadaad samayso faaqidaada doorarkooda lamaanaha (eeg qaybta xigta ee faaqidaada lamaanaha) ayaa gacan kaa siin doona inaad arinkan sharaxdo (cadayso). Si walba ha ahaatee, waa muhiim inuu jiro garawsi guud in siyaasada iyo barnaamijyada ay fuliso D/hoose uu raad kala duwan ku yeelan doono qaybaha kala gedisan bulshada. Hanaanka ugu haboon hadaba waa inuu xaqiijiya in si siman loo tixgeliyo baahiyaha raga iyo haweenka.

Taabagelinta lamaanaha ee qorshaynta magaalaynta:


Hawlaha qorshaynta magaalaynta waxaa ku jira dhinacyo kala duwan oo magaalada- sida loo qorsheeyo loona maamulo. Go'aamadani si kala duwan ay u saamaynayaan raga iyo dumarka. Baahiya iyo mudnaanka kala duwan ee raga iyo haweenka ayaa loo baahan yahay inuu ka salaysan yahay qorshaynta magaalayntu si ay magaaladu si dhab ah ugu shaqayso danaha qof walba.

Tusaale ahaan, marka go'aan laga gaarayo qaybinta magaalada, sida raga iyo haweenku u isticmaalaan gobo gaar ah waa in la tixgeliyaa. Maxay tahay shaqooyinka ay halkaas ka hayaan? Goormay shaqooyinkaas halkaas ka qabtaan, maxayna tahay waxa ay u baahan yihiin? Tani waxay gacan naga siinaysaa inaad ogaano baahiyahooda marka aan qaybinayno magaalada, sida koronto gelinta iwm. Dumarku inta badan howlo ganacsi ayay ku leeyihiin guryaha, sidaa darteed, qaybinta meelaha deeganka waxaa la doonayaa intuu tan ka tarjumo si loo xaqiijiyo in haweenku sii wadaan ganacsiga ay ka wadaan guryahooda, taasoo aan wax ka tarayn xoojinta dhaqaalahooda, balse ay tahay horumarinta dhaqaalahada meesha oo dhan.

SIDEE D/HOOSE U HAGAAJIN KARTAA XAALADAN?

Shaxdan labaad waxay muujinaysaa sida ka qaybglaka D/hoose raad ugu leedahay inay bedesho giraantani korna ugu qaadayso wax soo saarka dadwaynaha.


SHAXDA 2:



SIDEE SINAAN LA'AANTA LAMAANUHU RAAD UGU YEESHAA (WAXQABADKA D/HOOSE?)

Howlaha D/hoose waxay natiijo toos ah oo la cabiri karo ku leedahay sinaanta lamaanaha (Gender equality), si la mid ah sida arimaha lamaanaha raad toos ah ugu leeyihiin wax ku oolnimadiyo hawlaha hab maamulka deegaanka..

SHAXDA 1:



Giraanta labadaba haweenka iyo gabadheedu ma gudanayaan doorka muwaadin oo waxtar leh. Si loo hagaajiyo xaaladan, D/hoose waxay qaadi kartaa talaabooyin badan. Iyadoo qoondayneysa khayraadka, D/hoose hagaajin mayso keliya nolosha haweenka iyo sinaantooda bulshada, laakiin waxay caawineysa inay noqdaan kuwo waxtar leh I, sida darteed waxay dhammaan horumarineysa D/hoose guud ahaan..

TUSAALE: XOOJINTA HAWEEKU WAA WANAAJINTA D/HOOSE

Dib- usoo noolaynta dhaqaalaha marka loo eego
burburinta sandaqaadaha:

Iyadoo lays barbar dhigayo xaaladaha Bambasa, Kiinya, Berbera iyo Somaliland

Mambasa:

Meel u dhow Likoni Ferry ee Bambasa, waxaa jira suuq xoosh ah oo aan rasmi ahayn- waxaa lagu iibshaa qudaar, Fruit iyo noocyo kala duwan oo ganacsiga yar yar ka ah. Kuwa wax ku iibsada suuqan cooshka ah ee aan rasmiga ahayn waxay ahaayeen haween. D/hoose waxay u aragtay xuuqaa cooshka ah oo u soo dhawaanaya jidka mid sharci daro ah uuna sababay wadada aada Ferry oo baabuurto isku xirto. D/hoose ayaa gaartay go'aan ka dib markay la tashatay kuwa qorsheeya magaalaynta- laakiin lamay tashan bulshada, iyo haweenka ka ganacsada suuqa- sidaa darteed ayaa la gartay in suuqa meesha laga kaxeeyo (fujiyo) si loo sahlo u socodka baabuurta ee Ferry.

Suuqii ayaa si xoog ah loo raray, taasoo dhalisay banaankab rabshado wata iyo iskudhac dhexmaray dadwaynaha iyo D/hoose. Noloshii dhaqaalaha ee goobtaas ayaa la carqaladeeyey, gaar ahaan haweenkii ka ganacsan jiray suuqaa, taasoo dhibaato halis ah u keentay haweenkaas iyo qoysaskay taakulayn jireen. Caradu waxay ahayn iyaga oon lala tashan ama aan la siin goob kale oo ku sii wataan howlahooda ganacsi, haweenkii iyo ragii ayaa bilaabay inay dib u dhisaan cooshashkii, taasoo mar labaad dhalisay in aagaas wadadu xiranto.

Natiijo:

D/hoose kuma guulaysan ujjeedadeedii inay hagaajiso socodka iyo hanaanka socodka gaadiidka ee goobta. Talaabadeedii wuxuu cawaaqib xun u gaystay D/hoose, labada dhanka dhaqaalaha iyo xiriirkeeda dadwaynaha. Dhaqaale ayaa la qoondeeyey- oo lagu lumiyey dadaalkii rariinka taasoo sababtay in la qaado ollole xiriir dadwayne si laysugu dayo in xaliyo dhibtaas. Xiisadan u dhexaysay D/hoose iyo dadwaynaha ayaa sii socotay taasoo sababtay in D/hoose ay gudan kari waydo awoodeedii adeega bulsho.

Dersi:

D/hoose ma ka qaybgelisay bulshada, gaar ahaan haweenka haweenka ay khusaysay howshani, waxay samayn kadhay xal lagu wajahayo baahida dadwaynahay ee dhanka ganacsiga aan rasmiga ahayn iyo sidoo kale hagaajinta socodka baabuurta.

Hashini waxay raad aad uga badan ka raga ku yeelatay haweenka goobtaas.

Berbera:

D/hoose ee Berbera, suuqu wuxuu ahaa mid aan lahayn hanaam ganacsato oo qorshaysan, uuna ku yar yahay dhulka ay badeecadahooda ku iibsadaan, mar labaad inta badan ganacsatadu waxay ahaayeen haween. Way u cadayd D/hoose in loo baahnaa in arinka wax laga qabto. D/hoose iyo UN-Habitat ayaa bilaabay kulamo dadwayne, gaar ahaan iyo abaaraya haweenka suuqa, inay sheegaan baahiyaha ugu wayn si loo dayactiro suuqa.

Haweenkii aad ayay uga hadleen dhibaatooyinka ka jira suuqa iminka jira iyo mudnaanta dhisme goob suuq cusub. Arimahii ay mudnaanta siiyeen ayaa la tixgeliyey, suuqii cusbaana waxaa lagu jaangooyey baahiyahoodii. Dumarku waxay ka qaybqaateen inay afkaartooda dhiibtan, ayna xiriir dhow la yeeshaan D/Hoose. Dayactirkii ayaa loo fuliyey qaab wajahaya dhibaatooyinka ugu way way nee haweenka haysta, oo aan wax yeelayn ganacsigooda, maadaama uu ahaa meesha ay noloshooda kala soo baxaan.

Natiijo:

Dayactirkii suuqa ayaa lagu guulaystay, laguna daray dhisme cusub oo hagaajiyey goobihii loogu tala galay haweenka, ayna heleen meelo wanaagsan oo fariistaan markay ganacsanayaan, waxaa la siiyey koronto iyo marawaxado iyo meelo ay wax ku karstadaan intay suuqa joogaan. Xiriirkii u dhexeeyey haweenka iyo D/hoose ayaa noqday mid wanaagsan iyadoo mashruucani dhaliyey iskaashi dheeraad ah. Dhaqaalihii lama carqaladayn, hagaajinta suuquna wuxuu dhaliyey horumar dhaqaale oo D/hoose samaysay.

Daris:

Ka qaybgalka haweenka suuqa wuxuu ahaa arin muhiim u ah najaxaada mashruuca. Ka go, naan la, aanta haweenka, iyo cayimida baahiyahooda, iyo siday u kala daran yihiin, jaangoynta mashruuca way ka duwanaa lahayd sedan, mashruucuna sedan uma guulaysteen.

Hanaankan wuxuu kaloo hagaajiyey xaalada shaqada ee haweenka iyadoo yaraysay wakhtigii ka lumi jiray iyadoo la siiyey tashiilaad cuno Karin. Tani waxay siisay haweenka inay helaan adeegyo kale kana qaybgalaan howlaha dadwaynaha. Ugu dambayntii, ka qaybgalkan haweenka suuqa wuxuu siiyey dareen sare iyo kalsooni wuxuuna ku dhigay haweenka xubno bulshada ka mid ah oo waxtar leh..

WARAAQDA XOGTA: QAAB-HOWLEED LAGU LAFA-GURO LAMAANAHA:

Su'aalaha la tixgelinayo: TP PT Doorka iyo masuuliyada: ● Maxay qabtaan raga iyo haweenku? Xagee ayay raga iyo haweenku ka qabtaan waxa ay samaynayaan? ● Goormay raga iyo haweenku qabtaan waxay samaynayaan? (Isticmaalka wakhtiga maalintii, yo isticmaalka wakhtiga xilliyada)	Dhinacyada la tixgelinayo: Doorka wax soo saar ee raga iyo haweenka (shaqooyinka mushahariga ah, shaqo qofku samaysto iyo nolol raadin) Doorka (wax soosaarka) ee raga iyo haweenka (shaqada guriga, xanaanada caruurta, bukaanka, iyo waayeenimo) Ka qaybgalka haweenka/howlaha iskaa wax-u qabso ee raga iyo haweenka (shaqooyinka mutadawacnimada ee bulshadood dhan ka faa'iidsato) ● Ka qaybqaadashada siyaasada bulshada ee raga iyo haweenka (Go'aan-gaarida/metelaada magaca bulshada oo dhan)
Hantida: ● Waa maxay hantida/fursadaha nololeed ee ay heli karaan raga iyo haweenka? Maxay tahay caqabadaha soo wajaha raga iyo haweenka?	● Hanti bini'aadan maxay yihiin adeegyadu, adeegyada caafimaadka, waxbarashada iwm ee raga iyo haweenku heli karaan? ● Hantida dabiiciga Maxay yihiin khayraadka dabiiciga ah ee raga iyo dumarku heli karaan, ama wax ku darsan karaan? Tusaale: dhulka, iyo shaqaalaha ● Hantida Bulsho maxay yihiin taakulaynta bulsho ee raga iyo dumarku heli karaan? ● Hantida lacageed maxay yihiin helida iyo gacan ku haynta hantida/dakhliga ee ilaha rasmiga ama aan rasmiga ahayn ee daynta iwm.
Awooda iyo Go'aan-gaarida: ● Maxay yihiin go'aan-gaarida raga iyo haweenku ka qaybgalaan? ● Maxay yihiin go'aan-gaarida raga ama haweenku gacanta ku hayaan inta badan (tusaale: kuwa ay aad saamaynta ugu leeyihiin go,aamida) ● Maxay yihiin Caqabadaha soo food saara raga iyo haweenka?	● Heerka Guriga- maxay yihiin heerarka gacan ku haynta go,aaminta kharashaadka guriga ee raga iyo dumarka? ● Heer Bulsho-maxay yihiin heerarka gacan ku haynta raga iyo haweenku ku leeyihiin go'aan-gaarida bulshada, tusaale: go,aaminta maamulka biyo siinta bulshada
Baahiyaha, kala mudnaantooda, iyo aragtiyada: ● Maxay yihiin baahiyaha raga iyo haweenka iyo siday u kala daran yihiin? ● Maxay tahay aragtiyada ay ka qabaan qaababka ugu haboon laguna joogtayn karo wajajida baahiyahan?	<i>Baahiyaha iyo mudnaantooda</i> ● Maxay yihiin baahiyaha "dhabta ah" ee haweenka iyo raga? (tusaale: xaalada kaalimada lamaanaha ee jita, masuuliyadaha, helida iyo khayraadka). ● Tusaale, maxay yihiin baahiyaha haweenka haysta ee dhanka biyaha oo ka duwan kuwa raga (tusaale: dumarku waa kuwa ugu horeeya ee biyaha soo dhaansha, oo aad u isticmala) ● Maxay yihiin baahiyada "Istaraajiyadeed" ee lamaanaha (tusaale: waxa loo baahan yahay si loo bedelo kaalimada lamaanaha ee jira iyo dhaqaalaha loo baahan yahay si loo abuuro sinaan balaaran ee fursadaha iyo faa'iidada) ● Tusaale, maxay yihiin raadka waxqabadku ku yeelan karo sinaanta raga iyo haweenka ee dhanka shaqa helida (tusaale: kordhinta shaqa helida haweenka ee wadooyinka) ds) <i>Aragtiyada</i> Maxay yihiin aragtiyada kala duwan ee raga iyo haweenka ka qabaan habka qaybinta (delivery)-doorashada teknooligiyada, habka howlgalka, maamulka iyo dayactirka shaqa helida (tusaale: kordhinta shaqa helida haweenka ee wadooyinka) ds)

¹ Shaxdani waxay ku salaysantahay layli ay haruumariyeen waaxda ingiriiska ee haruumarinta caalamka (DFID).

LLAMAANAHA IYO KA QAYBGALKA:

Maxay muhiim u tahay in raga iyo dumarku si siman uga qaybgalaan?

Ka qaybgalku waa qaybta ugu muhiimsan ee hab-maamulka wanaagsan ee magaalaynta. Bulshada oo laga qaybgeliyo howlaha hab-maamulka wanaagsan waxay ka dhigaysaa D/hoose mid aad waxtar ugu leh dhanka wax ka qabadka baahiyaha dadka, oo aad isugu dubadhacsan, maadaama dhaqaalaha D/hoose si buuxda loo isticmaalay.

Ka qaybgalka haweenka wuxuu sugayaa in dhamaan xooga dadka ka shaqeeya D/hoose la wada isticmaalay. Hadii haweenka laga saaro hanaanka qorshaynta, badh ka mid ah xooga iyo waxtarka bulshada ayaa la lumiye.

Haweenka iyo ragu aragtiyo kala duwan ayay ka qabaan D/hoose- mudnaano kala duwan, baahiyo iyo awoodo (capacities). Sidaa darteed, ka qaybgalka simani wuxuu sugayaa in aragtiyada iyo fahamka kala duwan la dhegaysto oo la tixgeliyo. Tani waxay gacan ka siinaysaa in hab-maamulka maxaligu gaaro go'aanada ugu wanaagsan ee uu wax uga qabanayo baahiyaha D/hoose.

Hadii haweenku aysan ka qaybqaadan 50% awooda waxqabad ee dadka D/hoose ayaa la lumiye.

Ka qaybgalku wuxuu ka dhacaa dhinacyo iyo heerar kala duwan oo D/hoose dhexdeeda ah. Waa muhiim in hogaamiyaashu fahmaan dhinacyada kala duwan ee raga iyo haweenku uga qayb qaadan karaan, iyo caqabadaha ka qaybgalka siman ee heerarka kala duwan. Sawirkan soo socda wuxuu muujinayaa afarta dhinac ee ugu muhiimsan ka qaybgalka D/hoose oo raadka ku yeelanaya haweenka iyo raga .sawirkani wuxuu u noqon karaa tixraac faa'iido leh marka laga hadlayo ka qaybgalka iyo sida raga iyo haweenku uga helaan macluumaad heerarka kala duwan.



Maxay yihiin tabta aan isticmaali karno si ay raga iyo haweenku si siman uga wada qaybgalaan?

Helida Xogta:

Xogtu waa mid ka mid ah aassaska dhanka ka qaybgalka. Hadaysan dadku la socon waxa ka dhacaya Dowladooda Hoose, albaabka ka qaybgalku iyaga uma furna.

Tusaale, xadiga hoose ee wax akhris/qorista haweenka marka barbardhigo raga, ayaa ka dhigaysa saxaafada micnuhu yahay sinaan la'aanta wacyi galinta xogta. Si walba ha noqotee, dhaqanka xoogan ee af ka sheega bulshada ayaa siinaya fursad waxtar leh in warku wada gaaro

Si walba ha noqotee, sida macluumaadku u gaaro qaybaha kala duwan ee bulshada ayaa la xiriira kaalimada lamaanaha. Dumarka oo la wajaho marka la bixinayo macluumaadka marxalada bilawga ah, waxay gacan ka siinaysaa in dumarku la socdaan arimaha, iyo geedi-socodka, ayna fududaato inay wax ku darsadaan marxaladaha dambe.

Tabaha sugaya in raga iyo haweenku si siman u helaan macluumaadka ayaa waxaa ka mid ah;

- In la sugo in macluumaadka laga baahiyo siyaalo ay raga iyo haweenkuba u heli karaan (tusaale. Raadyaha, TVga iyo sidoo kale joornaalada);
- Wakhtiyada la tebinayo in la hubiyo inay haweenka iyo raga gaarayso
In si toos ah loogu dhawaaqo oo toos loola gala bulshad meelaha magaalooyinka ah- si loo sugo in dad gaar ah oo la xushay la ogaysiiyo;
- In lagu soo bandhigo luuqada caadiga ah iyo tan shaqada;
- In la abaabulo ururada haweenka maxaliga inay fududeeyaan in warka gaarsiyaan dumarka iyo sidoo kale ragaba;
- Hadii la doonayo in la qabto kulamo lagu baahinayo macluumaadka; ka feker inaad kulan gaar ah la yeelato haweenka, ama in lagula kulmo haweenka guryahooda, haday tadi sahlayso in dumarku warka helaan;
- In laga qaybgeliyo haweenka shaqaynaya ama wax bartay inay irid u noqdaan in la gaaro haweenka;
- Isku day, haday dhici karto, inaad si toos ah u gaarto haweenka, intii loo sii mari lahaa nimankooda ama aabayaashood, si loo hagaajiyo xaalada sinaanta haweenka ee arimaha la xiriira arimaha magaalaynta.

Wadatashiyada:

Maadaama wadatashigu yahay xiriir/isgaarsiin laba dhinac ah waa muhiim in raga iyo haweenka si siman looga wada qaybgeliyo xiriirkan (wada tashiga). In la sameeyo hanaan ay raga iyo haweenku u cabiro karaan fikradahooda hanaanka wada tashiga furan oo u baahan in si cad loo fahmo baaxada iyo xooga lamaanaha ee bulshada dhexdeeda. Gaar ahaan, caqabadaha in six or ah loo hadlo ama looga qaybgalo kulamada wadatashiga waa in la muujiyaa.

In laga qaybgeliyo haweenka kulamada wada tashiga ee bulshada Soomalida

Kartida in haweenku six xor ah u hadlaan oo ay cabiraan fikirkooda marka laysku dhafan yahay waa ay dhib badan tahay. Kulamada dhaqanka ee heerka qabaa'ilka waa goobaha loo arko haweenka inay ku haboon yihiin inay ka hadlaan. Raga ayaa dhaqan ahaan loo arkaa inay metelaan qoyska, tani waxay caqabad ku tahay in dumarku six xor ah codkooda uga dhiibtan saaxada bulshada.. intaan waxaa dheer, ururada abaabulan ee haweenka, sida ururada haweenka , ayaa inta badan u fududahay inay si caadi ah codkooda u dhiibtan marka la barbardhigo haweenka aqoontoodu hoosayso iyo kuwa aan ku xirayn ururadan. Tani waxay muujinaysaa inay u egtahay inay jiraan qayb balaaran oo haweenka oo aan awoodi Karin, ama aan doonayn inay ka hadlaan kulamada wadatashiga ee isku dhafan. Sidaa darteed waxaa loo baahan yahay in la sameeyo tabbo kale oo u ogaalanaya in raga iyo haweenka labadaba codkooda la maqlo. Tusaale, in loo qabto haweenka kulamo wadatashi gobo ay dareemayaan

Tabo dhowr ah oo sugaya in haweenka iyo ragu si siman uga wada qaybgalaan kulamada wada tashiga waxaa ka mid ah:

- Wakhtiga kulamada- inta badan masuuliyada haweenku hayaan wakhtiyo gaar ah ayaa ka reebaya inay yimaadaan kulamada markaan ku darno kulamo la qabto habeenkii waxay haweenka ku keeni karaan dhibaatooyin dhanka gaadiidka oo ay waayaan ama dhibaato dhanka amniga.

- Goobta lagu qabanayo kulamada- gaar a ahaan markay xanibaana waajibaadyo kale oo gudaha, ama xanibaado ay sababeen dhaqanku, inta badan waa ku adag tahay haweenka inay sameeyaan safaro dhaadheer si ay uga qayb galaan kulamada. Meeshay suuragal tahay, u qorshee kulanka meel u dhow beesha, ama u habay haweenka gaadiid ay u raacaan goobta kulanka wakhti macquul ah.
- Wakhtiga Kulamada- kulamada wakhtiga dheer socda waxay ku adkaynaysaa haweenka inay ka yimaadaan howsha culus ee guriga iyo waajibaadyada kale. Kulamo taxana ah oo gaagaaban oo socda dhowr maalmood ayaa noqon kara kuwa haweenku haleelaan.
- Tashiilaadka xanaanada caruurta- inta badan haweenku ma awoodaan inay kulamada ka qaybgalaan sababtoo ah waajibaadka xanaanada caruurta- goobta kulanka agtiisa oo laga sameeyo xurun aan rasmi ahayn ee xanaanada caruurta waxay sahlayso ka qaybgalka haweenka iyadoon aan kordhinayn culayskooda shaqo.
- Gaadiid la siiyo- culayska shaqo ee haweenku guryaha ka hayaan ayaa dhalinaysa inay wakhti yar u helaan ka qaybgalka kulamada. Gaadiid oo la siiyo wuxuu yaraynayaa wakhtigay ka mashquulsanaayeen ka qaybgalka waxayna fududaynaysaa ka qaybgalkooda marka laga eego xaga masaafada iyo amniga.
- Haday jirto dareen dhanka dhaqanka ah oo ku saabsan inay raga iyo haweenku si wada jira ah u kulmaan, u qorshee kulan gaar ah haweenka
- Ka feker inaad si wanaagsan u habayso kuraasta markaad qorshaynayso kulamada raga iyo haweenka oo wada jira.
- Tixgeli caqabadaha wakhtiga ee haysta raga iyo haweenka- inta badan kulamadu waxay haweenka ka xanibayaan inay qaybtaan howl-maalmeedkoodii guriga sida diyaarinta cuntada. Qorshay inaad cunno siiso haday tani tahay arin caqabad ah.
- Aragtida bulshada ayaa caqabad ku noqon kara haweenka inay ka qaybgalaan-hubi inaad ku darto qorshe wada-tashi oo ay ku jirto wacyigelin dadwayne oo lagu barayo xubnaha bulshada muhiimada ka qaybgal siman ee raga iyo haweenka.
- Qorshaynta kulamo haween ee aaga guryahooda waxaa badanaa looga hadlaa caqabadahan waxayna u noqon kartaa xal kale oo lagu hagaajinayo ka qaybgalka haweenka, gaar ahaan marxaladaha hore ee geedisocodka qorshaynta.
In raga iyo haweenka si siman looga qaybgeliyo marka qabanayo kulamada qorshaynta si caqabadaha soo bixi kara mar hore loo sii ogaado oo loo wajaho

Isfaham Samaynta: (Consensus Building)

Samaynta Isfahamka waa qayb muhiim u ah ka qaybgalka. Inaad u ogaalato kooxaha inay ka wada hadlaan aragtiyadooda kala duwan, una heshiiyaan ujeedo iskumid ah iyo hanaankii lagu gaari lahaa waxay raad ku yeelanaysaa isdhexgalka raga iyo haweenka ee kooxda dhexdeeda.

Tani dhaqan ahaan waa hab ku adag haweenka iyo kooxaha la takooro, oo inta badan u badan inay aamusnaadaan ama raacaan fikradaha inta badan intii ay soo bandhigi lahaayeen sidii arimaha loogu wajihi lahaa aragiyo (dhinacyo) cusub. Sidaa darteed hanaan fududayn (sahlid) dareen lamaane aad ayuu muhiim ugu yahay samaynta isfahamka. Tani waa qaybta ugu muhiimsan ee kaalinka hogaamiyaha oo fududeeye (sahle) ah. Gaar ahaan xaalada Soomaliya waa cadahay in dhiirigelinta haweenka inay ka hadlaan kulamada ay guud ahaan yeelanayso saamayn waxtar leh.

Habab lagu sugayo ka qaybgal raga iyo haweenka oo siman ee samaynta Isfahamka waxaa ka mid ah;

- In la isticmaalo fududeeyaal lagu taba-baray wacyiglinta lamaanaha
- In la isticmaalo howl keexeed si loogu ogolaado haweenka inay soo jeedshaan aragtidooda iyagoo aan ku jirin jewi habsigeliya
- Dardar gelin waa hab wanaagsan oo lagu heli karo ka qaybgalka xubnaha kooxda oo dhan- waa inaad hubisaa in fikradohoo dhan la qoro oo la aqoonsado;
- La shaqee koox raga iyo kuwa dumar ah bilowga, ka dibna kooxaha si wadajir ah isugu keen; In haweenka loo qabto kulamo hor dhac ah si loogu bandhigo mawduucyada, waxay inta badan ka caawisaa haweenka inay rayigooda si kalsooni ah uga dhiibtaan kulamada wadatashiga iskudhafan;
- Eeg sida kuraasta, ama habka fadhiga kulanka loo habeeyey si aad u hubiso in koox aan la takoorin;
- Dhiirigeli metelaad isku dhafan oo raga iyo haween ka kala yimi qaybaha kala duwan ee dadwaynaha iyo kooxaha daneeyayaasha. Markaad diirada saaraysid raga iyo haweenka inay yihiin xubno bulshada oo muhiim ah, sidoo kale waa muhiim inaan xusuusano inaysan jirayn (homogenous perspective of women)- aragtiyadu way isbedelayaan iyagoo ku xitan arimaha

bulshada ee kale sida dada', xaalada dhaqaale, qowmiyad iyo wixii la mid ah. Sidaa darteed ka qaybgelinta kuwa haweenka iyo raga metela waa muhiim

- U Isticmaal kulamada layliyo laga wada qaybgalo si aan u dhiirigeliso inay ka qaybgalayaashu fikradahoodu ugu darsadaan- tusaale, hadaad haysato safaf qof walboo ka mid ah uu jeediyo fikirkiisa, u ogolow ka qaybgalayaasha inay fikradahooda ku qoraan kaarar ka dibna la akhriyo oo laga wada-hadlo.

HOGAAMINTA MAXALIGA IYO SINAANTA LAMAANAHA: DOORKA HOGAANKA MAXALIGA

Sidee Hogaamiyaasha deegaanka u horumarin karaan Sinaanta Lamaanaha?

Hogaamiyaasha deegaanku waxay qabtaan doorarka kala duwan ee hab maamulka ee haboon oo is-xukun wanaagsan. Mid walboo ka mid ah doorarkaasi waxaa ku jiri doona fursado muhiim u ah hagaajinta sinaanta lamaanaha iyo horumarinta ka qaybgal siman ee raga iyo haweenka ee go'aan gaarida. Shaxdan ayaa hogaamiyaasha u ah waraaq tixraac oo deg deg ah si loo muujiyo sida aragtida lamaanuhu ugu haboon tahay mid walboo doorarkani iyo waxa ay tahay aalad la isticmaali karo si loo taabo galiyo lamaanaha.

SIDEH HOGAAMIYAASHA DEEGAANKU U WAJIHI KARAAN BAAHIYAHA RAGA IYO HAWEENKA?		
HOGAAMIYE DEEGAAN OO SIYAASAD DAJIYE AH	FIKRADO ● Marka la samaynayo siyaasad hogaamiya wuxuu u baahan yahay inuu hubiyo in baahiyaha raga iyo haweenka si siman uga dhexmuuqdaan siyaasadaha iyo barnaamijyada ka dhasha ● Dooraka hogaamiyaha waa inuu hubiyaa in marka lagu jiro habka qorshayta wadaaga, labadaba raga iyo haweenka ay siman oo heer macna leh uga wada qaybgalaan. ● Siyaasadu waa inay ogolaataa wax soosaar siman ee raga iyo haweenka si D/hoose u noqoto mid waxtar leh.	AALADAHA KU HABOON ● Faaqidaada Lamaanaha ● Ka doodista/ kala saraysiinta caqabadaha layliga ka qayb galka haweenka ● Giraanta sinaanta lamaanaha iyo siyaasada D/hoose ama layliga hawl galka.
HOGAAMIYE DEEGAAN OO AH GO'AAMIYE	● In laga heshiiyo danaha iyo baahiyaha kala duwan ee raga iyo haweenka, iyo samaynta go'aamo la ogyahay oo tan ku salaysan waxay shaqo u noqon doontaa hogaamiyaha si loo horumariyo sinaanta lamaanaha. ● In la fahmo mudnaanta iyo xaqiiqada kala duwan iyadoo la isticmaalayo falanqaynta lamaanaha waxay ka dhigaysaa hogaamiyaha go'aamiyo waxtar leh	● Qaabaynta hawlaha. ● Layliga isticmaalka waqtiga. ● Helida iyo qaabaynta khayraadka.
HOGAAMIYE DEEGAAN OO ISGAADHSIYA AH.	● In la helo fariimaha kooxada D/hoose oo aan codkooda la maqal-haweenka aan waxbaran, tusaale ahaan. Tani waa furaha hogaamiya wanaagsan. ● Xiriir iyo la socod wanaagsan fekerka raga iyo haweenku ka qabaan arin gaar ah waa shaqada ugu muhiimsan ee hogaamiyaha maxaliga. Si tan loo sameeyo waxay u baahan yihiin inay noqdaan dhegeystayaal wanaagsan ● Fahamka iyo isticmaalida farsamooyin kala duwan si loo hubiyo in afkaaraha la gudbiyey ay gaaraan raga iyo haweenka. ● In la furo (wado)/ xiriir u dhexeeya dowladda iyo bulshada oo ay u furan labadaba haweenka iyo raga aad ayay muhiim u tahay.	● Dagaysiga lamaanaha iyo layliga isgaadhsiinta ● Farsamaynta ka qayb galkawadaniyiinta(saha no wadaniyiinta)

HOGAAMIYE DEEGAAN OO FUDUDEEYE AH	- In la sahlo kulamo si loo hubiyo in haweenku si la mid raga uga qaybgalaan, waxay u noqon doontaa xirfad muhiim u ah hogaamiyaha deegaan. - In la sahlo ka qaybgal siman oo haweenka ku yeeshaan howlaha D/hoose aad ayay muhiim u tahay.	- KALASAREYSIIN ISU DHIGAN WACAN. - FAAQIDAADA LAMMAANAHA. - DOOR QAADASHO.
HOGAAMIYE DEEGAAN OO KARIGELIYE AH	- In laga dhigo haweenka iyo ragaba inay noqdaan kuwo si firfircoon oo macna leh uga qaybgalaan maamulka deegaan iyo bulshada rayidka ah waa dhinac muhiim ah ee hogaamiyaha deegaan oo ah kartisiye - In la qaado caqabadaha haweenka ee ka qaybgalka heerarka kala duwan ee D/hoose-sharciyan, qaab dhismeed, isticmaalka wakhtiga, iwm.	- KA QAYBGELINTA HAYADA HA GAARKA AH. - HAWEENKA IYO KA QAYBGALKA - WARQADAHA KHAYRAADKA.
THOGAAMIYE DEEGAAN OO GORGORIYE AH	In la fahmo danaha kala duwan ee haweenka iyo raga oo salka ku haya lamaanaha, iyo tabaha wadhadalka oo labadaba faa'iido siman u leh waa mid ka mid doorka ugu muhiimsan ee hogaamiyaha deegaan oo wada-hadashiiye ah.	DOOR QAADASHA
HOGAAMIYE DEEGAAN OO MASUUL MAALIYADEED AH	- Helid iyo in maamulka deegaanku u qoondeeyo khayraadka in lagu daro haweenka, gaar ahaan in la aqoonsado doorka dhaqaaleaha balaaran ee haweenka - Soomaalidu leeyihiin. Sidaa darteed, doorka hogaamiyaha deegaanka oo xooleeye ah waa inuu ka duulaa ka qaybgalka labadaba haweenka iyo raga ee qoondaynta khayraadka. - Dakhli abuurka Dhoose- waa in dumarku lug ku leeyihiin - Gacan ku haynta qaybinta iyo kharashaadka- waa muhiim ka qaybgalka bulshada rayidka iyo haweenka	- Faaqidaada lamaanaha. - Xogta kalasaaran ee lamaanaha. - Faaqidaada lamaanaha ee miisaaniyada iyo isticmaalka waqtiga. - Faaqidaada lamaanaha ee hkarashka adeegyada.
HOGAAMIYE DEEGAAN OO KOR JOOGA AH.	Marka la kormeerayo howlaha maamulka deegaanka, hogaamiyaasha deegaanku waa inay tixraacaan falanqanta lamaanaha, waana inay isticmaala tusmooyin si loo ogaado siday hawluhu u saamaynaayaan haweenka iyo dhanka kale ragaba.	- Faaqidaada lamaanaha. - Kala saarida hogta lamaanaha. - Tilmaameyaal ay ku salaysan yihiin lamaanuhu.
HOGAAMIYE DEEGAAN OO AWOOD ADEEGSADA AH.	- Hogaamiyaha deegaanku waa inuu leeyahay kartida uuna isticmaalo/sho jagadiisa si uu saamayn iyo horumarin isbedel waxtar leh uga sameeyo bulshada dhexdeeda iyo xaalada haweenka marka loo fiiriyo tan raga. - In lagu dhex socda cirifyada siyaasadeed qaab baahiyaha raga iyo haweenkaba si siman loo aqoonsado loona tixgeliyo.	Faaqidaada lamaanaha.

HOGAAMIYE DEEGAAN OO HAY'AD DHISE AH	● In la dhiiri geliyo ka qaybgal siman ee raga iyo haweenka ee hawlaha ismaamulka deegaan iyadoo la horumarinayo tababarada haweenka ee maamulka dhexdiisa, iyo dhiirigelin in haweenka loo shaqaaleeyo jagooyinka sar sare ● In la dejiyo lagana dhaqan geliyo qaab dhismeed lamaane siman goobta shaqada ● In la dhiirigeliyo loona sameeyo ollolayaal wacyigelin raga iyo haweenka	● Ku darida lamaanaha layliga hay'adaha. ● Faaqidaada lamaanaha. ● Tilmaamayaasha ay ku salaysanyihiin laqmaanayaashu. ● Dareen tababar.
HOGAAMIYE DEEGAAN OO KARIGELIYE AH	● In la kulmiyo xirfado iyo aalado horumarinaya ka qaybgalka siman ee haweenka lana hubiyo iyadoo la isticmaalayo falanqanta lamaanaha, iyadoo fikradaha iyo baahiyaha haweenka iyo raga lagu daro hawlaha Golaha Deegaanka.	● Faaqidaada lamaanaha. ● Xogta kala saarida lamaanaha. ● Tilmaamayaasha ay ku salaysanyihiin lamaanayaashu. ● Doodista layliga ka qayb galka haweenka. ● Door ka qaadashada layliga ka qayb galka.

KU DARISTA LAMAANHA DOORARKA KALA DUWAN EE HOGAANKA MAXALIGA

Qaybtani waxay fikrad kooban kaa siinaysaa sababta lamaanuhu uu ugu noqon doono muhiim mid walba oo ka mid ah ka hogaamiya, iyo fikrado dhowr ah oo ku saabsan sidaad uga shaqayn karto inaad haweenka ku soo darto howlahan iyo inaad ku darto lamaanaha howlaha la xiriira kaalin walba.

1. Hogaamiyaha oo Siyaasad (Tub) Dejiye ah

Siyaasad Dejiye ahaan, hadaan si is le'eg uga qaybgeliyo raga iyo haweenka dhanka qorshaynta, waxaan bulshada u samayn doonaa siyaasado (Tubo) aad waxtar ugu leh bulshada gebi ahaan.

Maxay tani dhab u tahay?

Siyaasad degiye ahaan, waxaa masuul ka tahay inaad samayso ahdaafta, baaro xalal bediil ah uuna dejiyo tabo kugu jhaynaya ama metelaya howlaha iminka jira iyo kuwa mustaqbalka oo wax u taraya bulshada. Si aad arinkan si dhab ah wax uga qabato waxaad u baahan tahay inaad fahamto baahiya iyo mudnaanaha kala duwan ee bulshada. Raga iyo haweenku waxay ka yeelan doonaan aragatiyo iyo baahiyo kala duwan ee dhanka go'aaminta siyaasada. Si aad u samayso siyaasad waxtar u leh inay gacan ka siiso bulshada kana caawino D/hoose inay u shaqayso si hoboona, waxaad u baahan tahay inaad tixgeliso aragtiyada labadaba, haweenka iyo raga.

Sidee tan lagu gaari karaa?

Shaqadan siyaad dejinta waxay ku xiraan doonta ka kaloo badan iyo hawlaha aad qaban doonto. Waa muhiim marka ugu horaysa inaad fahamto baahiyaha haweenka iyo raga markaad samaynaysid siyaasada. Sidaa darteed, falanqaynta lamaanaha waa aalada ugu muhiimsan oo loo isticmaali karo. Si walba ha ahaatee, waa in la sugaa in codadka raga iyo haweenka si siman loo maqlaa, qaab dhismeedka D/hoose oo saamaxa in lays dhaafsado afkaarahan wuxuu raad ku yeelanayaa awoodaada inaad samayso siyaasad dareen u leh lamaanaha. Hadaba doorkaaga fududeeyaha, karti-siiyaha, iyo beel-dhisaha wuxuu noqon doonaa mid muhiim u ah markaad ku howlan tahay inaad samayso ama dejiso siyaasad si siman u dhiirigelinaysa horumarinta raga iyo haweenka.

2. HOGAAMIYA DEEGAAN OO GO'AAMIYE AH

Go'aan Sameeye ahaan, hadaan fahmo baahiyaha iyo awoodaha dadwaynaha, raga iyo dumarba, go'aanada aan gaaro waxay ku yeelan doontaa horumarinta deegaankayga raadka ugu waxtar badan

Maxay tani dhab u tahay

Xildhibaanaka oo go'aan sameeye ah waxaa loola jeedaa fahamka baahiyo iyo mudnaanaha kala duwan ee dadwaynaha iyo baahida in la sameeyo go'aano loo arko inay yihiin kuwo u wanaagsan bulshada gebi ahaan. Sidaa darteed baahiyaha kala duwan ee haweenka iyo raga waa inay u cadaadaan hogaamiyaha si uu u gaaro go'aano waxtar leh.

Raadka go'aanada la xiriira raga iyo haweenka ee ay gaarto D/hoose sidoo kale aad ayuu muhiim u yahay. Tusaale, go'aanka D/hoose ee in la dumiyo cooshashka aan sharciga ahayn wuxuu saamayn wayn ku yeelanayaa nolosha iyo dhaqaalaha haweenka, maadaama aqlabiyada ugu badan ee dhismayaashan ay leeyihiin haweenku.

Sidee tan lagu gaari karaa?

Mar labaad, fahmida baahiyahan ayaa ah arinka ugu muhiimsan ee gaarida go'aano dareen u leh lamaanaha. Tan waxaa loola jeedaa inaad u baahan tahay inaad hesho macluumaad, adoo isticmaalaya falanqaynta lamaanaha. Laakiin sidoo kale waa muhiim inaad si wacan ugala xiriirto raga iyo haweenka labadaba go'aamada aad gaarayso aadna uga qaybgelisaa iyagoo bulsho siman ah. Arinkan doorkaaga fududayn wuxuu noqon doonaa mid aad muhiim u ah.

3. Hogaamiyaha oo Isgaarsiye ah

Hogaamiye ahaan, hadaan dhegaysto haweenka iyo ragaba, waxaan heli doonaa aragtiyo kala duwan oo ku saabsan arimaha D/hoose. Hadaan dhegaysto labadaba raga iyo haweenka, waxaan si wanaagsan ugu qareemi karaa baahiyaha bulshada gebi ahaanba.

Maxay tani dhab u tahay?

Dhanka ugu muhiimsan ee isgaarsiinta waxtarka leh ee laga doonayo hogaamiyaha waa dhegaysiga. Tani waxay leedahay muhiimad gaar ah si aad u fahamto fariimaha kala duwan ee qaybaha bulshada ka imaanaya iyo fahamka muhiimada in si wacan loola xiriiro fariimahan.

Sidee tan loo gaari karaa?

Citizen surveys are one method of listening to the communities and can be a particularly effective way of getting the views and priorities of women as well as men. Doorka ururada haweenka ee fulinta daraasadahan oo kale waxay ku leedahay muhiimad gaar ah xaalada Soomalida, maadaama ururadani noqon karaan kuwa wax ku ool ah inay gaaraan, gaar ahaan haweenka aan waxbaran, kuwaasoo dhanka kale ma gaabsada inay hadlaan..

4. Hogaamiyaha oo Fududeeya ah

Fududeeye ahaan, hadaan fahmo mowqifka raga iyo haweenka iyo siday u wada xiriiran, feker wanaagsan ayaan ka helayaa xaalada, waxaana awood u yeelan karaa inaan sahlo hanaan wanaagsan oo ku heli karaan xal labadooduba.

Maxay tani run u tahay?

Fududayntu waa mid ka mid ka ugu muhiimsan Xildhibaanaka marka uu horumarinayo sinaanta lamaanaha uuna ku taabagelinayo lamaanaha hab-maamulka magaalaynta. Fududeeyuhu, wuxuu xooga saarayaa inuu dhiirigeliyo dadaalo wadaaga, inuu dadka gacan ka siiyo xalinta dhibaatooyinka, iyo maaraynta khilaafaadka u dhexeeye shakhsiyaadka iyo kooxaha. Sidaa darteed, waxa laga rabo inuu sameeyo xildhibaanaka xaalada lamaanaha waa inuu dhiirigeliyo jawi faa'iido wanaag-inuu ka shaqeeyo sidii loo heli lahaa ahdaaf wadaag ah oo ku salaysan sinaanta lamaanaha-iyo inuu gacan ka gaysto inuu maareeyo wixii xiisad oo ka soo baxa arinkan.

Sidee tan lagu gaari karaa?

Si si-siman loo helo rayiga raga iyo haweenkan, loona wajaho dhibaatooyinka magaalada, hogaamiyaha waa inuu diirada saaraa inuu sahlo hab uu haweenka ka qaybgelinayo inay hadlaan uuna ka dhigo rayigooda mid si siman loo maqlo. Tani waa itijaah muhiim ah maxaa yeelay haweenku sida qaaliibka waxaa soo wajaho caqabado la xiriira dhanka ka qaybgalka marka loo fiirsho raga, tani waa sababta tabahani diirada u saarayaan ka qaybgalka haweenka. Tabaha ka qaybgalka siman ee raga iyo haweenka, eeg buuga kan la socda Lamaanaha iyo ka qaybgalka haweenka hab-maamulka maxaliga ah..

5. Hogaamiyaha oo kartisiye ah

Kartisiye anoo ah, hadaan xoojiyo raga iyo haweenka labadaba iyo haweenka bulshada dhexdeeda, waxaan gacan ka gaysan doonaa inaan dhiso D/hoose oo aad wax ugu ool ah, waxaana dhalin karaa in bulshadoo dhan wax ku darsato horuraminta, intii badh keliya oo bulshada ay ku biirin lahay.

Maxay tani dhab u tahay?

Shaqada kartisiinta ee hogaamiya waa inuu balaariyo baaxada, iyo doorka hogaamiyuhu uu kaga shaqaynayo inuu xoojiyo dadka bulshada inay ka qaataan heer balaaran ee masuuliyadeed iyo ka qaybgal. Xoojintuu waa fikir muhiimad gaar ah leh markay timaado ka simaanta lamaanaha iyo ka qaybgalka haweenka. Xoojinta haweenka si ay kaalin wayn u qaataan, kana qaybgalaan, gacana ku hayaan hawlaha iyo go'aamada waxay raad muhiim ah ku yeelanaysaa waxtarka (wax soosaarka) bulshadoo dhan. Adoo abuuraya kaalimo siman oo raga iyo dumarka ee bulshad dhexdeeda, hogaamiyaha wuxuu kordhiyaa guud ahaan awooda bulshada. Tani bedeli mayso awooda dadwaynaha, laakiin way kordhinaysaa guud ahaan. Tani waxay dhalinaysaa in dadwaynuhu awood balaaran u yeeshaan inay wax ku darsadaan hormarintooda.

Sidee tan lagu gaari karaa?

Shabakadaha waa dhanka ugu muhiimsan doorka xildhibaanaka oo kartisiye ah. Horumarinta ixtuxirnaanta waxay ku yeelan sinaanta lamaanaha raad waxtar leh bulshada dhexdeeda. Iskuxirnaantu waxay isu keeni kartaa kooxaha haweenka iyo kooxo ay dhaqan ahaan xiriiir yar lahaayeen, si loo dhiirigeliyo ka qaybgal haweenka oo balaaran, iyo isfaham balaaran oo dhexmara raga iyo haweenka ee dhinacyada iyo mudnaanaha kala duwan.

Dhisida iyo gacansiinta shabakadaha jira oo dhiirigelinaya sinaanta lamaanaha waxay leedahay waxtar gaar ah. Xaalada Soomaalida, shabakadaha haweenka oo aad loo dhisay waxay noqonayaan meel wanaagsan oo wax laga bilaabo (laga galo). Si walba ha noqotee, kaalinka xildhibaanaka waa mid muhiim u ah inuu ka soo dhaqaajiyo ururada haweenka cidlada, kana dhigo kuwo iskaashi iyo wadashaqayn la sameeya ururada ka jira bulshada dhexdeeda.

Iskaashi waa arin kale oo kartisiin, kana ciyaaraya door muhiin ah horumarinta sinaanta lamaanaha. Mar labaad, iskaashigu wuxuu wajahayaa baahida loo qabo in la sameeyo iskaashi waxku ool ah iyo ka qaybgal balaaran oo bulshadu ku yeelato hawlaha dowlada. Iskaashiga waxaa loo arki karaa talaabo ka shishaysa shabakadaynta, maadaama dhabakadaynta dhexdeeda iskaashi ayaa lagu habayn karaa

6. Hogaamiyaha DEEGAAN OO gorgoriye ah

Anoo Hogaamiye ah, hadaan fahmo danaha raga iyo haweenka, si waxtar iyo faa'ido bulshada u leh ayaan u wada hadalsiin lahaa.

Maxay tani dhab u tahay?

waa fikrad khaldan in sinaanta lamaanuha loola jeedo in koox bulshada ka mid ahi ay luminayso awoodeeda. Mid ka mid kaalimada xildhibaanaka oo wada-hadashiiye ah ayay tahay inuu hubiyo in dhibaha si sax looga gorgortamo, hadlo loona fahmo si kooxuhu u gaaraan go'aano laga heshiin karo oo si siman uga tarjumaysa baahiyaha iyo mudnaanaha raga iyo dumarkaba.

Gorgorin waxaa sidoo kale loola jeedaa baahida loo qabo in xildhibaanaku fahmo baahiyaha, iyo danaha kala duwan oo u dhexeeya kooxaha ku leh, ama uu saameeyo arin gaar ahi. Fahamka sida baahiyaha raga iyo dumarku ay u kala duwan yihiin iyagoo salka ku haya ka iyo masuuliyadaha lamaanaha ayaa xudun u ah kaalinkan. In laga wada-hadlo ka qaybgal siman ee haweenka sidoo kale waa xirfad laga doonayo xildhibaanaka. Tusaale, marka la fulinayo barnaamijyada biyaha iyo nadaafada, urur ka mid ah Somaliland ayaa dhisay gudi fulin oo haween ku jiraan, waxay ka dib isku dayeen inay ku daraan gudiga horumarinta tuulada, waxayna la kulmeen ka hor-imaad baaxad leh. Waxay si guuli ku jirto uga wada hadleen ka qaybgelinta haweenka gudiga iyagoo soo bandhigaya siday haweenku laf dhabar ugu yihiin arimaha biyaha iyo nadaafada, ayna yihiin kuwa ugu horeeya ee isticmaalaya adeegyadan, iminkana haweenku waxay ku jiraan guddiyo dhowr ah.

Sidee tan loo gaari karaa?

La shaqaynta ururada haweenka- gaar ahaan shabakadaha- beesha dhexdeed ayaa aad waxtar u leh. Ka qaybgelinta kooxahan iyagoo ah daneeyayaal waxay kaa caawin doontaa inaad miisaanto metelaada aragtiyada raga iyo haweenka waxayna shaqadaada u fududayn doontaa laba hab. Tan koowaad, shabakadahani waxay gacan ka gaysan doonaan inay dhiiri geliyaan in bulshadu fahamto arimaha kala duwan ee haweenka. Tan labaad, inay u qareemaan waxay caawin doontaa dadaalkaaga inaad heshiis ka gaarto arimo dhiirigelinaya sinaan dhex marta raga iyo haweenka.

7. Hogaamiyaha oo Xooleeye (Masuul Maaliyadeed) ah:

Anoo ah Masuul maaliyadeed, hadaan ka soo wada qaybgeliyo haweenka iyo raga bulshada, waxaa ii sahlaa in doonta inaan ururiyo lacag, waxaana ugu qoondaynayaa si haboon, anoo ka dhigaya maalgelinta mid waxtar leh.

Maxay tani dhab u tahay?

Dhab ahaan, mid ka mid ah dhinacyada ugu muhiimsan ee lagu hagaajinayo waxtarka D/Hoose ee baahiyaha haweenka iyo raga waa in la sigaa in dhaqaalaha iyo lacagaha sida loo jaangooyey ay ka tarjunto baahiyaha iyo mudnaanaha raga iyo haweenka labadaba.

Raadka miisaaniyada D/Hoose ku yeelanayso nolosha raga iyo haweenka wuu kala duwanaa doonaa sababtoo ah kaalimada iyo masuuliyadaha kala duwan ooy bulsdhada dhexdeeda ku

leeyihiin. Tani aad ayay muhiim u tahay, waana inay u cadaataa xildhibaanku inuu fahmo arinkan markuu gaarayo go'aamada la xiriira maaliyada.

Sidee tan loo gaari karaa?

Maxaa yeelay maaliyadu waa arin D/hoose dhexdeeda ah. Aad ayay muhiim u tahay in waaxyahay D/Hoose u heelan yihiin lamaanaha. Sidaa darteen doorkaaga dhisida ururada wuxuu kaa caawin doonaa inaad aasaasto qoondayn iyo dejin miisaaniyadeed oo dareen u leh lamaanaha. Sidaa darteed, waa muhiim inaad tixgeliso, raacdo tubo miisaaniyad dejin oo ka soo wada qayb gelinaysa daneeyayaasha marka maalka loo astaynayo mudnaanaha. Qaab dhismeedkan waxaa laga soo qayb gelin karaa haweenka beesha, adoo isticmaalaya xirfadahaaga kaalinkaaga oo fududeeye iyo gorgoriye ah, waxaad ka shaqayn kartaa inaad samayso miisaaniyad dareen u leh lamaanaha.

8. Hogaamiyaha oo Korjooge ah:

Anoo korjooge ah, hadaan hubiyo in raga iyo haweenka si siman loogala dhaqmay bulshada iyo qaybaha gaarka ah (ganacsatada), waxaan sugi lahaa horumar waxtar leh oo deg deg ah.

Maxay tani dhab u tahay?

Xildhibaanka Kor joogaha ah waa inuu hubiyaa in Golaha Deegaanku, shaqaalaha D/hoose iyo kuwa kale oo qaybta ka ah horumarinta sida hay'adaha biyaha ku shaqa leh ay hayaan wadooyin fulin barnaamijyo iyo dejin tubo siyaasado wax qabad. Sidaa darteed doorkan, hogaamiyahu wuxuu xaqiijin karaa in haweenka laga qaybgeliyey qorshaynta iyo fulinta barnaamijyada. Arinkan oo la gaaro, si wacan ayaa loo qaabayn doonaa , nafaca iyo habsamida qorshuhuna wuu u wanaagsanaan doonaa raga iyo haweenka labadaba.

Sidee tan lagu gaari karaa?

Tani waxay xiriir la leedahay ka kale, laakiin howshan waa muhiim inaad xaqiijiyo in D/hoose si habsami ah baahiso macluumaadka markay qorshayntu iyo fulintu socoto, si baahiyaha raga iyo haweenku si siman u muuqdaan. Tan waxaa ku jirta in hubiyo in waaxyaha D/hoose oo dhan ay helaan xogta falanqaynta lamaanaha, xogtaana loo furfuro qaab lamaane.

9. Hogaamiyaha oo Awood adeegsade ah

Xildhibaanka oo Awoodisa- Maale ah, hadaan u isticmaalo awoodayda inaan xoojiyo haweenka, waxaan noqonayaa mid waxtar u leh horumarinta deegaankayga.

Maxay tani dhab u tahay?

Kaalinka haweenku ku leeyihiin D/hoose waa muhiim, maaha keliya inay yihiin haween, laakiin waxay yihiin kala bar tirada dadka, sidaa darteed, isticmaalka awoodu wuxuu ka yeelayaa in bar tirada dadweynuhu gacan siiyaan kana qaybgalaan barnaamijyada D/hoose iyo horumarinta deegaanka taasoo hagaajin doonta habsamida waxqabad, taasoo bedelkeeda kordhinaysa awoodu uu leeyahay xildhibaanku si uu horumariyo bulshadiisa.

Sidee tan lagu gaari karaa?

Inaad u isticmaasho aragtiyada lamaanaha doorkan Isticmaalka awooda waxay ku xiran tahay sidaad u fahamto arimaha kala duwan ee raga iyo dumarka haysta awoodaadaana aad u isticmaasho sidaad si siman ugu faa'iidayn lahayd. Sidaa darteed, inaad isticmaasho habka (aalada) falanqaynta lamaanaha aadna si wanaagsan u fahamto raga iyo haweenka bulshada ayaa ah mid muhiim ah.

10. Hogaamiyaha oo hayad -Dhise ah:

Anoo Urur Dhise ah, hadaan hubiyo in qaaka ururada (waaxyuhu) u dhisan yihiin ay gacan ka gaysanayaan ka qaybgalka raga iyo haweenka, barnaamijyada iyo siyaasadoodu waxay noqonayaan kuwo aad taaba gal ah.

Maxay tani dhab u tahay?

Xaqiijinta in haweenka iyo raga si buuxda oo siman loogu qaybiyey qaab dhismeedka maamulka Dhoose waxay la mid tahay xooga iyo waxtarka dadka qaybaha Dhoose ka shaqeeya si wanaagsan looga faa'iidaystay, taasoo ka dhigaysa ururadooda kuwo aad waxtar u leh. Waxaa intaa dheer, inaad hubiso in ururadani awood u leeyihiin inay ka jawaabaan baahiyaha kala duwan ee raga iyo haweenka labadaba ee ururka dhexdiisa iyo deegaanka guud ahaan, waxay noqonaysaa in ururadu ay awood u yeeshaan inay fuliyaan howlo waxku- ool ah

Waa muhiim markaad gacan siinayso qaab dhismeedka ururada inaad ku darto hanaan gacan ka gaysanaya ka qaybgal siman oo raga iyo haweenku yeeshaan. Tusaale, u qaybsame hawlaha lamaanaha oooy D/hoose ka magacawdo waaxyaha munaasibka u ah, kaasoo shaqadiisu tahay inuu xiriiriyo guddi masuul ka ah inuu eego siyaalaha loogu xoojin karo haweenka nidaamka D/hoose ayaa aad faa'iido u lehl.

Sidee tan lagu gaari karaa?

D/hoose waa inay tusaale ugu noqoto bulshada inay tahay urur sinaan lamaane ku dhisan, kana dhigaysa mid ka mid doorkeeda bulshada dhexdeeda (Local Authorities should set examples as gender equal institutions as part of their role in the community). Hadaba, muhiimad gaar ah ayay leedahay inay ka jiraan shaqada dhexdeeda iyo barnaamijyadeeda siyaasado iyo qawaaniin xaqiijinaya sinaanta lamaanaha. Su,aasha arinka la xiriirta ee uu baahan yahay inuu xildhibaan ku uu ka jawaabo waa sidee lagu gaari karaa in la sameeyo nidaam noocan oo kale ah, iyo sidii lagu heli lahaa jawi gacn ka gaysan kara iyo waxa loo baahan yahay in la dhaqan geliyo siyaasadaha?

Maadaama doorka xildhibaan ku noqon doono inuu dhiso ururka laftiisa iyo shaqaalihiiisa, doorkani wuxuu isu keenayaa taabagelinta lamaanaha isagoo isticmaalaya tababaro iyo in shaqaalah uu shaqada dhexdeeda gacan ku siiyo inay ururdooda u dhisaan qaab balaaran iyagoo ka eegaya dhanka lamaanaha. Intaa waxaa dheer, dhiirigelinta qaab maamul ku miisaaman sinaanta lamaanaha-oo aan ahayn dhanka tirada, laakiin dhanka kaalimada iyo masuuliyadaha -ayaa aad muhiim u ah. Tani waxay u dhici kartaa in gacan laga siiyo kor-uqaadida aqoonta haweenka ka haya kaalimada aan aad u sarayn, iyo dhiirigelinta ka qaybgalka kuwa hada haya maamulk iyo sidoo kale in si siman looga shaqaaleeyo haweenka iyo raga jagooyinka maamulka.

Barbaarin shaqaale, iyadoo la muujinayo kaalimada shaqo ee ururka dhexdiisa ayaa qayb muhiim u ah jagada xildhibaan ka. Tan dhexdeeda, waa muhiim in siyaasadaha ku saabsan sinaanta lamaanaha si cad loo soo bandhigo, iyo in la dejiyo hanaan wax ka qabanaya kala takoor ka lamaanaha ee ka jira shaqada dhexdeeda. Nidaamkani wuxuu gacan naga siinayaa in la dhaqan geliyo sinaanta lamaanaha..

11. Hogaamiyaha oo Hogaamiye ah:

Hogaamiye ahaan, masuuliyad ayaan u hayaa bulshadood dhan, rag iyo dumar, yar iyo wayn. Hadaan kazoo wada qaybgeliyo raga iyo haweenka, si wanaagsan ayaan ugu adeegi karaa bulshada, anoo tusaale u noqonaya, waxaan kicin karaa isbedel waxtar u leh dhamaan heerarka bulshada.

Maxay tani dhab u tahay?

Hogaamintu dhab ahaantii waa xiriirka u dhexeeya hogaamiyaha iyo dadka ku taxaluqa, waa laba qaab, hanaan ka qaybgelin oo ku salaysan is-aamin iyo xushman. Kaaliinka hogaamiyaha waa door isu keenaya qaybaha kala duwan adoo isticmaalaya xirfadaha kala duwan ee dhiirigelinaya hanaanka maamul wanaaga ee heer degmo. Sidaa darteed, haweenkoo laga qayb geliyo hanaanka maamulka wanaagsan waxay hogaamiyaha ka dhigaysaa inuu hogaamiyo dhab ah u noqdo gebi ahaanba bulshada D/hoose. Hogaamiyuhu wuxuu qaabkaan ku helayaa sharaf badan, maadaama ka qaybgelinta iyo gacan siinta haweenka macnaheedu yahay in D/hoose noqoto mid aad waxtar u leh, hogaamiyuhuna uu yeelanayo awood uu ku abaabulo bulshada.

Sidee tan lagu gaari karaa?

Maadaama kaalinkani uu si wadajir ah isu keeni kono ka kale dhinac ahaan, nuxurka inaad dhinacyada kale ka gaarto xaalad dareen u leh lamaanaha waxay ku xiraan doontaa doorkaaga hogaanimo. Iskaashi lala sameeyo ururada muhiimka ah sidoo kale waa dhinac muhiim ah, maadaama ay kuu noqonayso marin maadaama hogaamiyaha laga doonayo inuu fahmo aragtiyada haweenka ee bulshada dhexdeeda, sidoo kale faa'iido isku xir leh ayay u tahay kaalimadaada kale

TABABAR IYO AGAB HOWLGAL



HORDHACA TABABARKA IYO AALADAHA HOWLQALKKA

Layligan taxanahi ahi iyo agabkani waxaa laga doonayaa inay ka qaybgalayaasha u kaxeeyaan geedisocod ay ku fahmayaan lamaanaha fikir ahaan, marka laga eego dhaqankooda iyo xaalada hanaanka ismaamulka.

Waa muhiim in tababarka lamaanuhu uu gacan ka siinayo in la bayaansho argtida lamaanaha isagoo ku xiraaya waaqica dhabta ah oo hogaamiyuhu tixraaci karo iyo in la siiyo hogaamiyaha agab uu isticmaalo si uu u dabakho.

Waxaa qaybtan ku jira agabyo kala duwan, iyadoo laga eegayo caqabadaha wakhtiga iyo kala duwanaanshaha aqooneed ee kooxda iwm, waxaa laysugu dari karaa qaabab kala duwan. Si walba ha noqotee, waa muhiim in su'aalahan la soo bandhigo. Layli walba wuxuu la xiriiraa qayb gaar ah si aad ugu sharaxdo tababarka aadna bixisid sawir dhamaystiran oo ku saabsan lamaanaha iyo hab-maamulka maxaliga.

1. Maxaa yahay macnaha lamaanaha?
2. Maxay yihiin caqabadaha hortaagan ka qaybgalka haweenka?
3. Sidee lamaanuhu xiriir ula leeyahay Hab-maamulka Maxaliga?
4. Sidee lamaanuhu raad ugu leeyahay waxtarka iyo habsamida hab-maamulka maxaliga?
5. Sidee lamaanaha si la taaban karo loo isticmaali karaa?
6. Sidee arimahan si wadajir ah loo hordhigi karaa hogaamiyayaasha?

Macluumaad wakhtiga kuu dhowraya:

Ku dheji weero ku saabsan lamaanaha gidaarada qolka si loo fahmo fariimaha iyo aaraada inta tababarka socdo. (derbiga ayaa lagu dhaafi karaa inta tababarada kale socdaan si loogun xiro kaalimada kale ee hogaamiyaha laga rabo). Tani waxay kuu dhowraysaa wakhti iyadoo xoojinaysa fikirka, waxayna noqonayaan waraaq si deg deg ah loo tixraaco intuu socdo tababarku.

Tusaalayaal dhowr ah:

- Ka qaybgalka simanu wuu ka balaaran yahay tiro isu dhiganta.
- Lamaanuhu kuma saabsana dumarka keliya.
- Lamaanuhu kuma saabsana jinsi bayolji.
- Isticmaal Aayado Quraan iyo maahmaahyo Soomaliya
- Lamaanuhu wuxuu ku saabsan yahay kaalimada, masuuliyadaha, helida, fursadaha ee raga iyo dumarka.
- Ka qaybgalka haweenka iyo raga waxaa macnaheedu yahay in habsamida iyo waxtarka D/hoose kordho.

MACLUUMAAD LA XIRIIRA TABABARKA: SU'AALO SOO NOQNODA OO LA ISWEYDIYO

Markaad bixinayso tabar ku saabsan lamaanaha, waxaa jiraya su'aalo iyo cabashooyin ay soo bandhigi doonaan ka qaybgalayaasha tababarka, waa muhiim in su'aalahan si bayaan oo qancin watada loo wajaho si ka qaybgalayaashu firkad cad ugu helaan sadexda su'aalood ee ugu muhiimsan:

1. Muxuu yahay lamaanuhu?
2. Maxay muhiim u tahay in lamaanaha lagu daro hab-maamulka maxaliga?
3. Sidee lamaanaha ugu dari karnaa hab-maamulka maxaliga?

Waxaa jiri doona wakhti marka laga hadlayo lamaanaha ay dhalan doonaan arimo badan oo iska hor-imaad ah oo ka yimaada ka qaybgalayaasha. Waa muhiim in sababta iskahor-imaadku tahay mid la fahmi karo, sharaxaadaaduna waa inay xustaa in ka hadalka lamaanuhu aysan dhalin su'aalo ku saabsan awooda iyo gacan ku haynta bulshada.

Shaxdani waxay ku siinaysaa dhowr ka mid ah su'aalaha iyo weeraha la filayo inay ka soo baxaan wadahadalka inta lagu jiro xiisada tababarka, wuxuuna ku siinayaa macluumaad ku saabsan sida loo wajahayo:

Dhowr ka mid ah su'aalaha aad laysu weydiyo iyo weedhaha:	Sida looga jawaabi karo
Sinaanta lamaanuhu waxay ka soo horjeedaa sida uu qabo Quraanku .	● Soo xigo aayadaha quraanka ee waafaqsan sinaanta guud ee raga iyo dumarka ● Sheeg aayadaha iyo axaadiista ka hadlaysa sinaanta xaga raadinta cilmiga, dhaxalka, ciqaabta, abaalmarinta, lahaanshaha iwm.
Lamaanuhu shaqo kuma leh dhaqank a Soomalida- waa fikir Galbeedka nooga yimi. Fikirka haweenka raga ayaa la soo mariyaa, aabayaashood/nimankooda/ walaalahod	● Soo xigo lamaanaha iyo dhaqanka Soomalida adoo isticmaalaya gabayo iyo sheekooyin ka turjumaya arimaha lamaanaha.-sheekadii Arawelo, ama gabayo iyo maahmaahyaha ku yaal qaybta dhaqanka Soomalida ee Buugan. ● Lamaanuhu aad ayuu u qarsoonaa waagii hore, laakiin wuu soo baxay oo isbedel ka dib dagaalkii- kuwani waa tusaalayaal muhiim ah inaad tusto jiritaanka lamaanaha ee dhaqanka Soomaalida.
Maadaama ay madax ka yihiin guriga. Dumarkoo lagu soo daro waxay wiiqaysaa kaalinka raga ee bulshada dhexdeeda.	● Fikirka lamaanuhu wuxuu ku saabsan yahay bulshada-ka qaybgalayaashu ha ka hadlaan sida haweenka iyo ragu shaqo uga qabtaan, uguna shaqeeyaan bulshada dhexdeeda, adoo diirada saaraya waxa dhici ● Lahaa". ● Arimaha lamaanaha ee maamulkii Siyaad Bare waa laga hadli karaa waa muhiim maadaama ay saamayn ku yeelan karto aragtida xun ee laga qabo afkaaraha lamaanaha. ● Xuquuqda haweenka si cad ayaa loogu sharaxay Quraanka tan waxaa ka garanaysaa muhuumada lamaanaha iyadoon loo eegin dareen reer Galbeed.
	● Sii tusaalayaal wakhtiyo raga si khaldan ay u meteleen rag kale oo qoyskooda/reerkooda-ka hadal baahida in qof walba naftiisa metelo, isagoo dibada ka ah fikirka lamaanaha, ka dibna dib ugu xiriiri baahida dumarku u qabaan ka qaybgal siman. ● Maahmaah Soomali : "Far keliya fool ma dhaqdo xataa taadu"-oo nuxurkeedu yahay in qofna qof meteli kari oo ay tahay inay natfoda metelaan.
	● Ka hadal farqiga u dhexeeya in ragu metelaan arimaha guriga iyo baahida in laga qaybgeliyo dadweynahoo dhan howlaha D/hoose-ama heer bulsho. Tani waxay khatarta ka fogaynaysaa qofka marka loo eego mowqifka ninka ee gurigiisa. (This will move the ideas away from a more personal threat against the position of a man in his own household.)

Sinaanta lamaanuhu waxay tahay in dumarku ka shaqeeyaan meel dibada ka ah gurigooda. Haday tani dhacdo masuuliyadihii guriga ayaa lumaya qoyskiina waa burburayaa.	● Ka hadal dhabta ah in dumarka iminkaba ka shaqeeystaan meelo dibada ka ah gurigooda ka dib dagaalkii sokeeye. ● Dhibtu natiijo ahaan way jiraysaa, laakin dumarka oo gacan laga siiyo inay dibada ka shaqaystaan wax badan ayay ka taraysaa inay ilaaliso caruurta tabarta daran ayna hagaajiso wanaaga iyo isku duubnida qoyska ● Ka hadal qiimaha shaqadu leedahay-si toos ah iyo si dadban-ka hadal siday bulshooyinku u qiimeeyaan si kala duwan u kala cabiraan, waxaana raad ku leh taan sida raga iyo dumarku ay kuwo waxsoosaar u noqon karaan. ● Ka hadal baahida in hogaamiyuhu, gacan ku siiyo haweenka guryahooda meelo dibada ka ah ka shaqeeya si waajibaadkii guriga loo daboolo-u isticmaal tan fursad aad kaga hadasho isticmaalka wakhtiga, baahida loo qabo in la sugo inaan culays badan la saarin haweenka si aan caruurtooda sida (gabdhaha)ay waxbarashadu u seegin sababtoo ah hooyooyinka ayay caawiyaan.
Ka qaybgalka dumarka ee go'aan gaarida waa ka soo horjeedaa dhaqankeena	● Ka hadal noocyada kala duwan ee go'aan gaarida, labadaba qaabka rasmiga iyo kaan rasmiga ahayn, iskuna day in ka qaybgalayaashu ka doodaan tusaalayaal sida haweenku go'aanaday gaareen ay u hagaajiyeen howlaha D/hoose-tusaale mowqifkii haweenka iyo go'aankoodii ay ka dhiibteen ururka hiliblayaasha burco. ● Ka hadal haweenka iyo go'aan ka gaarida meelaha dhaqan ahaan loo arko in haweenku bulshada ku leeyihiin si looga dhigo ka qaybgalka haweenka iyo in go'aankoodu noqdo mid sahal ah loo aqbalo. ● Isticmaal tusaalayaal ka qaybgalka haweenka go'aan gaarida D/hoose iyo raadkeeda wuxtarka leh
Ka hadalka haweenka iyo lamaanaha waa arimo dhib wata. Wadahadalkuna waa inuu ku saabsanaadaa bulshada Soomaaliyeed guud ahaan. Dumarku xaqoodii way	● Fikirka lamaanuhu waa mid balaaran oo lawada dhan yahay, mana khuseeyo dumarka keliya. ● Lamaanuhu waa hab si wanaagsan loogu fahmayo bulshadoo dhan__ raga iyo dumarka, wiilasha iyo gabdhaha_ wuxuuna ka dhigayaa bulshada mid xoogan, oo midaysan ee uusan kala qaybin bulshada.
haystaan. Sidaa darteed looma baahna in laga hadlo sinaanta lamaanaha	● Halkaan waxaa muhiim ah inaad dib u raaco layliyo badan oo lagu eegayo kaalimada iyo galgalka (access) dumarka iyo raga qaado macluumaadka ay kooxuhu kugu siiyeen layliyadan, kana hadal sida xaquuqo dhowr ah ee haweenka iyo ragu aysan ugu salaysnayn kaalimada laga filaayo inay qabtaan sababtoo ah jinsigooda (sex). Tusaale, haweenku waxay xaquuq siman u leeyihiin waxbarashada, laakiin haween badan ayaan wakhti u helin inay iskoolada aadaan, ama ma awoodi karaan sababo kale sababtoo ah jinsigooda. ● Jiritaanka xaquuqahani ma aha mid faacil ah, lana dhaqan gelin karo xaquuqahan. ● Waa faa'iido sidoo kale inaad hagto wadahadal guud oo ku saabsan xuquuqda- ka fogow arimaha haweenka iyo lamaanaha in mudo ah, si aad u hesho in ka qaybgalayaashu si balaaran uga fekeraan xaquuqaha. Tusaale muhiin ah waa heshiisyada ku saabsan xuquuqda caruurta, taasoo xor ka ah in caruurta la qoro askarta. Inkastoo sharcigani jiro,caruur fara badan oo Afrikaan ah ayaa lagu khasbey ciidamada, taasoo ka soo horjeeda xaquuqda caruurta. Wiilasha ayaa arinka si gaar ah ugu nugul, taasoo salka ku haysa doorkooda jinsi ee bay'olji. Isticmaalka tusaalahan wuxuu keenayaa in dib loogu laabto in laga wadahadlo arimaha lamaanaha, laakiin xagal ka duwan.

Xogo tababarka oo ujeedadu tahay in si habsami ah loo soo bandhigo fikradaha lamaanaha:
 Noqo waaqici
 Isticmaal tusaalayaal
 Noqo mid dhaqan ahaan taxadara
 Isticmaal muuqaal-isticmaal sawiro
 Isticmaal baaqyo aad jirkaaga ka samaynaysid (body Language)

LAYLIGA 1: WAXYAABAHA LAGA AAMINSANYAHAY LAMAANAHA

Ujjeedo:

Layligani wuxuu kaa caawinayaa inay ka qaybgalayaashu ay rayigooda kaga fekeraan xaaladaha raga iyo dumarka bulshada dhexdeeda. Fududeeyaha hagaya wadhadalka waa inuu isku dayaa in ka qaybgalayaashu ka fekeraan sida afkaarhanti isu bedeleen ilaa dagaalkii- tani waxay muujin doontaa in lamaanuhu yahay aragti bulsho, uuna yahay mid si joogta ah isu bedelaya.

Hordhac:

Ku adkee ka qaybgalayaasha inaysan tani ahayn imtixaan. Ka qaybgalayaashuna waa inaysan magacyadooda ku qorin waraaqaha.

Waraaq laba god ah u jeex ka qaybgalayaash raga iyo dumar. Kala hadal waxuu yahay noocyadiisu (stereotypes)-fikrada sida raga iyo ragu yihiin iyo siday u dhaqmaan- caadiyan aragtiyada iyo fikradaha bulshada dhexdeeda. Badanaa waxay ku soo bandhigi doonaan/cadayn doonaan maahmaahyo iyo sheekooyin ay kaga sheekayn karaan inta doodu socoto, iyo sidoo kale layliyada 1C iyo D.

God walba, ha ku qoraan ugu yaraan 5 weedhood oo ku saabsan sida bulshadu u aragto raga iyo haweenka. Tusaale, " raga ma istaagaan safafka dhaadheer, saburkooda ayaa yar".

Ururi waraaqaha, hana la akhriyo aragtiyada kala duwan kuna qor waraaq balaaran.

Ka wada hadla siday u arkaan aragtiyadaan kala duwan ee bulshada, ka dibna eeg sida qayb ka mid ahi isu bedeleen ilaa dagaaladii. Waxaad ka hadli kartaa sida aragtiyadani raad ugu yeesheen doorka iyo masuuliyadaha kala duwan ee raga iyo haweenku bulshada dhexdeeda ku leeyihiin. Tusaale, aragtida ah in haweenku jilicsan yihiin, raguna geesiyo yihiin, in ragu yihiin kan ilaaliya/difaaca qoyska, dumarkuna yihiin sida hanti ragu leeyahay, ayna tahay inay guriga joogto.

Wakhtiga ay qaadanayso qiyaastii: 45 daqiiqo

LAYLIGA 1A: INAAD DOORATO JINSIGA ILMAHAAGA:

Ujjeedo:

Layligani wuxuu kaa caawinayaa ka qaybgalayaasha inay ka hadlaan aragtiyada lamaanaha marka loo fiirsho dhaqankooda iyagoo malaynaya doorka ilmaha ee noloshooda. Waa layli waxtar leh oo loo isticmaaloo inuu qalada bi'yo, laakin yuusan qaadan wakhti dheer, maadaama ka qaybgale walba u baahan yahay wakhti uu kaga jawaabo

Hordhac:

U sheeg ka qaybgalayaasha inaad u sheegaysid sheeko, iyaguna ay iska dhigaan inay xaaladaa ku sugan yihiin. Hubi inaad ku adkayso inay tani aysan ahayn imtixaan.

Sheeg sheekadan soo socota:

Adiga iyo xaaskaaga ayaa iska dhigaya inaad ilmo haysataan. Waa ilmahaagii ugu horeeyey. Waa idiin suura geli wayday inaad ku jirtaan dhayalkan, waxaadna aadeen faaliye waxaadna waydiiseen inaad ilmo yeelan doontaan mustaqbalka. Faaliyihii ayaa idiin sheegay inaydaan ilmo dhali doonin ilaa aad go'aan ka gaartaan jinsiga uu noqon doono ilmuhu. Markaad go'aankaa gaartaan ayaad ilmo dhali doontaan.

Weydii mid walba oo ka mid ah ka qaybgalayaashu inuu markiisa ka jawaabo:

1. Jinsigee (wiil/gabar) rabtaa inuu noqdo ilmahaagu?
2. Waayo? (sheeg ugu yaraan sadex sababood)

ARAGTIDA RAGA IYO DUMARKA EE DHAQANKA SOOMAALIDA
WAKHTIGAY QAADANAYSA : WUXU KU XIRAN YAHAY TIRADA KOOXDA CELCELIS ILAA
24 KA QAYBGAL, 30 DAQIIQO.

LAYLIGA 1C

KA FEKERID RAGA IYO DUMARKA EE DHAQANKA SOOMALIDA

Ujjeedo:

Ujjeeda layligan waa in ka qaybgalayaashu ka fekeraan siyaalaha kala duwan ee raga iyo dumarka looga arko beelahooda. Marka laga hadlayo aragtiyada dhaqanka ku taaban ee raga iyo haweenka, ka qaybgalayaashu waxay sidoo kale bilaabi karaan inay ka hadlaan sida qaybo ka mid ah aragtiyadan dhaqanku isu bedeleen, sababtoo ah isbedelka taariikhda, sida burburkii dowladii dhexe iyo dagaalkii sokeeye. Tani waxay muujin doontaa sida lamaanuhu ugu xiran yahay geedi-socodka (isbedelka) bulshada.

Faalada fududeeyaha:

Weydii ka qaybgale walba inuu qaato waraaq oo uu ku qoro ilaa shan maahmaahood ama sheekooyin dhaqanka Soomaalida oo ku saabsan raga ama haweenka, wiilasha iyo gabdhaha. Haday ku adkaato ka qaybgalayaasha inay helaan maahmaaho ku haboon, xasuusi kuwo ka mid ah maahmaahyadii looga hadlay qaybtii lamaanaha iyo xaalada Soomaaliya, oo mar hore lagu soo maray buugan.

Ka qaybgale walba ha akhriyo mid ka mid ah liiska uu qoray, kuna qor waraaq balaaran.

Weydii ka qaybgalayaasha inay ka hadlaan su'aalahan soo socda markay ka sheekaynayaan maahmaahyada:

- Maxay oraahyadani inooga sheegayaan sida raga iyo haweenka bulshada dhexdeeda looga arko?
- Maxay oraahyadani inooga sheegayaan ka/kaalimada dhaqan ee raga iyo haweenka ee bulshada dhexdeeda?
- Sii tusaale ku saabsan sida loogu bedelay kaalimada raga iyo haweenka ee wakhtigan.
- Sii tusaale ku saabsan sida raga iyo dumarka hada u dhaqmaan.

Maahmaahyadan iyo sheekooyinkan waxaa lagu xiriirin karaa aragtiyadii (stereotypes) ay ka qaybgalayaashu qoreen Layligii 1. Isku xirka labadan layli waxay gacan ka siin karaan ka qaybgalayaashu inay arkaan sida aragtiyadoodu, iyo aragtiyaha bulshadu maanta ugu xiran yihiin dhaqamada bulshada iyo in afkaarta laga qabo raga iyo haweenku si qoto dheer ugu qotomaan dhaqanka Soomaalida.

LAYLI 1D:

ASTAYNTA LAMAANAHA EE XAALADA SOOMAALIDA

Ujjeedo:

Ujjeedada layligan waa in la helo/furo aragtiyada dadka iyo ka biya-diidka fikirka lamaanaha. Kani waa layli faa'iido leh uguna dambeeya xiisada hordhaca ee lamaanaha-markay ka qaybgalayaashu ka hadlaan aragtiyada laga qabo lamaanaha iyo weliba tixraacyo dhaqameedyada la xiriira lamaanaha, waa muhiim in ka qaybgalayaashu ka hadlaan habab kale oo loo arko lamaanaha dhaqan iyo taariikhiyan. Tani waxay meesha ka saaraysaa shakiga dadku ka qabo ereygan, taaso salka ku haysa waaya-aragnimadoodii hore, sida siyaasado hore ee xukuumadaha.

Faalada fududeeyaha:

Ka qaybgalayaashu waraaq ha ku qoreen 3-5 dhacdooyin taariikhi ah oo wayn oo bedelay bulshada Soomaaliyeed 50kii sano ee tegey. Ka dib ha qoreen 3-5 dhacdo oo taariikhi ah oo hagaajiyey ka qaybgalka haweenka ama sinaanta lamaanaha tusaale, sharcigii Xeerka Qoyska Act ee 1975.

Ka qaybgalayaashu ha ka jawaabeen, kuna qor waraaq balaaran. Hag wadahadal kooban, adoo eegaya labadan arimood:

1. Sidee dhacdooyinka taariikhiga ah ooy sheegeen u bedelay ka raga iyo haweenka ee bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda?
2. Sidee dhacdooyinka xiriirka la leh lamaanaha saamayn ugu yeeshen sida dadku arko lamaanaha, iyo xiriirka u dhexeeya haweenka iyo raga?

SUAAL: WAA MAXAY CAQABADAHA HAYSTA KA QAYBGALKA HAWEEENKA?

LAYLI 2:

KALA SARAYSIIN IYO DOOD KU SAABSAN CAQABADAHA HAYSTA KA QAYBGALKA HAWEEENKA

HORDHAC:

Kaalimada raga iyo haweenku kaga jiraan bulshada wuxuu saamaynayaa awoodooda inay ka qaybgalaan hawlo dhowr ah iyo hanaanka go'aan- gaarida. Layligani wuxuu ka caawinayaa ka qaybgalayaasha inay cadeeyaan fikirkooda ku saabsan kaalimada raga iyo haweenka ee bulshada dhexdeeda, ka dibna eeg sida kaalimadani caqabad ugu yihiin ama u xoojin karaan ka qaybgal siman. Dumarka Soomaaliyeed waxay uga qayb qaataan karaan habab ka duwan tan raga. Layligani wuxuu muujin doonaa sida ragu ay awood ugu leeyihiin ama aysan ugu lahayn inay lug ku yeeshaan howlaha bulshada. Tan waxaa la raacin karaa layli ku saabsan isticmaalka wakhtiga, waxaana raacisaa wadahadal balaaran oo ku saabsan sida raga iyo haweenku si siman uga qaybgeli karaan hab-maamulka maxaliga, adoo ku daraya dood furan adoo isticmaalaya shaxda hubinta ee qaybta ka qaybgalka, oo goor hore aan ku soo maray buugan.

FAALADA FUDUDEEYAHA:

Qaybta 1aad

U qaybi ka qaybgalayaasha qoraalka kaalimada ka qaybgalka lamaanaha. Ka qaybgalayaashu ha buuxiyaan foomamka iyagoo ku salaynaya khibradooda xaalda Soomaliya, iyagoo muujinaya hadii kaalimadan si xoog leh ay ragu u hayaan, si xoog leh u hayaan haweenku ama u miisaaman yahay labada lamaane.

Qaybta 2aad

Qaybi qoraalka ku saabsan caqabadaha hor taagan ka qaybgalka. Weydii ka qaybgalayaasha inay tixgelin siiyaan liiska xanibaadaha dhici kara ee hor taagan ka qaybgalka, ku biiri inay dareemaan inay qoraan kuwa sida gaar ah uga jira xaalada Soomalida.

Weydii in ka qaybgalayaashu kala saraysiiyaan (mudnaan) caqabadaha raga iyo kuwa haweenka ka haysta dhinacyada ka qaybgalka ee lagu soo bandhigay qoraalka Kaalimada Lamaanaha ee Qaybta I. ka qaybgalayaashu ha asteeyeen kaalimada gaarka ah oo aan loo wada miisaanayn, ha asteeyeen caqabadaha muhiimka ah ee hor taagan in la miisaamo kaalimada lamaanaha.

Ka qaybgalayaashu ha fuliyeen layligan iyagoo ku salaynaya heerarka kala duwan ee ka qaybgalka ee looga wada hadlay qaybta fikradaha ee buugan. Tani waxay gacan ka siinaysaa inay ka fekeraan siduu ka qaybgalku uu u leeyahay qaabab, heerar iyo caqabado kala duwan. Waxay kaloo naga caawin doontaa in la soo bandhigo sida heerarka kala duwan ee ka qaybgalku isugu xiran yihiin midba kan kale raad ku leeyahay-tusaale, caqabadaha haweenka ka haysta inay helaan macluumaad wuxuu saamayn ku leeyahay hadii ama hadaysan awood u leedahay inay ka soo qaybgasho wadatashiga

Waa muhiim in hogaamiyuhu ogyahay caqabadaha ka soo food saara raga iyo haweenka inay si waxku ool ah uga qaybgalaan howlaha D/hoose, qorshaynta iwm, laakiin hogaamiyayaasha waa in si deg deg ah uga fekeraan waxa ay ka samayn karaan Dhoose si looga guulaysto isbedeladan ayna hubiyaan in haweenka iyo ragu si siman awood ugu yeeshaan inay ka qaybgalaan dhamaan heerarka kala duwan.

Iyadoo salka ku haysa kala saraysiinta mudnaanaha, ka qaybgalayaashu haka jawaabaan afartan su'aalood:

1. Si loo wajaho caqabadaha hor taagan ka qaybgalka ee laga asteeyey dhinac walba oo muhiim u ah ka qaybgalka, maxay yihiin isbedelada la doonayo inay ka dhacaan bulshada dhexdeeda?
2. Sidee macquul u yihiin isbedeladani?
3. Doorkee hogaamiye ahaan ka ciyaari kartaa inaad saamayn ku yeelato isbedeladan?
4. Maxay yihiin tabaha lagu wajihi karo caqabadahan adoo kordhinaya heerarka ka qaybgalka haweenka iyo raga ee D/hoose?

WARAAQDA DOORKA LAMAANAHA:

Dhinacyada ka qaybgalka	Waayo? Waa maxay caqabadaha hortaagan ka qaybgal	Miisaanka u Dhexeeya Raga iyo Haweenka
Go'aan Gaarida		
Maaliyada/Dhaqaalaha guriga		
Waxbarashada caruurta		
Qorshaynta qoyska (kala dheereynta ilmaha)		
Lahaanshaha xoolaha		
Raacida xoolaha		
Kaalmada :		
Xanaanada caruurta		
Quudinta qoyska		
Wax soosaarka beeraha ee cuntada qoysku isticmaalo		
Wax soosaarka cuntada oo lacag laga bixiyo		
Wadahadalada Beesha		
Beeraha		
Biyaha iyo nadaafada		
Iskoolka/waxbarashada		
Howlaha dhismaha ee deegaanka		
Deegaanka		
Xoolaha		
Wax yaalo kale		
Heer ka D/hoose		
Metelaada siyaasada		
Ka qaybgalka siyaasada		
Shaqooyinka dibada ka ah guriga		
Wershada- Ganacsiga		
Suuqa - ganacsiga yar yar		
Xafiiska		
Ganacsiga baaxada wayn		
Caafimaadka/kalkaalinta		

WARAAQDA CAQABADAHA HAYSTA KA QAYBGAL LAMAANE OO SIMAN

Tixgeli in caqabadahan hortaagan ka qaybgalka siman ee raga iyo haweenka inay salka ku hayaan kaalimada lagu muujiyey waraaqdii hore. Ku kordhi wixii caqabado kale oo aad u dareemayso inay ka maqan yihiin oo si gaar ah u khuseeya xaalada Soomaalida.

Caqabad walba, u kala saraysii (1-5) sida aad u malaynaysid inay u saamaynayso ka qaybgalka raga iyo haweenka ee D/hoose.

- 1= Maya Gebi ahaan
- 2 = In ayar
- 3 = Ilaa xad
- 4 = In yar
- 5 = Caqabada ugu weyn ee hortaagan ka qaybgalka

Caqabadaha hortaagan ka qaybgal loo siman yahay:	Siday muhiim ugu yihiin raga	Siday muhiim ugu yihiin
Waxbarasho rasmi ah la,aan		
La,aan tababaro khuseeya (muhiim ah)		
Ka qaybgal xadidan ee hawlaha bulshada/wadahadalka		
Fakhriga		
Nafaqa xumada		
Culays shaqo guri		
Ogolaanshaha socodku wuxuu u baahan yahay ogolaanshaha raga		
Ku dhaqanka diinta/wuxuu qofku rumaysan yahay		
Ku dhaqanka dhaqanka/caadooyinka		
U sinaan la,aanta qaanuunka		
Masuuliyadaha koriinka caruurta		
Wakhti la,aan		
Wax kale:		
Wax kale:		
Wax kale:		

U diyaari xaashidan noocyada kala duwan ee ka qaybgalka, sida looga hadlay qaybta aragtiyada ee buugan. Tusaale, sidee waxbarasho la,aantu saamayn ugu yeelanaysaa raga iyo dumarku inay helaan macluumaad, marka loo eego awoodooda inay ka qaybgalaan wada-tashiyada.

LAYLI 2 A: ISTICMAALKA WAKHTIGA EE RAGA IYO DUMARKA:

Hordhac:

Ujjeedada layligan waa in la muujiyo kaalimada kala duwan ee raga iyo haweenka, iyo culaysyada kala duwan ee ka haysta wakhtigooda maalin walba. Tani waxay ku tusaysaa yaa qaba hawshaa, wakhti intee le'eg ayay ku qaadataa, iyo halkay ka qabtaan howshaa.

Kani waa layli bud dhig u ah taxane layliyo ah 3 A-C. tani waxay kaa caawin kartaa inaad muujiso sida adeega D/hoose uu saamayn ugu leeyahay xadiga wakhtiga raga iyo dumarku ku lumiyaan hawl gaar ah maalin walba. waxay kala cadayn doontaa in la garto yaa qabta hawl, sidee gacan looga siiyey ama aan looga siin kaalimadooda maalin walba.

Faalada Fududeeyaha:

Waraaq cad, ku koobi garee baalka soo socda.

Ka qaybgalayaashu haka doodaan howlaha raga iyo dumarku qabtaan 24 saac. Hubi in la tiriyo shaqooyinka dheeraadka ah- waxaa jira wakhtiyo badan oo gaar ahaan dumarku ay hayaan in ka badan hal shaqo. (Tusaale. Haynta caruurta, cunto karinta iyo nadaafada).

Intaad u diyaarinaysid waraaqdii kooxda, ku bilaw su'aalo dhowr ah:

1. Imasay qaadataa hawl walba?
2. Maxay kaloo dadku hayaan? Raga iyo dumarku ma waxay hayaan hal hawl in ka badan wakhtigiiba?
3. Halkee dadku ka wadaan hawshay hayaan? Sidee halkay hawsha ka wadaan u tagaan imisayna ku qaadataa?
4. Maxay tahay adeegyada D/hoose ooy ka isticmaalaan meelahay shaqada ka hayaan?

Ha ka hadlaan ka qaybgalayaashu farqiga u dhexeeya labada (raga iyo dumarka). Ha eegeen ka qaybgalayaashu marka raga iyo dumarku ay leeyihiin wakhti fasax ah, sidee taasi ugu kala duwan yihiin, sideena saamayn ugu yeelanaysaa awoodooda ka qaybgalka hawlaha D/hoose. Waa muhiim sidoo kale in la tilmaamo meesha shaqadu ka dhacayso. Waxay u egtahay in layligani muujin doono in haweenku wakhti badan ku lumiyaan guriga, sidaa darteed aysan wakhti u helayn saaxada bulshada, iyo wada-hadalada bulshada. Haka hadlaan ka qaybgalayaashu sida tani u saamayso ka qaybgalka haweenka howlaha D/hoose marka loo eego raga.

Waxay sidoo kale noqon kartaa mid waxtar leh in ka qaybgalayaashu isu eegaan/isbarbar dhigaan shaxda isticmaalka wakhtiga- meelaha magaalooyinka iyo kuwa miyiga, kuwa tijaarta iyo qoysaska fakhriga ah, kuwa barakaca iyo kuwa martida loo yahay iwm, isbarbar dhiga idinkoo koox balaaran ah. Tani waxay muujin doontaa sinaan la,aanta u dhexaysa raga iyo dumarka, waxaa kaloo la arki doonaa arimo fara badan iyo kooxo bulshada ka mid ah oo loo baaahan yahay inuu tixgelin siiyo hogaamiyuhu. Tani waxay naga caawinaysaa sida agabka lamaanaha ku salaysan (loo isticmaalo) ay uga soo saarayaan arimo badan bulshada dhexdeeda, kuwaasoo aan gaar u ahayn haweenka keliya.

Anagoo tan ku salaynayna, haka hadleen ka qaybgalayaashu su'aalahan soo socda, hana ka doodeen tubo/habaha salka ku haya su'aasha labaad:

1. Sidee isticmaalka wakhtigu iyo culayska shaqadu saamayn ugu leeyahay sida raga iyo haweenku uga qayb galaan D/hoose?
2. Maxay talaabooyinka Golaha Deegaanka D/hoose uu qaadayo si loo yareeyo xadiga wakhtiga raga iyo dumarku ku lumiyaan shaqooyinka kala duwan maalin walba?

Haka hadleen ka qaybgalayaashu siday u dhici karto in ka qaybgalka howlaha kala duwani uu u siyaadinayo culayska shaqo- gaar ahaan haweenka. Ha doodeen ka qaybgalayaashu siday D/hoose dadka u hanan lahayd- gaar ahaan haweenka- oo aad looga qaybgeliyo adoo hubinaya inay helaan wakhti dheeraad ah maalin walba.

ISTICMAALKA WAKHTIGA EE RAGA IYO HAWEENKA:

HAWEENKA		RAGA	
6:00		6:00	
7:00		7:00	
8:00		8:00	
9:00		9:00	
10:00		10:00	
11:00		11:00	
12:00		12:00	
13:00		13:00	
14:00		14:00	
15:00		15:00	
16:00		16:00	
17:00		17:00	
18:00		18:00	
19:00		19:00	
20:00		20:00	
21:00		21:00	
22:00		22:00	
23:00		23:00	
24:00		24:00	
1:00		1:00	
2:00		2:00	
3:00		3:00	
4:00		4:00	
5:00		5:00	

LAYLI 3:**FIKIRKA LAMAANAHA EE KU SAABSAN HAB-MAAMULKA MAXALIGA AH****Hordhac:**

In hogaamiyayaasha si habsami ah ugu daraan arimaha lamaanaha hawlhooda, si lamaanuhu u noqdo qayb muhiim u ah hab-maamulka maxaliga, hogaamiyayaashu waa inay si cad u ogaadaan xiriirka u dhexeeya arimaha lamaanaha iyo hawlaha D/hoose. Hogaamiyayaashu waa inay ka ciyaaraan kaalin kaabi kara horumarinta D/hoose gebi ahaan. Ka qaybgalka siman ee raga iyo haweenku wuxuu ku yeelanayaa raad wax tar leh kaalintan uu hayo hogaamiyuhu. Horumarinta ka qaybgal siman wuxuu sidoo kale raad waxtar leh ku yeelanayaa gebi ahaanba horumarka deegaanka. Xildhibaanadu waa inay fahmaan sida baahiyaha kala duwan ee raga iyo haweenku ay raad ugu yeelanayaan habsamida shaqada D/hoose, iyo sida sinaanta iyo xoojinteeda ay wax uga tarayso in la hagaajiyo waxku-oolnimada iyo horumarka gebi ahaanba bulshada dhamaanteed

Fikrada laga leeyahay layligan waa in la isticmaalo weedho si loo helo in ka qaybgalayaashu fikradahooda uga dhiibtan sida lamaanuhu xiriir ula leeyahay shaqooyinka hogaamiyaha. Adoo kala saraysiinaya weedhahan, waxaan fikir ka heli karaa hadii ay ama aysan u malaynayaan inay muhiim tahay in lamaanaha shaqooyinkooda lagu daro, iyo sababta.

Howshan waxaa loo qaban karaa si qala-jebin ah isla markaana kooxuhu ka fekerayaan aragtiyada lamaanaha iyo sidoo kale layli qoto dheer marka loo tababarayo hogaamiyayaasha kaalimo gaar ah oo ay qaban doonaan TP PT . Layligan wuxuu gacan naga siin doonaa in ka qaybgalayaashu u "qaataan sida halbeeg" iyagoo tixgelinaya fikirkooda ku saabsan lamaanaha iyo xiriirka ay la leedahay shaqadooda.

Faalada Fududeeyaha:

Ka qaybgale walba waxaad u qaybisaa tiro kaarar ah oo ku saabsan weedhaha lamaanaha ee ku yaal qoraalka. Kuwani waa weedhaha la weydiin doono inay ka dhiibtan fikirkooda. Haday jiraan arimo kale oo D/hoose uga qaybgelin haweenka, ama lamaanaha ood dareemaysid in lagu daro, waxaad bedeli kartaa weedhahan.

Qaybi shaxda lamaanaha lagu kala saraysiiyo oo qaabta dheemanka u samaysan. Shaxdani waxay sahlayso in fududeeyuhu fahmo dhinacyada hogaamiyayaashu u malaynayaan inay macne leeyihin, iyo dhinacyada aysan macnaha u arkin. Tani waxay naga caawin doontaa in la sameeyo tabab lagu muujinayo sida fog ee lamaanuhu raad ugu leeyahay shaqooyinka hogaamiyayaasha.

Si cad ugu sharax ka qaybgalayaasha inaysan tani ahayn layli. Ka qaybgalayaashu yaysan ku qorin magacyadooda waraaqaha. Sharax ujeedada laga leeyahay layligan si aad u baarto sida lamaanu ugu xiran yahay hab-maamulka maxaliga.

Sharax ka bixi habka kala saraysiinta loogu samaynayo waraaqda kala saraysiinta qaabka dheemanka u samaysan. Waxaa la weydiin doonaa inay u isticmaalaan waraaqda inay kala saraysiiyaan/doortaan siday u waafaqsan yihiin ama uga soo horjeedaan weedhaha kala duwan ee aad iyaga u qaybisay. Hubi in ka qaybgalayaashu fahmaan in korka dheemanku tahay "si xoog leh ayaan u waafaqsanahay" iyo in dhanka hoose tahay "si xoog leh ayaan uga soo horjeedaa". Tani macnaheedu maaha inay ka soo horjeesan doonaan gebi ahaanba weedhahan, waxaa loola jeedaa inay noqoto aragtiyo kala duwan oo loo kala mudnaan siinayo weedhaha loo qaybshay.

² Layligan waxaa laga soo qaatay "Lamaanaha iyo Horumarka" ee Buuga Tababarka Lamaanaha ee Hay'ada Oxfam, Janet Seed et al, 1994

Waraaqdan waxaa loo sameeyey in ka qaybgalayaashu si kala duwan uga fekeraan fikradaha raga, haweenka, lamaanaha kuna saabsan D/hoose iyo howlaheeda. Jawaabahooda weedhahan kala duwan waxay naga caawinaysaa in la kala cadeeyo fikradaha ay hore uga qabeen lamaanaha oo raadka ku leh howlahooda, iyo sida kala duwan ee hawlahani raadka ugu yeelanayaan raga iyo haweenka.

Markay ka qaybgalayaashu akhriyaan weedhaha ayna u dhegiyaan nidaam kala saraysiin, fududeeyuhu waa inuu ku dhegiyaa derbiga kalana hadlaa sababaha ay u waafaqeen ama aysan u waafaqin weedho gaar ah. Derbiga oo lagu dhejiyo mudnaansiimaha, waxaa tusi kartaa hogaamiyayaasha isbedelada- meelaha kuwa badan oo iyaga ka mid ah aysan u waafiin weedho gaar ah, tusaale, waxaad hagi kartaa wadahalal lagu ogaanayo sababohooda ka dambeeya.

Wadahadalkan wuxuu ka caawinayaa ka qaybgalayaasha inay si wanaagsan u fahmaan sida lamaanuhu u khuseeyo dhinacyo kala duwan ee D/hoose, iyo sidoo kale inaad ka caawiso ay maanka ugu hayn lahaayeen lamaanaha markay shaqadooda ku jiraan. Waxaad natiijada u isticmaali kartaa inaad kooxda u diyaariso layliyo kale.

GQORAALKA WEEDHAHA LAMAANAHA:

A Barnaamij walba ooy bilawdo D / h o o s e w a x a a k a faa'iidaysanaya bulshadoo dhan, sidaa darted si toos ah ayay haweenku uga faa'iidaysanayaan. Hadaba waxaa loo baahan yahay in tashi gaar ah lala sameeyo haweenka	B Barnaamijyada D/hoose waa inay ku wajahnaadaan caawinta kuwa uga liita bulshada. Dumarku gaar ahaan haweenku waa liitaan sidaa darted waa inay helaan kaalmo gaar ah.	C Inkastoo dumarka Soomaliyed aysan u dhigmin raga, waa qayb ka mid ah dhaqanka Soomaallida, sidaa darted waa inaan la bedelin.	D Dhinacyada horumarka oo dhan waxay si kala duwan u saamaynayaan raga iyo haweenka.. sidaa darted waa muhiim inaan eegno hawlaha D/hoose, iyo siyaasada heeda siday u saameeyaan raga iyo haweenka
E Haweenku waxay maamulaan isticmaaka biyaha ee guriga. Sidaa darted haweenka waa in laga qayb geliyaa mashruucda adeega biyaha, hadii la doonayo inuu najaxo.	F Haday bulshadu ku hawlan tahay xornimo qaran, ama halgan dabaqadeed, sidaa darted tani waa inay mudnaan u noqotaa raga iyo haweenka labadaba. Waa carqalad iyo kala qaybin in si gaar diirada loo saaro baahiyaha haweenka	G Haweenku iyagaa masuul ka ah caafimaadka qoyska iyo horumarintiisa, maadaama ay yihiin hooyooyin iyo xaasas.. sidaa darted barnaamijyada D/hoose waa inay gacan ka siiyaan in haweenku caawiyaan qoyska oo dhan.	H Raga maadaama ay yihiin madaxa qoyska, waa inay masuul ka noqdaan metelaada haweenkooda. Sidaa darted dowladu meel uma hayso inay haweenka ka qaybgeliso. Waana inay joogaan guryahooda.
I Markay xaaladu xun tahay, ma awoodi kartid inaad u heshid wakhti aad kaga fekerto arimaha lamaanaaha	J Haday dumarku heli lahaayeen waxbarasho fiican, way gaari lahaayeen raga, awood badan bayna ku yeelan lahaayeen siyaasada iyo ga,aan gaarida.	K Shayga muhiimka ahi waa in la caawiyo dadka baahida qaba, ee maaha haweenka keliya.	L Ka qaybgal balaaran oo haweenku ku yeeshaan hawlaha D/hoose waxay ka dhigaysaa howlaha D/hoose mid habsami ah oo waxtar leh.
M Dhaqan walba, haweenku waxay ku xiran yihiin raga. Ujjeedada hawlahaan oo dhan waa in meesha laga saaro sinaan la,aantan iyo ku xirnaanshahan.	N H o r u m a r d h a b a h o o haweenku sameeyaan wuxuu ka dhigayaa haweenka kuwo awood u leh inay sameeyaan akhyaar iyo isbedel	O Waa ku adag tahay haweenka inay ka hadlaan raga dhexdiisa. Sidaa darted waa muhiim in la sameeyo qaab saamaxaya in la maqlo codka haweenka	

WEEDHO KU SAABSAN LAMAANHA IYO HAB-MAAMULKA MAXALIGA WARAAQDA KALA SARAYSIINTA (HABKA DEEMANKA)

Kaararka ayaa lagu dhejinayaa A ilaa P. fadlan ku qor xarfo ku haboon godadka dheemana ee hoos ku yaal. Fadlan ku qor hale eray sanduukh (god) walba..

1. Si xoog ah ayaan u waafaqsanahay: 1 kar
2. Si dhexe ayaan u waafaqsanahay: 2 kar
3. Yara waafaqsanahay: 3 kar
4. Mana waafaqsani, kamana soo horjeedo: 4 kaar
5. Waan yara diidanahay: 3 kar
6. Si meel dhexaad ah ayaan u diidanahay: 2 kar
7. Si xoog leh ayaan u diidanahay: 1 kar

SU'AAL: SIDEE LAMAANUHU U SAAMEEYAA HAB-MAAMULKA MAXALIGA?

LAYLIGA 4 A:

ISTICMAALKA WAKHTIGA, SILSILADA SINAAN LA,AANTA IYO D/HOOSE

Ujjeedo:

Ujjeedada layligan waa in dhigo ka qaybgalayaasha inay si hoose u fahmaan sida dhinacyada kala duwan ee adeega D/hoose (ama maqnaanshaha adeegaas) uu si kala duwan raad ugu yeelan karo raga iyo haweenka, iyo sida adeega D/hoose uu u bedeli karo silsiladan. Markuu layligan dhamaado, ka qaybgalayaashu waxay awood u yeelanayaan inay sharaxaan hababka kala duwan ee walaaca lamaanaha iyo arimaha raga iyo haweenku ay u saamayn karaan- si waxtar leh ama si dhib leh-hawlaha D/hoose.

Tani sidoo kale waa layli muhiim u ah inaad samayso layliga isticmaalka wakhtiga, si aad u muujiso sida isticmaalka wakhtiga maalintii uu u saamaynayo waxtarka (wax soosaarka) dadweynaha iyo D/hoose.

Fudeeye ahaan, waa inaad xooga saartaa isku xirnaanshahan soo socda:



Faalada Fududeeyaha:

Tusaale ka dooro layliga isticmaalka wakhtiga, ama isticmaal tusaalaha lagugu siiyey shaxda 1,2 (eeg boga xiga). Tusaalaha shaxda lagugu siiyey waxaad u isticmaali kartaa sidii hage, wuxuuna tusaale u noqonayaa ka qaybgalayaasha inay asteeyaan kuwa iyaga khuseeya.

Qaybta Koowaad:

Isticmaal waraaq weyn si aad u sawirto hal wareeg (qaabka shaxda 1). Ka qaybgalayaasha oo koox balaaran ah, haka hadlaan wareega dhexdiisa sida adeeg la,aanta- biyo gelinta- ay raad ugu yeelan doonto raga iyo haweenka bulshada, jiilkan iyo kan xiga labadaba (eeg tusaalaha)


Qaybta labaad:

Haka doodeen kooxdu sida adeega D/hoose uu u bedeli karo silsiladan-hagaajinta isticmaalka wakhtiga raga iyo dumarka, hagaajinta helida adeegyada, iyo sidoo kale ka qaybgelinta haweenka iyo raga hawlaha D/hoose.


Qaybta Sadexaad:

Ha eegeen kooxdu isbedelka silsilada, kana hadla sida ka qaybgalka haweenku raad ugu yeelan karo adeegyada kale ama arimaha D/hoose oo lagu sheegay giraanta (wareega)

SHAXDA 1:



SHAXDA LABAAD:



LAYLIGA 4B: WAXAAN DHISNAY BAR CAAFIMAAD QOFNA MA IMAN

Hordhac:

Anagoo samaynayna tusaale hore loogu isticmaaly buugan, waxaan eegaynaa dhacdadii D/hoose ku dhista bar-caafimaad iyadoo aan tixgelin siin ka qaybgal siman ee raga iyo haweenka.

Tusaalaha soo socda waa xaalad ka dhacday D/hoose ee X. Ujjeedada laga leeyahay layligan waa in hogaamiyayaashu ka fekeraan habkay dhaqaalaha u qoondeeyaan, una qorsheeyaan adeegyada iyo siday ugu isticmaali karaan falanqaynta lamaanaha si ay qoondaytooda uga dhigaan mid wanaagsan oo gebi ahaanba waxtar leh..

D/hoose ayaa ku guda jirtay inay go'aan ka gaarto u qoondayn dhaqaale arinka soo socda. Hanaan la tashi, odayaasha dhaqanka iyo culimada diinta ayaa looga yeeeray inay talo ka dhiibtaan. Kulanka waxaa ku jiray ganacsadayaal (maalgeliyayaal), iyadoo ay xadidnayd inay ka qaybgalaan dad metela bulshada ayaa kulunku dhacay- maadaama- maadaama kulanka loo qabtay odayaasha dhaqanka, haweenku ma iman, loomana sheegin kulanka. Go'aanka kulanka in la qabto waxaa la gaaray mar ay rag isugu yimaadeen dukaan shah.

Natijada habkan ayaa noqotay, in odayaashu goostaan in loo baahan yahay in D/hoose ay samayso adeeg caafimaad. Arrimahan waxaa lagu asteeyey kulankan waxay ahayd rabitaanka dadka ganacsatada ah (taking time off work for illnesses and treatment,) warbixinada sheegaya kor u kaca jirooyinka guud ahaan bulshada dhexdeeda. Waxaa la goostay in barta caafimaadka hada jirta aysan ku filayn inay wax ka qabato dhibaataada.

Sidaa darted ayay D/hoose go'aansatay inay qoondayso dhaqaale lagu dhiso bar caafimaad cusub. D/hoose ayaa cayintay goob iyadoo tashiyo samaysay waxayna heshiis la gashay kambani qandaraas inuu naqshada sameeyo oo uu dhiso barta caafimaadka. Bartii caafimaadka ayaa la furay, D/hoose waxay shaqaalaysay hal dhakhtar, laba kalkaaliye iyo sadex caawiyeyaal si ay u wadaan shaqada barta caafimaadka.

Bartii caafimaadka ayaa noqotay mid cidla ah, usbuucba usbuuca ka dambeeya. D/hoose way ogayd inay jiraan dad bulshada ka mid ah oo u baahan daryeel caafimaad, laakiin waa garan kari waayeen sababta loo imaan waayey..

Waxay kiraysteen urur madaxbanaan si uu u qiimeeyo mashruuca uuna sheego waxa khaldan. Ururkii ka ayaa sameeyey sahan wuxuuna la tashi la sameeyey ururada kale ee bulshada wuxuuna ogaaday arimaha soo socda:

- Xaqiiq ayay ahayd in ay jirtay xadi jirooyin aad u sareeya bulshada dhexdeeda. Siday doonta ha ahaatee, jirada waxaa sababayey fay-dhowr xumo. Tani waxay ahayd dhibta ugu way nee haysatay labadaba bulshada guud ahaan iyo baraha caafimaadka ee jiray.
- Heerka nadaafad xumo ee baraha caafimaadka jiray ayaa ahaa dhibaato ka joojisay dadka inay daawayn u aadaan barahaa gebi ahaanba.
- Tabi waxay sababtey in dadku aamino in baraha caafimaadku yihiin gobo jirooyin laga qaado intii ay noqon lahaayeen kuwo daaweeya.
- Gaadiid loo raaco goobahaa ayaa ahayd dhibaato, barta cusubina uma dhoweyn goobaha baabuurta laga raaco sidaa darted dhibaato ayay noqotay in la gaaro.
- Dhibaatooyin caafimaad oo ku badan bulshada dhexdeeda ayaa la xiriirey dhibaatooyin fayadhowrka dumarka dumarkuna kuma faraxsanayn inay adeeg caafimaad ka doontaan/weydiistaan shaqaale caafimaad oo rag ah.
- Sababtoo ah wakhti aan caadi ahay (habaysnayn) oo ku luma hawlo kale oo bulshadu ku hawlan tahay (gaar ahaan biyo dhaaminta), gaarista barta caafimaadka ayaa hoos u dhigay sharafta, kana dhigay midaan mudnaan u lahayn dadka jiran iyo daryeelayaasha labadaba.

- Ururka ayaa ka fuliyey hawl kooban bulshada dhexdeeda oo ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo adeegyadiisa. Waxayna ogaadeen arimahan soo socda;
- In kuwa ugu horeeya ee isticamaala goobaha daryeelada caafimaadka ay yihiin haween. Tan waxaa ku jiray haweenka bukaanka ah iyo haweenka u isticmaalayay adeegyadan iyagoo ah kuwo adeega siiya qaybaha kale ee bulshada(ooy ugu badan yihiin caruurta iyo dadka da'da ah) kuwaasoo bukaan ahaa ayna daaweyn jireen hawenku.
- Dhibta fayadhowrkuna waxay la xiriirtay biyo ku filan oo jirin, guud ahaan bulshada iyo barta caafimaadka iyo dayactir la,aan baraha caafimaad oo jira.

Faalada Fududeeyaha:

U qaybi dhacdadan ka qaybgalayaasha. Ha akhriyeen, kana jawaab su'aalaha ama wixii cadaymo ah ooy u baahdaan.

Hag wadahalal kooban oo ku saabsan ka qaybgelinta dumarka ee habkan (dhismaha barta caafimaad) iyo fashilaada, iyo khaladaadka D/hoose samaysay. Diiraada saar qoondaynta dhaqaalaha, waxku-oolnimada iyo waxtarka adeegyada D/hoose iyo siday u saameeyaan lamaanaha.

U qaybi kooxo yar yar, hana ka jawaabeen su'aalaha soo socda:

1. Maxaad, adoo ah D/hoose ka samayn lahayd arinkan?
2. Maxay yihiin talaabooyinkaad qaadi lahayd si aad u hagaajiso xaaladan?
3. Sidee tani xiriir ula leedahay kaalimada raga iyo haweenka?
4. Maxay ahaayeen qiyaasaha la sameeyey oo dhaliyey in la gaaro go'aankan?
5. Sidee u isticmaali lahayd xogaha laga helay warbixinta ururka?
6. Sidee u sugi lahayd in haweenka laga qaybgeliyo geedi-socodka (habka) mustaqbalka?
7. Sidee tani u saamaysay habsamida iyo waxtarka D/hoose iyo dhaqaalaha ay haysato?

Isu soo celi kooxaha koox walbana ha soo bandhigto aragtiyadooda ku saabsan sida D/hoose u hagaajin karto xaaladan. Hubi in koox walba ay muujiso dhinacyada la xiriira lamaanaha ee hawlgalka mustaqbalka la raaci doono.

Ha isu qaybiyeen kooxuhu qaybo yar yar mar labaad hana diyaariyaan warbixin kooban oo ku saabsan falanqaynta lamaanaha ee xaaladan, iyagoo isticmaalaya qaab-howleedka falanqaynta lamaanaha. Hana sameeyaan sidoo kale astaynta hawlaha, iyo galgalka khayraadka adoo ku xiriirinaya dhacdadan.

LAYLLIGA 4C:**AGAB: HELIDA SHAQADA IYO ASTAYNTA KHAYRAADKA****Hordhac:**

Astaynta howlaha ama sifayntoodu waa agab waxtar u leh markaad samaynayso falanqaynta lamaanaha. Astayntani waxay ka jawaabi doontaa yaa ka haya hawl bulshada dhexdeeda. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad ogaato sida howlaha D/hoose u saameeyaan raga iyo haweenka, yaa cad wayn ka heli kara adeeg gaara, sidoo kale wuxuu muujinaya sinaan la,aanta culayska shaqada, iyo sida siyaasadaha D/hoose gacan ugu gaysan karto in shaqada loo qaybiyo si siman. Qoraalka layliga labaad wuxuu si hoose u simaynayaa isagoo eegaya helida iyo gacan ku haynta arimaha bulshada dhexdeeda, mar kale arimahani waxay muhiim u yihiin marka la go,aaminayo danaha iyo raadadka barnaamijyada D/hoose. Xogtani waxay si gaar ah u khusaysaa hogaamiyayaasha markay yihiin Gorgoriyaal iyo go'aan gaarayaal³

Faalada Fududeeyaha:

U Qaybi ka qaybgalayaasha qoraalka astaynta howlaha, helida iyo gacan ku haynta .

Wada eega qayb walba oo qoraalka ah, ka qaybgalahaashuna ha cayimeen meelaha kala duwan ee howlaha kuseeya D/hoose. Hubi in lagu daro shaqaalaha wax soo saara ee rasmiga ama aan rasmiga ahayn. Haday tani noqoto caqabad, samee layliga kaalimada lamaanaha si uu hordhac ugu noqdo in laga fekerro noocyada howlaha kala duwan ee bulshada ayaa fududaynaysa in inay fahmaan.

Ka qaybgalayaashu ha isu qaybiyaan kooxo yar yar si ay u dhamaystiraan shaxda.

Isku keen kooxda si ay isugu eegaan ugana wada hadlaan shaxaha. Ha u barbar dhigaan heerarka shaqada dumarka iyo raga heerarka gacan ku haynta iyo u fududaanta.

Ka wada hadla sida adeega D/hoose uu u hagaajin karo xaaladan..

³ Labadaba qoraaladan soo socda waxay ku salaysan yihiin Mashruuca Horumarinta Kaalimada Lamaanaha: Buug daraasad xaalad, Overholt, Anderson, Cloud and Austin, eds..

BANDHIGA HAWLAHA

Lamaanaha/Da'da

Hawlaha Dhaqaalaha Bulshada	FA MA FC MC FE ME	Wakhtiga	Goobta
Waxsoosaarka badeecadaha iyo adeegyada 1. Xoolaha 2. Biyaha 3. Beeraha 4. Khatka 5. Daryeelka C/maadka 6. Waxbarashada 7. Ganacsiga yar yar (shaaha, khudaarta iyo Miraha)			

Dib u soo saarka iyo Dayactirka Cududa Dadka

1. Korinta caruurta
2. Xanaanada Dadka Da'da ah
3. Karinta cunada guriga loo isticmaalo
4. Biyo Dhaaminta
5. Wax soo saarka beeraha ee loo isticmaalo guryaha

Fure:

Lamaanaha/Da'da:

FA = Dhediga Wayn MA = Lab weyn FC = Dhedig ilmo ah

MC = Lab caruur ah FE = Dhedig Da' ah ME = Lab Da' ah

Wakhti:

Xadiga boqolkiiba ee loogu talagalay hawl walba, Maalin/Xiliga ku xiran

Goobta:

Guryaha, Qoyska, Fiilka, Suuqa, bulshada dhexdeeda iyo meelo dibada ka ah

BANDHIGA HELIDA IYO GACAN KU HAYNTA

Khayraadka	Hlida (L/DH) (M/F)	Gacan (L/DH)	ku	hayn
------------	--------------------	--------------	----	------

Dhulka
 Qalabka
 Shaqaalaha
 Wax soosaarka
 Abuurid (Dib-wax usoo saarid)
 Hantida
 Waxbarashada/Tababar

Faa'iido	Helid (DH/L) (M/F)	Gacan (L/DH) (M/F)	ku	hay
----------	--------------------	--------------------	----	-----

Dakhliga ka yimaada dibada
 Lahaanshaha Hantida
 Badeecadaha cadaan (alaab) ahaan loo haysto (In-kind goods)
 Waxbarashada

SU'AAL: SIDEE ARIMAHAN OO DHAN ISUGU KEENI KARNAA?

LAYLI 5:

DARAASAD XAALAD IYO JILID KAALIN:

DAYACTIR KAWAAN IYO GOOB HILIBKA LAGU IIBIYO EE D/HOOSE X

Hordhac:

Hawl:

U akhri ka qaybgalayaasha xaaladan soo socota. Hawsha laga doonayo waa inay kulan u qabtaan daneeyayaasha kala duwan si ay heshiis ugu gaaraan heshiis ay ku wada jiraan oo ku saabsan dayactirka kawaanka. Shaqadan waxay gacan kaa siinaysaa inaad muujiso danaha iyo mudnaanta kala duwan ee kooxaha kala duwan- gaar ahaan raga iyo haweenka- iyo sida xaaladaha kala duwan ay dhiiri gelin karaan ka qaybgalka haweenka ayna raad ugu yeelan karto nolasha haweenka markay shaqada ku jiraan iyo D/hoose guud ahaan.

Dulmar Xaalada.

D/hoose X ayaa samaysay adeeg Kawaan hilibka lagu qalo iyo suuq hilibka lagu gado oo ku yaal suuqa dhexe. Kawaanka gawraca waxaa la furay 1986, laakiin waxaa la xiray xiligii dagaalada sokeeye markaas qalabkii iyo alaabtii laga xaday dhismaha. Dib ayaa bulshadu u furtay oo u qalabaysay dagaalkii ka dib.

Walaac ku saabsan nadaafada ayaa soo baxday, walaac gaar ah maadaama ay ahayd kawaanka keliya ee D/hoose lahayd. Cabashadan waxaa keenay kuwa ka shaqeeya kawaanka gowraca iyo kan hilibka lagu iibiyo, waxaana baarid dheeraad ah ku dhaqaaqay NGO maxali ah. Tani waxay dhalisay in daraasadu soo jeediso in la dayactiro labada meeloodba, waxaa soo baxday in loo baahan yahay in si wanaagsan loo abaabulo haweenka, oo ka koobnaa tiro badan oo kuwa wax gawraca ama hilibka iibiya ah, iyo sidoo kale in laga faa'iidaysto iibka hargaha isagoo faa'iido dhaqaale u noqonaya goobta. Way cadayd in cashuurta laga qaado neef walba oo la qalaayo laakiin wanaagsan oo faa'iido u ah kawaanka looma maamulin.

NGO maxaliga ayaa kaalmo ka helay NGO caalami ah oo maalgeliya qayb ka mid ah hawlaha dayactirka. Siday doonto ha noqotee, hay'adii waxay diyaar u ahayd in gacan siiso marka la helo qorshe wada jira ah oo dhexmara D/hoose, hilib qalayaasha, isu taga hilib iibiyayaasha iyo NGO maxaliga, oo haweenka looga qaybgelinayo si siman.

Daneeyayaasha:

- Iskutaga hiliblayaasha (gawraca iyo iibiyayaasha)
- D/hoose
- Ururada Maxaliga
- Ururada Caalamiga ah

Doorka Bulshada:

Baahiyaha iyo mudnaanta hawlaha dayactirka waxay ahaayeen qorshe ka yimi bulshada. Way cadayd inay yihiin kuwa ugu haboon oo baahiyahooda u gudbin kara labadaba ururada maxaliga ah iyo D/hoose. Dumarka arintooda ka mid noqoshada ururada waxay ahayd mid hadal ah, sikastaba ha ahaatee wakhtigii uu mashruucu bilaamay, dumarku si wanaagsan umay abaabulsanayn, kalsoondooda kaalinka maamulka kawaankuna waa yarayd. Sababtuna waxay ahayd heerka waxbarashadooda oo hooseeyey.

Doorka D/hoose:

D/hoose ayaa gacan ka siisay kor u qaadida aqoonta ururka maxaliga- iyadoo diirada saaraysa kor u qaadida aqoonta haweenka ururka ku jira. Markii hore umay jajabnayn inay gacan siiyaan in la helo ka qaybgal balaaran oo haweenku ku yeeshaan maamulka ururka ilaa ay samaysay barnaamij kor u qaadida aqoonta haweenka oo gacan lagu siiyo.

Waxayna bixisay dhaqaale lagu daray mid ay bixiyeen ururka hiliblayaasha iyo ururada maxaliga ah si loogu daboolo hawlaha dayactirka. Intaa waxaa dheeraa, kambani qandaraas oo khibrad leh oo hawsha fuliya ayay D/hoose la xiriirtay.

Waxay kala heshiishay ururkii hiliblayaasha iyo ururkii maxaliga ahaaba maamulka iyo isticmaalka lacagaha laga ururiyo kawaanka si loo isticmaalo mustaqbalka. Kani waa arin wayn marka laga eego gacan ku haynta iyo qaybinta kharashaadka D/hoose. Ururkii ayaa ku war bixiyey in lacagaha D/hoose ka qaadato kawaanka ay awood u leeyihiin inay dayactir dheeraad ah ku sameeyaan kawaanka- aanay wax kaga qabtaan baahiyaha muhiimka ah sida biyaha iyo korontada aanay awoodi karaan inay dhaqaalaha si faa'iido u leh kawaanka hawl socodsiiintiisa u maamulaan.

Natiijadii Iskudaygan:

Hagaajin kawaanga gowraca- bulaacado la sameeyo si loo hagaajiyo nadaafada goobta.. Tani waxay dhalisay in wakhtigii ay qaadan jirtay nadaafada kawaanku uu badh ahaan dhimo. Mana jiri doonto inay hiliblayaashu lacag ku bixiyaan shaqaale nadiifiya goobta, maadaama ay haystaan biyo ay ku dhaqaan goobta oo bulaacada wasakhdu raacdo, tanoo lacag u dhigaysa TP PT

Ururka oo ah isu taga kuwa xoolaha qala iyo kuwa hilibka iibiya ayaa si wanagsan u abaabulmay hada marka la eegana haweenku waxay noqdeen kuwo aad isugu xiran aadna isugu kalsoon sababtoo ah tababarkii la siiyey haweenka ururka ku jira. Waxay dareemayaan in xiriirkooda D/hoose uu yahay mid wax ku ool ah, ayna si cad ula hadlaan baahida in hogaamiyayaasha iyo xildhibaanada la doortay ay masuul ka yihiin baahiyaha dadwaynaha.

Samaynta maqaarka iyo hargaha- horumarka kawaanka ayaa noqday in laga helo hargo tayo leh oo laga ganacsado oo ah kabiid dhaqaale oo faa'iido u leh kawaanka. Siday doonta ha noqotee, caqabad muhiim ah ayaa hadhay, oo ah in nalku uusan ku filayn kawaanka, uuna sababo hargaha oo dhaawac gaaro. Wadahadal ayaa u socda D/hoose iyo shirkada korontada si loo siiyo dab joogta ah kawaanka.

Caqabadaha iyo Xanibaadaha::

Dhaqaalaha- mid ka mid ah caqabadaha ugu way ee dhamaan daneeyayaashu cayimeen waa la,aan maamul, ama maamul xumo dhaqaalaha kawaanka soo gala.. Guud ahaan dhaqaali yari waa dhibaato caadi ah- oo soo food saartay NGO maxaliga, Iskutaga hilib layaasha iyo D/hoose. Waa cadahay in najaxaada isku daygani uu baahan yahay;

Baayiha iyo hawlaha mustaqbalka:

Nalka oo yar

Mid ka mid ah dhibaatooyinka kale ee kawaanka waa dabka oo ku yar. Tani waa dhibaato gaar ah oo muhiim ah maadaama kawaanka la isticmaalo habeenkii, koronto la,aantuna waxay sababaysaa dhibaato wayn, sidoo kale ay dhaawacayso hargaha oo laga samayn lahaa ganacsi faa'iido dhaqaale leh.

⁴ Shaqaalihii hore ee nadaafada kawaanka Ayaa 50% waxaa siiyey D/hoose, hiliblayaashuna waxay siiyaan 50%. Shaqaalihiiina waxaa laga hawl geliyey qaybaha kale D/hoose.

Biyo Joogto ah

Biyo joogto ah oo uu helo kawaanku sidoo kale muhiimad ayuu u leeyahay in bulaacaduhu hab wacan u shaqeeyaan. Iminka, hanta biyaha siisa kawaanka kuma fila inay daboosho baahiyahoo dhan. Wadahadal ayaa socdo si biyo tuubooyin ah loo geliyo kawaanka, si walba ha noqotee, wareer ayaa ka taagan in la ogaado cida masuulka ka ah biyo gelinta, D/hoose ama Wasaarada Biyaha iyo Macdanta

Qaboojiyaha

Maadaama araga iyo geela lagu qalo kawaanka aan la gadan maalilintiiba, baahi kale ayay cayimeen ururku oo ah in la helo qaboojiye. Qalabkan aad ayuu qaali ugu yahay in ururku ku soo gato lacagtuu ururiyo, sidaa darted wadahadal ku saabsan sidii lacagtaa loo ururin lahaa ayaa u socda NGO iyo D/hoose.

Faalada Fududeeyaha:

- U qaybi ka qaybgalayaasha kooxo:
- Madaxda D/hoose
- Madaxda NGOga
- Xubnaha ururka

U qaybi kaalin koox walba

Haka hadleen kooxuhu xaaladahan, hana u sameeyeen kooxdooda taxanayaal baahiyo iyo mudnaano ah. Koox walba ha cayimeen sida mudnaanahoodu ay u saamayn doonaan raga iyo haweenka D/hoose- labadaba isutaga dhexdiisa.

Kooxda isutaga hiliblayaashu ha sameeyeen kulan dhexmara raga iyo haweenka isutaga dhexdiisa si looga wadahadlo ka qaybgalka haweenka maamulka kawaanka iyo baahiyaha iyo mudnaanaha kala duwan ee laba koox.

Jila kulan dhexmaraya NGO maxaliga, Isutaga hiliblayaasha iyo D/hoose si heshiis looga gaaro dayactirka kawaanka.

Ka qaybgalayaashu haka hadleen:

1. Sidee tixgelinta baahiyaha haweenku ee kawaanka u saamaysay go'aan gaarida?
2. Sidee hawlaha dayactirku si kala duwan ugu saameeyeen raga iyo haweenka?
3. Iskaashi noocaa ah ayaa dhexmaray isutaga hiliblayaasha iyo D/hoose?
 - a. Sidee haweenku uga lug lahaayeen iskaashigan?
 - b. Sidee tani u raad ugu yeelatay habsamida D/hoose?

Doorka: Isu-taga qowracayaasha iyo kuwa hilibka iibsha

Kooxdaadani waxay ka kooban tahay labadaba raga iyo haweenka ka mid ah isutaga.. inkastoo shan meelood meel kuwa hilibka qala ay yihiin rag, iminka in ka badan kala bar guddigu waa rag. U kala qaybi ka qaybgalayaasha koox dumar iyo koox rag ay. Way wada shaqayn doonaan, laakiin waxay u baahan yihiin in la cayimo kuwa (raga iyo haweenka) ee ka mid noqonaya kooxda.

Tixgelin

- Waxaad u baahan tahay in arimo badan oo lagu hagaajinayo kawaanka, laakiin waxaa rabtaa inaad hubiso inaad marka la gorgortamayo (wadahadlayo) aad soo bandhigto marka hore mudnaanahaaga
- Waxaa jira hada, khibrad yar oo ay leeyihiin guddigu
- Waxaa ka jiro xiisadu u dhexeeya raga iyo haweenka ku jira isutaga kuna saabsan mudnaanaha raga iyo haweenka oo loo baahan yahay in heshiis laga gaaro

Ujjeeddadda Guud:

- Inaad hesho gacan ku hayn wayn oo ku saabsan maamulka dhaqaalaha soo gelaya kawaanka iyo kan ka baxaya
- In la hagaajiyo xaalada shaqada
- " In la hagaajiyo waxku-oolnimada qiimaha

Ujjeddoyinka haweenka isutaga ku jira:

- " In la hagaajiyo awooda haweenka kawaanka iyadoo kor loo qaadayo awoodooda ka qaybgalka arimaha maamulka
- " In la yareeyo isticmaalka wakhtiga (marka laga hadlayo nadaafada iyo dayactirka)

Doorka: NGO maxaliga**Tixgelimo:**

- Waxa laga doonayo NGOga Caalamiga ah
- Rabitaanka in la hubiyo xoojinta bulshada inay ka qaybqaataan hawlaha dayactirka

Ujjeedooyinka:

- In la horumariyo ka qaybgalka haweenka maamulka kawaanka
- In la hagaajiyo nadaafada kawaanka
- In la dhaliyo horumar dhaqaale iyadoo la dhiirgelinayo hawlaha kale
- In la dhiirgeliyo qaabab cusub oo iskaashi oo lala yeesho D/hoose

Doorka: D/hoose

Kooxdaadu waxay ka kooban tahay saraakiil ka socota D/hoose oo loogu tegey sidii loo dayactiri lahaa kawaanka.

Tixgelin:

- Khayraadka- gaar ahaan arimaha maamulka lacagta laga qaado isticmaalayaasha kawaanka
- Dhibaatooyinka la xiriira fayadhowrka ee bulshada iyo baahida loo qabo in la wajaho waxa sababaya iyo ubucdooda
- In mudnaan loo sameeyo adeegyada D/hoose bixi

Ujjeedooyin:

- In la dhiirgeliyo horumarka dhaqaalaha D/hoose
- In la sameeyo xiriir waxtar leh oo ku saabsan maamulka kawaanka
- In la hubiyo in dhaqaale ku filan loo qoondeeyo, lana sugo in la helo gacan ku haynta ugu saraysa ee dhici karta kuna saabsan lacagaha iyo kharashaadka

Layli- Lamaanaha iyo Jinsiga: Jawaabo

Jawaabta S waxaa loola jeeda Sex ; Lamaanaha waa	G
1. Dumarku ilmo ayay dhalaan, raguna ma dhalaan	S
2. Gabdhaha yar yari waa degan yihiin wiilashuna waa kuwo adag	G
3. Kuwa ugu badan ee qaatka iibsasho waa haween	G
4. Dumarku ilmaha naas ayay siin karaan, raguna masaasad ayuu wax ku siin karaa	S
5. Masaaridii hore, ragii guriga ayay joogi jireen oo waxtali jireen. Haweenkuna waxay qaban jireen hawlaha qoyska. Dumarka ayaa dhaxli jirey hantida, raguna ma dhaxli jirin.	G
6. Codka ragii wuxuu isbedelaa markay qaanaa-gaaraan. Dumarkana isma bedelo	S
7. Ragii xoolo ayay leeyihiin, dumarkuna xoolaha ayay raacaan	G
8. Dumarku sabur ayay leeyiin raguna sabur ma leh	G

GLOSSARY

ENGLISH	SOMALI
1. Accountability	- Xisaabtan - Xilkaa Saaran yahay
2. Action Plan	- Qorshe hawleed - Wax-qabad hawleed
3. Active Listening	- Dhegaysi feejigan - Dhegaysi Darban - Dhegaysi Mug leh
4. Alternative	- Kala Doorasho - Wax bedeli kara wax kale
5. Application	- Arji - Codsii - Adeegsi
6. Assessment	- Qiyaasid - Qiimayn
7. Authority	- Suldada - Awood xukun
8. Awareness	- Wacyi-galin - Ka war qab
9. Basic Education	- Wax-barasho Asaasi ah.
10. Beneficiary	- Dan ku Qabe - Ka faa'iidayste
11. Capacity Building	- Kobcin wax Qabad - Awood dhisid
12. Case Study	- Daraasad Xaaladeed
13. Check List	- Liis Hubineed
14. Civic	- Madani - La xiriira magaalo - Muwaadin
15. Collaboration	- Gacan siin - Wada shaqayn - Is Caawimid
16. Committee	- Guddi
17. Communicator	- Gaarsiye - Isgaadhsiye
18. Community	- Beel - Jaaliyad
19. Community Development	- Horumarin Beeleed - Horumarin Jaaliyadeed

20. Concepts	- Figrado - Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	- Figrada Metalaada Xilaalka
22. Conflict	- Is-qabad/Khilaaf - Iska hor imaad
23. Consensus	- Rayi la isku raacay - Aqbalaad figrad guud
24. Consequently	- Natiiyo - Cawaaqib
25. Constituency	- Dagaan Doorasho
26. Co-operation	- Iskaashi - Wada shaqayn
27. Council	- Gole
28. Councillor	- Xil-dhibaan Degaan - Xubin ka tirsan Gudiga degaanka
29. Counter Productive	- Maax Dumin - Lid ku ah
30. Criteria	- Cabirka wax lagu saleeyo - Qoddobbo wax lagu saleeyo
31. Critique	- Wax lagu Saleeyo
32. Decision Maker	- Goa'aamiye
33. Definition	- Qeexid
34. Delegation/Delegate	- Wefti - Ergo
35. Democracy	- Demoqraadiyad
36. Description	- Tilmaan - Sifo - Sharax
37. Dialogue	- Wada Hadal
38. Effective	- Wax ku ool - Sidii la rabay wax u tarid
39. Effective Leadership	- Hogaaminta wax ku oolka ah
40. Efficiency	- Wax qabad fiican leh
41. Elected Leadership	- Hogaaminta la doortay
42. Empower/Empowerment	- Awood siin - Awood u fasaxid
43. Enabler/Enable	- Awood siin - Karti siin
44. Essay	- Qormo - Maqaal
45. Ethical	- Hab-dhaqan
46. Evaluation/Evaluate	- Qiimayn
47. Evaluation Survey	- Qiimayn Sahan - Baaritaan qiimayneed
48. Exercise	- Layli
49. Facilitator	- Fududeeye/Sahle
50. Feed back	- War Celin - Jawaab Celin
51. Financier	- Masuul Maaliyadeed.
52. Gender	- Jandar
53. Goal	- Hadaf - Gool
54. Good Governanace	- Hab Xukun Wanaagsan - Hab Maamul

55. Government	- Xukuumad
56. Group Discussion	- Dood kooxeed
57. Guide	- Tilmaamid - Hage
58. Hand Book	- Tilmaan Bixiye - Tilmaame Bare
59. Human Resources	- Khayraadka Dadka
60. Human Settlement	- Degsiimooyinka Aadanaha - Degaamayn
61. Implementation	- Hirgalin
62. Information	- Fulin - Xog - Wargelin
63. Institution	- Haya'ad
64. Institution Builder	- Haya'ad Dhise
65. Institutionalise	- Haya'deeye
66. Instruction	- Amar - Wax barasho - Wax barid
67. Key Point	- Qoddobbo Muhiim ah. - Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68. Leadership Process	- Geedi socod Hoggaamineed
69. Learning	- Barasho - Wax Barasho - Tacliin Barasho
70. Learning Objective	- Ujeeddooyinka Barashada - Yoolka Barashada
71. Local Government/Authority	- Dawladda Hoose
72. Majority	- Aqlabiyad - Inta Badan
73. Management Process	- Geedi Socodka Maaraynta
74. Meeting	- Kulam - Shir
75. Minority	- Inta Yar - Laga tiro yar yahay
76. Minutes	- Hadal Qor - Hadal qoraal
77. Mission	- Ergo - Risaalo
78. Monitoring	- La socod - La saan qaad
79. Negotiation/Negotiator	- Wada Xaajood siiye - Wada Hadal siiye - Gorgoriye - Wada Xaajood siiye - Wada Hadal siiye - Gorgoriye
80. Networking	- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81. Organization	- Urur
82. Overseer	- Korjooge
83. Overview	- Dulmar/Guud Mar
84. Participants	- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha
85. Perception	- Faham/Dhugmo/Garasho
86. Performance	- Waxqabad/Fulin Hawleed
87. Perspective	- Ka eegid wajio kala duwan

88. Policy	- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad
89. Policy Maker	- Siyaasad Dejiye
90. Power Broker	- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade
91. Presentation	- Soo Bandhigid/Qadimaad
92. Proactive	- Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac
93. Process	- Geedi socod/Socodka
94. Questionnaire	- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah
95. Quorum	- Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo
96. Rational	- Maan-gal/Macquul
97. Reactive	- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug
98. Reference	- Tixraac/Raad raac
99. Reflection	- Ilay noqod/Humaag noqod
100. Resources	- Khayraad
101. Revenue	- Dakhli
102. Role Play	- Door-jelid/Door ciyaarid
103. Session	- Fadhi/Kulan
104. Shared Vision	- Aragti wadaag
105. Simple Majority	- Aqlabiyad hal dheeri ah
106. Simulation	- Iska yeelid/U ekeysiiin
107. Slums	- Buul caws/Carshaan/Isku raran
108. Solution	- Furdaamin/Xal
109. Stakeholders	- Daneeyayaal
110. Strategic Plan	- Qorshe istaratijiyadeed
111. Strategy	- Istaratijiyad/Tab/xeelad
112. Summary	- Soo koobid/Khulaaso
113. Symptoms	- Astaamo/ Calaamado
114. Systematic	- Habaysan/Nidaamsan
115. Technique	- Farsamo/Xeelad
116. Training Design	- Jaanjooyada/Tababarka/Naqshadeynta Tababarka
117. Training Material	- Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka
118. Training Need Assessment	- Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka
119. Transparency	- Wax qaris laa'aan
120. Transparent	- Qof aan waxba qarinaynin.
121. Unanimous	- Loo dhan yahay/Gedigood
122. Vision	- Aragti fog/Aragti dheer
123. Warm Up Exercise	- Iskulalayn/Qandhicin/Diiran
124. Workshop	- Aqoon Isweydaarsi
Priority two words	
125. Acknowledgment	- Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin
126. Administrative Fixes	- Adeegsi
127. Analysis	- Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil
128. Assignment	- Shaqo Mucayin ah
129. Assumption	- Maleyn/Si u qaadasho
130. Benchmark	- Bar qiyaaseed/Bartilnameed
131. Challenges	- Caqabad/Loolan/Hardan
132. Collective	- Kooxeed/Urureed/Wadareed
133. Conceptual frame work	- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik
134. Constructive	- Wax dhisid/Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	- Xikmad soo jireen ah
136. Corruption	- Musuq-maasuq/Laaluush.
137. Dilemma	- Laba daran mid dooro
138. Diversity	- Kala duwanaa/Kala gedisnaan
139. Encouraging	- Dhiiri-galin/Geesinimo galin
140. Fundamental	- Asal/Aasaasi

141. Identification	- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi
142. Individual Contribution	- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri
143. Infrastructure	- Dhismo-hooseed.
144. Input	- Wax galin
145. Insight	- Aragti Maskaxeed
146. Inspiration	- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid
147. Interaction	- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid
148. Judgement	- Xukun/Go'aan
149. Land Use Malaise	- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- Ujeeddo badan/Ujeedooyin kala du
151. Output	- Wax ka soo saarid
152. Potential Candidate	- Musharax dihin/Musharax iman kara
153. Pre-training	- Tababar horaad/Tababar hortiis
154. Priority	- Mudnaan
155. Problem Solver	- Furdaamiye/Xaliye dhib
156. Proficiency	- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh
157. Public	- Guud
158. Public Sector	- Qaybta Guud
159. Public Service	- Adeeg guud.
160. Regulation	- Xeer Hoosaad.
161. Self Governance	- Isxukumid.
162. Self Introduction	- Is-sheegid/Is-tilmaamid
163. Self Study	- Isbarid
164. Self Assessment	- Isqiyaasid/Isqiimeyn
165. Shrinking Resources	- Khayraadka sii yaranaya
166. Technical	- Farsamo/Farsamayn
167. Training Needs	- Baahi tababar
Priority three words	
168. Absolute Poverty	- Saboolnimo
169. Absolute	- Gebi-ahaan/Buuxda
170. Application Commitments	- Nidar-gal/Daba-qaad ballan
171. Bureaucracies	- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172. Caution	- Taxadar/Digniin
173. Density	- Cufnaan/Jirmiga shega
174. Environmental Degradation	- Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka
175. Equilibrium	- Dheeli-tir/Is-le'eg
176. Hawker	- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya
177. Implication	- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin aga fahmi karo wajiga qofka
178. Jurisdiction	- Haya'addaha Garsoorka
179. Legal Requirement	- Baahida Sharciyeed
180. Legislation	- Xeer Degin
181. Legitimate	- Sharci ahaan/Qaanuun ahaan
182. Matchmaker	- Isku aadiye wax isku habboon
183. Misinterpretation	- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan
184. Off-spring	- Farac
185. Optimistic	- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan kaeeg
186. Partnership	- Wadaag/Wada lahaansho
187. Pessimistic	- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188. Phenomena	- Ifafaalayaal
189. Professional	- Xirfadle/Xeel-dheeri
190. Recycle	- Sameyn celin/Dib u nacfi galin
191. Rules	- Qawaaniin/Xeer

192. Status Quo	- Xaalad taagan
193. Stimulation	- Xiiso galin/Fi-fircooni galin
194. To Wear Different Hats	- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa
195. Water Pollution	- Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196. Facilitator	- Fududeeye
197. Financier	- Masuul Maaliyadeed
198. Gender	- Jandar
199. Negotiator	- Wada hadal siiye
200. Overseer	- Korjooge
201. Policy Maker	- Siyaasad dejiye
202. Power Broker	- Awood wax ku Qabte
203. Institution Builder	- Haya'ad dhise
204. Leader	- Hogaamiye
205. Leadership	- Hogaamin

**Hab-xukunka Degaan ee Habboon iyo Barnaamijka
Tababarka Hoggaamineed**

Lamaanaha Oo Dumarku Ku Lug leeyihiin Hawlaha Habmaamulka Deegaanka



**Buug Xambaarsan Fikradaha Tababarka Iyo
Aalabadaha Hawlgaka**

**UN-HABITAT
TRAINING AND CAPACITY BUILDING BRANCH (TCBB)
AND REGIONAL OFFICE FOR AFRICA AND THE ARAB STATES
(ROAAS)**

P.O.Box 30030 GPO Nairobi 00100, Kenya
Telephone: 254-20-623120; Fax: 254-20-624266/7
E-mail: infohabitat@unhabitat.org; Website: <http://www.unhabitat.org>

EUROPEAN COMMISSION